INEE

# Jaangooyooyinka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdegga ah, Dhibaatooyinka Dabadheeraada iyo Dib-u-dhiska Hore

Shabakadda Ka Dhaxaysa Hay'adaha ee Waxbarashada Xaaladaha Deg-degga ah (INEE) waa shabakad caalami ah oo ay xubno ka yihiin in ka badan 1,400 oo shaqsiyaad iyo ururro (ilaa bishii Juunyo 2006) kuwaas oo ku wada shaqaynaya xayndaab bini'aadminimo iyo mid horumarineed si ay hubanti uga dhigaan xuquuqda waxbarashada marka lagu jiro xaaladaha deg-degga ah iyo dib-u-dhiska ka dambeeya masiibooyinka. INEE waxa ay ka shaqaysaa kor u qaadista iska warqabka iyo iyo xiriirka iyada oo abuuraysa, fududaynaysana iskaashi iyo xiriir waxtar leh oo dhex mara xubnaheeda iyo la-hawlgalayaasha kale ee muhiimka ah. Kooxda Hagidda ee INEE waxa ay bixinaysaa hoggaaminta guud iyo hagidda shabakadda; Kooxda Hagidda waxaa hadda xubnaheeda ka mid ah CARE, Christian Children's Fund, International Rescue Committee, Isbahaysiga Save the Children ee caalamig ah, Guddiga Qaxootiga ee Norway, (NRC), UNESCO, UNHCR, UNICEF iyo Bankiga Adduunka.

Koox-hawleedda INEE ee Jaangooyooyinka Ugu Hooseeya waxa ay fududaynaysaa sidii loo wada hirgelin lahaa Jaangooyooyinka Ugu Hooseeya ee INEE ee Waxbarashada Xaaladaha Degdegga ah, Dhibootooyinka Daba dheeraada iyo Dib-u-dhiska Hore. Koox-hawleedda INEE (2005-2006) waxa ay ka kooban tahay 20 urur oo waayo-aragnimo xeeldheer u leh waxbarashada marka lagu jiro xaaladaha dhibaatada (qalalaasaha) iyo dib u dhiska hore: Akadeemiyadda Horumarinta Waxbarashada, BEFARe, CARE India, CARE USA, AVSI, Catholic Relief Services, Foundation for the Refugee Education Trust, Fundacion Dos Mundos, GTZ, the International Rescue Committee , Wasaaradda Waxbarashada ee Faransiiska, Norwegian Church Aid, Golaha Qaxootiga ee Norwey (NRC), Save the Children USA, UNESCO, UNHCR, UNICEF, USAID, Windle Trust iyo World Education.

INEE waxa ay u mahadanaqeysaa in ka badan 22kii hay'adood, Macaahid, iyo urur ee taageerayey shabakadda ilaa markii la aasaasey. Liiska loo mahadanaqayo oo dhamaystiran waxa aad ka heli kartaa website-ka: www.ineesite.org.

INEE waxa ay u furan tahay dhammaan shaqsiyaadka iyo ururrada doonaya in ay xubin ka noqdaan ee hirgeliya, taageera oo u qareemeeya waxbarashada xaaladaha deg-degga ah iyo kuwa dib-u-dhiska. Shaqsiyaadka daneynaya waxa ay xubinnimadooda ka saxiixi karaan website-ka INEE: www.ineesite.org. Xubinnimada ujuuro la bixinayo iyo waajibaadba ma lahan.

Faahfaahin dheeri ah kala soo xiriir INEE
INEE Network Coordinator, coordinattor@ineesite.org
INEE Focal Point on Minimum Standards, minimumstandars@ineesite.org

INEE© 2004
Dib u daabicid INEE © 2006

ISBN 1-58030-034-0

Dhammaan xuquuqda waa ay dhowran tahay. Qoraalkan xuquuqdiisu waa ay dhowran tahay laakiin dib ayaa loogu soo saari karaa hab kasta haddii ujeeddada laga leeyahay tahay mid waxbarasho. Isticmaalka noocaas ah waxaa loo baahan yahay in loo helo oggolaansho rasmi ah laakiin caadi ahaan isla markiiba waa la bixiyaa oggolaanshaha. Haddii siyaabo kale loo minguurinayo ama dib loogu isticmaalayo daabacaado kale, ama turjumid ama filim ka sameyn, waa in marka hore oggolaansho qoraal ah laga helaa xuquuqda cidda ay u dhowran tahay.

Sawirada jeldiga kore ee buugga: The International Rescue Committee
Waxaa qaabeeyey isla markaana daabacay:

# Tusmada Buugga

# Hordhac

**1. Jaangooyooyinka ugu Hooseeya ee Qaybaha oo Dhami Wadaagaan:** ....................................................11
Ka qaybgalka Bulshada (Ka qaybgal iyo Kheyraad) ................................................................14
Lafagurka/falanqeynta (Daraaseyn, Wax ka qabasho, La socod iyo Qiimeyn) ...........................................20
Lifaaqa 1aad: Qaababka Daraaseynta .......................................................................................................29
Lifaaqa 2aad: Qorsheynta Xaaladda Degdegga ah : Liisto Hubineedda Lafagurka Xaaladda..........................30
Lifaaqa 3aad: Foomka Xog Ururinta iyo Qiimeynta Xaaladda .............................................33
**2. Gaaridda iyo Bay'ada Barashada** ......................................................................................................39
Lifaaqa 1: Liista Hubineedd Nafsaani-bulsho *Psychosocial*) ..................................................................................49
Lifaaqa 2: Liista hubineedd Barnaamijka Quudinta Dugsiga ............................................................................51
**3. Baridda iyo Barashada** ........................................................................................................................53
**4. Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Waxbarashada**.......................................................................63
Lifaaqa 1: Xeer Dhaqan Anshaxeedka.......................................................................................................70
**5. Siyaasadda Waxbarashada iyo Iskudubarididda** ............................................................................................71
**Dhejistyada**
Dhejiska 1aad: Ereybixinta ..............................................................................................................................79
Dhejiska 2aad:Hagaha Tixraaca iyo Kheyraadka .....................................................................................83
Dhejiska 3aad: Mahad-naqyada.............................................................................................................91
**Foomka jawaabcelinta**...............................................................................................................................95

Qoraallada dheeriga ah ee foomamka iyo liista-hubbineedda qiimeynta, iyo la xiriirinta Axdiga Bani'aadamnimada ee *Sphere* iyo qoraallada MSEE ee lala xiriirinayo Jaangooyooyinka *Sphere* iyo Habraacyada Waxbarashada Degaanka ee UNHCR, fadlan eeg http://www.ineesite.org/standards/msee.asp iyo/ama CD-ga MSEE, ee laga heli karo website-ka INEE.

# Jaangooyooyinka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Deg-degga ah, Masiibooyinka Dabadheeraada, iyo Dib u dhiska Hore

**Jaangooyooyinka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Deg-degga ah, Masiibooyinka Dabadheeraada, iyo Dib u dhiska Hore waa buug-gacmeed iyo sidoo kale balanqaad, kobcinteedana loo soo marey geeddi-socod dheer oo wada shaqayneed oo ah in shaqsiyaadka oo dhami- carruur, dhallinyaro, iyo dad waaweeynba – ay xaq u leeyihiin waxbarasho marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah. Waxa ay ku celinayaan arimaha udub dhexaadka u ah Mashruuca Sphere: taas oo ah in la qaado dhammaan tallaabooyinka suurtagalka ah si loo cirib tiro silica haysata bini'aadamka ee ka dhalata masiibo iyo iska-horimaad, iyo in dadka ay masiibadu saamaysay ay xaq u leeyihiin in ay ku noolaadan sharaf.**

**Guud Mar**

Dhammaan shakhsiyaadk waxbarasho ayaa ay xaq u leeyihiin. Xuquuqda waxaa lagu caddeeyay heshiisyo badan oo caalami ah iyo qoraallo (dukumiintiyo) ay ku jiraan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Bani'aadamka (1948); Heshiiska la xiriira Aqoonsiga Qaxootinimo (1951), Heshiiskii Jineefa (IV) ee la xiriira Badbaadinta Dadka aan Hubaysnayn Xilliyada Dagaalka; Heshiiska Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka (1966); Heshiiska Xuquuqda Carruurta (1989), iyo Xayndaabka Waxqabadka Golaha Waxbarashada Adduunyada ee Dakar (2000), Kobcinta Waxbarashada Loo Dhan yahay.

Waxbarashadu ma ahan xuquuq keliya, laakiin marka lagu jiro xaaladaha degdegga masiibooyinka dabada dheeraada iyo dib u dhiska hore, waxa ay bixisaa badbaadin jir ahaaneed, mid nafsaani mid garasho kuwaas oo noqon badbaadin kara nafta oo nooleyn karana. Waxbarashada waxa ay nooleysaa nafta iyada oo siinaysa meel nabad ah oo ay wax ku bartaan iyo sidoo kale aqoonsashada iyo gacan siinta qofka dhibaatadu saamaysay – gaar ahaan carruurta iyo dhalinta qaangaareysa. Waxbarashadu waxa ay ka fududaysaa saamaynta xagga iska hor-imaadyada iyo aafooyinka ay ku yeeshaan maskaxda iyada oo siinaysa dareen ah in ay xaaladdu caadi tahay, mid degenaansho, qaab-dhismeed iyo rajo gelin waqtiyada ay dhibaatooyinku jiraan, waxaana ay aasaas u noqotaa degenaanshaha dhaqaalaha mustaqbalka; waxbarashadu sidoo kale waxa ay badbaadin kartaa nafaha iyada iyo ka ilaalinaysa dhiig-miirashada iyo dhibaataynta, oo ay ka midka yihiin afduubidda, caruurta oo ay askar ka dhigtaan kooxaha dagaalamaya, iyo rabshadda jinsiga iyo galmoodka ku dhisan. Ugu dambayn waxbarashu waxa ay bixisaa aqoon iyo xirfado lagaga gudbi karo xilliyada masiibooyinku socdaan iyada oo loo sii marayo baahinta wararka ka badbaadidda miinooyinka; HIV/AIDS, ka hortagga, xalinta iska hor-imaadyada iyo dhisidda nabadda.

## Waxbarashada Xaaladaha degdegga ah

Sanadahan dambe waxaa kor u kacay wacyiga la xiriira baahida loo qabo barnaamijyada waxbarashada dadban iyo midda tooska ah marka ay jiraan xaaladaha degdegga ah. Malaayiin carruur ah, dhalin yaro, iyo dad waaweeyn ah ayaa ka faa'iidaystay dadaalka ay wadaan masuuliyiinta waxbarashada, iyo ururrada baini'aadminimada ee wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ahí. Markii waxbarashada awoodda la saaray waxaa soo if baxay laba arrimood oo muhiim ah.

1. Aqoonsiga in aan qofna uusan waayin xuquuqdiisa waxbarasho marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah iyo in aan waxbarashadu aaney 'bannaanka' ka ahaan karin doodaha laga leeyahay bani'aadminimada, waana in loo arkaa mid xagga hore kaga jirta waxqabadyada bani'aadminimo, iyo
2. in hammuun ballaaran loo qabo lana ballanqaado in marka lagu jiro xaaladaha adag la hubiyo, la helo laguna xisaabtamo waxbarasho ilaa heerka tayada ugu hooseeysa ee la aqbali karo gaarsiisan.

Iyada oo laga shidaal qaadanayo arrintaas, 2003 waxaa la sameeyay hawl-wadeenno si ay u fududeeyaan kobcinta jaangooyooyin ugu hooseeya oo heer caalami ee waxbarashada xaaladaha degdegga ah. Hindisaha hirgelintiisa waxaa ka loo xil saaray shabakadda ka dhaxaysa hay'adaha u xilsaaran waxbarashada xaaladaha degdegga ah (INEE), oo ah shabakad u furan oo ay ku jiraan hay'adaha Qaramada Midoobay, kuwa aan dawliga, deeq-bixiyayaal, xirfadlayaal, cilmi baarayaal, iyo shaqsiyaad ka socda dadyoowga aafoobay kuwaas oo ka wada shaqaynaya sidii ay hubanti uga dhigi lahaayeen xuquuqda waxbarashada xilliyada lagu jiro xaaladaha degdegga ah iyo dib u dhiska ka dambeeya aafooyinku. Shabakaddu waxa ay masuul ka tahay ururinta iyo fidinta hab-maamul wanaagsan, qalab, iyo cilmi-baaris kor u qaadaysa xuquuqda waxbarashada ee dadka ay saamaysay xaaladda degdegga ahí iyada oo loo marayo u qareemeyn iyo hubinta xog is weeydaarsi joogto ah oo dhexmara xubnaheeda iyo la-hawlgalayaasheeda. INEE sidoo kale waxa ay tilmaamaysaa waxa ka dhimman khayraadka loo baahan yahay iyo sidii loo heli lahaa khayraadka loo baahan yahay iyada oo loo marayo kooxda ay u xilsaareen xubnaha ururka INEE.

Jaangooyooyinkan ugu hooseeya ee caalamiga ah waxaa lagu soo bandhigay buuggan, kaas oo ah natiijadii ka soo baxday wada tashi ballaaran oo lagu sameynayey jaangooyooyinka ugu hooseeya ee waxbarashada xaaladaha degdegga ah. Marka laga soo Billaabo 2003 ilaa muddadii ka dambeysey iyada oo lala tashanayo dhinacyo badan oo arrintan danaynaya, hawl wadeennada INEE u qaabilsan jaangoooyooyinka ugu hooseeya waxa ay fududeeyeen kobcinta jaangooyooyin, tusayaal iyo qoraallada hagaidda kuwaas oo lagu cadeeyay heerka ugu hooseeya ee ay tahay in laga gaaro helitaanka iyo bixinta waxbarashada marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah ilaa iyo marxaladda dib u dhiska waqtiga hore. Tiirarka ugu muhiimsan ee geeddi-socodkan waxa ay ahaayeen wadatashiyo heer dal iyo mid gobol hoosaad iyo mid goboleed; wadatashiyo shabakadda internetka la adeegsanayo oo lagu kaydinayo xog-kaydiyaha hay'adda INEE; iyo isa sixidda jaallayaasha. Xogta lagu ururiyo weji kasta waxaa la ogaysiiyaa wejiga ku xiga ee geedi-socodka.

In ka badan 2,250 qof oo ka kala socda in ka badan 50 dal ayaa gacan ka geeystay soo saaridda jaangooyooyinka ugu hooseeya. Muddadii u dhaxaysay Jannaayo iyo Meejo 2004, Hawl wadeennada hay'adda INEE u qaabilsan Jaangooyooyinka ugu Hooseeya waxa ay agaasimeen afar wadatashi-gobeleed oo ay u kala qabteen Afrika, Aasiya, Laatiin Ameerika iyo, Bariga Dhexe iyo Yurub. 137-ka wakiil ee ka qayb galay wadatashi-goboleedyadaas waxaa ka mid ahaa wakiillo ka socdo dadyowga ay masiibooyinku aafeeyeen, ururro dowliga an ahayn oo waddani iyo caalamiba isugu jira iyo dawlado, hay'ado ka socda Qaramada Midoobay oo ka shaqeeya 51 dal. Intii aan la qaban wadatashi goboleedyada wakiilladu iyo xubnaha INEE waxa ay si wadajir ah isugu dubbarideen 110 wadatashi oo heer dal, mid caalami, iyo mid gobol-hoosaad oo ka kala dhacay 47 dal, kuwaas oo ra'yi, xog lagaga soo ururinayay wakiillo ka socdey ururro aan dawliga ahayn, dawlado iyo Qarammada Midoobay; deeq bixiyayaal; aqoon-yahanno; iyo in ka badan 1,900 oo qof - wakiillo ka ah dadyawga aafoobay, oo ay ku jiraan arday, macallimiin, iyo qaar kale oo ka shaqeeya waxbarashada. Wakiilladii ka qayb galay wadatashi goboleedyadii waxa sii wanaajiyeen jaangooyooyinkii, tusayaaashii, iyo qoraalladii hagadda ee lagu

soo sameeyey wadatashiyadii heerar qaran ilaa heer deegaan ahaa ee hore loo soo qabtey, Iyo weliba in ka badan 100 jawaabood oo lagu soo diray xog kaydiyaha INEE si ay u dejiyaan jaangooyooyinka ugu hooseeya oo heer goboleed ah. Geeddi-socodkii isa sixidda jaallayaasha la dhacdey xagaagii 2004 waxaa ku lug lahaa in ka badan 40 qof oo khubaro ah, kuwaas oo lafaguray, saxar-tiray, jaangooyin-goboleedyada kana dhigay jaangooyooyin caalami ah.

Jaangooyooyinka ugu hooseeya ee halkaa ka dhashey waxaa udub dhexaad u ahaa Heshiiskii Xuquuqda Carruurta (CRC), Shirkii Dakar ee waxbarashada loo dhan yahay (EFA), Xayndaab qorshe horumarineedka kun-guurada (MDG) iyo Mashruuca Sphere ee Axdiga Bani'aadminimada. CRC, MDG iyo EFA waxa ay cadeeyaan in cid kasta, oo ay ku jiraan dadyoowga ay masiibooyinku aafeeyaan, ay xuquuq u leedahay waxbarasho tayo leh. Buuggani waxaa loo adeegsadaa dadaallada lagu doonayo in lagu gaaro heerka la aqbali karo ee ugu hooseeya ee helidda iyo bixinta waxbarashada si xuquuqdaas loo dhamaystiro.

Axdiga Bani'aadmnimada iyo Jaangooyooyinka ugu Hooseeya ee Wax ka Qabashada Msiibooyinka ee mashruuca Sphere la qaadan karo marka wax laga qabanayo masiibooyinka ee ay 1997 bilaabeen koox ururrada gargaarka bani'aadminimada ka shaqeeya ee aan dawliga ahayn iyo Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta iyo Bisha Cas, waxa ay caddeynayaan xuquuqda dadka masiibooyinku aafeeyaan ay tahay in ay ka filaan hay'adaha gargaarka bani'aadminimada. Buugga Sphere waxaa ku jira Axdiga Bani'aadminimada, jaangooyooyinka ugu hooseeya ee qaybaha muhiimka ah ee biyaha, faydhawrka, haqab-beelka cuntada, nafaqada iyo cuntada gargaarka, maareynta hooyga iyo goobta la deggan yahay iyo adeegyada caafimaadka. Kama hadlayso adeegyada waxbarashada.

Axdiga Bani'aadamnimo waxaa lagu saleeyaa mabaadi'da iyo xeerarka sharciga caalamiga ah bani'aadamnimada, sharciga caalamiga ah ee xuquuqda bani'aadamka, xeerka qaxootiga iyo xeer hab-dhaqan anshaxeedka Laanqayrta Case ee Caalamiga ah iyo Dhaqdhaqaaqa Bisha Casi yo ururrada aan dawliga ahayn (INGOs) ee Gargaarka ka geysta Masiibooyinka. Axigu waxa uu qeexayaa mabaadi'da aasaasiga ah ee haga waxqabadka bani'adamnimada iyo waxaa uu mar labaad xaqiijinayaa xuquuqda dadyawga ay saameeyeen xaaladaha degdegga ahi u leeyihiin badbaado iyo gargaar. Sidoo kalana waxa ay adkaynaysaa xuquuqda ay dadka aafoobay u leeyihiin nolol sharaf leh. Axdigu waxa uu shaaca ka qaadayaa masuuliyadda xagga sharciga ee dawladaha iyo qaybaha dagaalllamaya ka saaran damaanad qaadka xuquuqda dadkka ee badbaadineed iyo mid gargaar. Marka masuuliyiinta arrintani khusaysaa aanay awoodi karayn amase aanay diyaarka u ahayn gudashada waajibaadkooda, waxaa ku khasab ah in ay u oggolaadaan hay'adaha gargaarka si ay u bixiyaan badbaadin iyo gargaar bani’aadamnimo (www.sphereproject.org).

## Goorta ay tahay in la adeegsanayo Jaangooyooyinka ugu Hooseeya ee INEE

Jaangooyooyinka ugu hooseeya ee waxbarashada xaaladaha deg-degga ah, masiibooyinka dabadheeraada, iyo dib u dhiska hore waxaa loogu talagalay in loo adeegsado wax ka qabadyada xaaladaha degdegga ah, waxaa kale oo suurtogal ah in looga faa’iideysto u diyaar garowga xaaladaha degdegga ah iyo u qareemeynta arrimaha bani'aadamnimada. Waxa ay ku habboon yihiin xaalado aad u kala duwan, oo ay ku jiraan masiibooyinka dabiiciga ah iyo iska hor-imaadyada hubaysan. Buugan dhexdiisa "Xaalad degdeg ah" waxaa loo adeegsadaa tibix daboosha labo arrimood oo bal-balaaran "masiibooyin dabiici ah" iyo "xaalado degdeg ah oo qallafsan", kuwaas oo hoos lagu qeexey[1]:-

---

1 Qeexidda waxaa laga soo qaatey International Save the Children Alliance, 2001

- Masiibooyinka dabiiciga ah waa ka mid ah, duufaanada, dhulgariirka, abaaraha iyo daadadka. Kuwa ka mid ah masiibooyinka dabiiciga ah sida dhulgariirku waxa ay dhici karaan iyaga oo aan digniin hore laga qabin, waxaana ay raad weyn ku reebaan dadka deggan aaggaas. Kuwa kale sida abaartu waxaa laga yaabaa in ay muddo si isa soo tarayso u soo kororto ayna saamayn taas hore la mid ah yeelato.
- Xaalado degdeg ah oo qalafsani waa xaalado uu "bani'aadamku abuuray", waxaana badanaaba sababa iska hor-imaadyada ama kacdoonada shacabka, kuwaas oo laga yaabo in ay ku sii biirto masiibo dabiici ahí. Xaaladuhu marka ay noocaan yihiin, nafaha, badbaadada, fayoobaanta iyo sharafta dadyowga ay khusayso ay halis geliyaan dhibaatooyin kala duwan, sida masiibooyina dabiiciga ah iyo kuwa dad sameeyga ah iyo iska hor-imaadyada hubaysan.

**Muddada**

Muddada ay tahay in la adeegsado jaangooyooyinka ugu hooseeyaa waxa ay si weyn ugu xiran tahay xaaladda markaas jirta. Waxa ay ku habboon yihiin xaalado degdeg ah oo kala duwan, marka laga bilaabo waxkaqabashada hore ee xaaladda degdegga ah ilaa laga gaaro wejiyad hore ee dib u dhiska, waxaana adeegsan kara dad/hay'ado kala duwan. Tusayaasha buuggani ma aha kuwo si guud xaalad walba, ama cid walba ugu habboon. Waxa ay ay qaadan kartaa maalmo, toddobaadyo, bilo ama sannadaba ka hor inta aanay lagu guusalaysan jaangooyooyinka iyo tusayaasha la cayimay. Xaaladaha qaar jaangooyooyinka ugu hooseeya waxaa lagu guulaysan karaa iyada oo aan loo baahan gargaar dibadeed. Marar kale waxaa laga yaabaa in ay lagama maarmaan noqoto in hay'adaha iyo mas'uuliyiinta waxbarashadu ay wadashaqeeyaan si loogu guulaysto. Marka la adeegsanayo jaangooyooyinkan iyo tusayaashan, waxaa muhiim ah in dhammaan kuwa ku lugta lihi ay ku heshiiyaan waqti go'an oo lagu fulin karo, natiijana laga gaari karo.

**Sida loo adeegsado Jaangooyooyinka ugu Hooseeya**

Waxaa hore usii jiray buugaag badan iyo qalabyo ay dejiyeen hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn kuwaas oo hagaya shaqaalaha waxbarashada xaaladaha degdegga ah iyo dedaallada xilliga hore ee dib u dhiska, kuwaas oo ka hadlaya dhinacyada kala duwan ee waxqabadyada barashada iyo kuwa nafsaaniga ah. Isla ururradan, iyo sidoo kale wasaaradaha waxbarashada iyo saraakiisha waxbarashada, ayaa dejiyay hagayaal iyo siyaasado tilmaamaya sida loo kobciyo, loona socodsiiyo barnaamijyo waxbarasho oo tayo leh. Buuggani ma ahan mid loogu talo galay inuu tilmaamo sida ay tahay in wax loo qabto mar walba. Taa beddelkeeda wuxuu bixinayaa tiro jaangooyayaasha ugu hooseeya, tusayaal muhiim ah iyo qoraallo hagideed ah oo hawlaha bini'aadamnimada ka tusaya dhinaca waxbarshada, marka laga bilaabo dejinta barnaamijyo waxbarasho, fulintoodooda iyo sii socodsiintooda iyo sido kale taageerada bulshada iyo dawladahaba. Jaangooyooyinka ugu hooseeya waxaa loo soo bandhigey shan qaybood, waxaana ay kala yihiin:

- **Jaangooyooyinka ugu hooseeya ee ay qaybaha oo dhami wadaagaan:** qaybtani waxa ay diiradda saaraysaa dhinacyada muhiimka ah ee ka qayb-galka bulshada iyo adeegsiga khayraadka deegaanka marka la dabakhayo jaangooyooyinka buuggani ka kooban yahay iyo hubinta in waxqabadyada waxbarashada xaaladda degdegga ahí ku salaysan yihiin daraasaad marka hore la sameeyo oo la raaciyay waxqabad ku habboon iyo la socod joogto ah iyo qiimayn.
- **Gaaritaanka iyo degaanka barashada:** waxa ay diiradda saartaa horumarinta fursadaha helitaanka waxbarasho iyo isku xirka kala dhexeeya waaxaha, tusaale ahaan, caafimaadka, biyaha, nadaafadda, cuntada gargaar ah/nafaqada iyo hoyga, si kor loogu qaado amniga iyo fayoobida jir, fikir iyo mid miskaxeedba.

- **Barid iyo barasho:** waxa ay diiradda saartaa arimaha muhiimka ah ee kor u qaad waxbaridiyo barasho taabogal ah: 1) manhaj, 2) tabobar 3)baritaan, iyo 4) daraasaad/qiimeyn;
- Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada: waaxdani waxa ay diiradda saartaa maamulka iyo maaraynta shaqaalaha goobta waxbarashada, oo ay ku jiraan shaqaalaynta, xulashada, shuruudaha shaqada, iyo kormeeritaan iyo taagero; iyo
- **Siyaasadda waxbarashada iyo isku-dubbarididda:** qaybtani waxay ay diiradda saartaa dejinta siyaasadda iyo ansixint, qorshaynta iyo fuinta, iyo isku-dubbarididda.

**Waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin jaangooyooyinka iyo tilmaamayaashu**

*Jaangooyooyinka ugu hooseeya* waxa lagu saleeyaa mabda'a ah in dadka ay masiibooyinku saameeyaan xaq u leeyihiin in ay ku noolaadaan sharaf. Waxa ay u caddeeyaan in heerka ugu hooseeya ee helidda iyo bixinta waxbarashoee ay tahay in la gaaro marka gacan la bixinayo gargaark bani'aadamnimo. Caadiyan waxa ay tayo-sheegayaal, waxaana ay loogu talogalay in ay ahaadaan kuwo guud oo degaan walba lagu dabikhi karo. Tusayaasha ugu muhiimsan ee jaangooye kastaa waa calaamado tusinaya in jaangooyadaas la gaaray iyo in kale. Waxa ay u shaqeeyaan qalab ahaan si loogu cabbiro iyo si la isku war gaarsiiyo raadka (ama maxsuulka) barnaamijyada iyo weliba geedi-socodka (ama hababka) la adeegsaday, ha noqdaan kuwo tayo-sheege ama tiro-sheege ah. Haddii aanay jirin tilmaamayaasha muhiimka ah jaangooyooyinika ugu hooseeyaa waxa ay la mid noqon lahaayeen oraaho ujeedo wanaagsan laga leeyahay ee ay adag tahay in la dhaqan geliyaa.
*Tilmaamaha muhiimka* ahi waxa ay cabbir u yihiin heerarka/qiyaasaha, waxaana ay noqon karaan kuwa khuseeya tirada iyo tayadaba. Waxa ay u shaqeeyaan sidii aalad lagu cabbiro raadka dariiqooyinka la isticmaalay iyo barnaamijyda la fuliyay. Iyaga la'aantood, heerarka/qiyaasuhu waxba kama ay duwanaadeen oraahyo niyad wanaag ku kooban, oo ay adag tahay in la fuliyo.
Cutub walba hagayaashiisu waxa ay xiriir la leeyihiin arrimo gaar ah oo ay tahay in diiradda la saaro marka jaangooyooyinka lagu dabakhayo xaalado kala duwan. Waxa ay talo ka bixiyaan kala mudnaansiinta arrimaha iyo la tacaalidda caqabadaha waaqiciga ah, sidoo kale waxa ay sharaxaaad ka bixin karaan arrimaha aan dhinac keliya loo badin karin (laba-labowga), arrimaha lagu kala fikrad duwan yahay, iyo dul-dulleeda ku jira aqoonta hadda jirta. Qoraallada hagiddu waxa ay la xiriiraan tilmaamayaal muhiim ah oo gaar ah, xiriirkaasna waxaa lagu calaamadiyaa qoraalka dhexdiisa. Tilmaamayaasha muhiimka ah waa in mar walba lala akhriyaa qoraallada hagidda ee ku habboon.

**Arrimaha dhex-yaalka ah**
Markii la samaynayay jaangooyooyinka ugu hooseeya, waxaa aad la isugu taxalujiyay in laga hadlo dhowr arrimood oo muhiim ah xiriirna la leh qaybaha oo dhan. Kuwaasi waxa ay la xiriiraan xuquuqda bani'aadamka iyo tan carruurta, jinsiga (sheddig/laboodka), xuquuqda ka qayb-galka ee dadka, HIV/AIDS, kala dhinaanta lixaadka iyo nuglaanshaha. Arimahan waxaa lala xiriiriyay jaangooyooyinka khuseeya, ee lagagama hadllin qaybo gooni ah.

**Qiyaasta iyo Xaddadka**
Jaangooyooyinka qaybaha kala duwani keligood isma taagaan ee waa ay isku wada xiran yihiin. Hase ahaatee, waxaa jira iska hor imaad aan la dafiri karin oo ka dhexeeya samaynta jaangooyooyin caalamiga ah iyo kartida loo lahaanayo in la dhaqangeliyo. Xaaladda kasta waayeheeda ayay leedahay. Sababtan awgeed, geedi-socodka caalamiga ee kobcinta loo adeegsaday samaynta jaangooyooyinku waxa ay hubanti ka dhigtay ka qayb-gal sal-

balaaran ee oo ay ka qaybgalaan shaqaalaha gargaarka, mutacalimiin, dawlado, mas'uuliyiin waxbarasho, bulshada rayidka ah, iyo dadyawga aafoobay ee ka yimid gobollo, wadamo iyo xaalado kala duwan.

Mararka qaarkood, xaaladaha ka jira meelo gaar ah ayaan oggolaanayn xaqiijinta jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha. Marka ay jirto xaaladda noocan ahi, farqiga u dhexeeya jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha ku qoran buugga iyo kuwa la gaaray waxqabad ahaan waa in sharraxaad laga bixiyaa, waxa sababay iyo sidoo kale waxa loo baahan yahay in la beddelo waa in la caddeeyaa.

Jaangoooyooyinka ugu hooseeya ee INEE ma xallin doonaan dhammaan dhibaatooyinka waxkaqabadyada waxbarashada; haseyeeshee waxa ay siiyaan aalad (tool) hay'adaha gargaarka, dawladaha, iyo dadyowga deegaanka si ay kor ugu qaadaan waxtarka iyo tayada gargaarkooda waxbarasho, iyo in ay isbeddel la taaban karo ku sameeyaan nololaha dadyawga ay aafeeyeen masiibooyinku.

# *1.* Jaangooyooyinka ugu Hooseeya ee Qaybaha oo Dhami ay Wadaagaan

## Hordhac

**Cutubkani waxaa uu sharraxayaa lix jaangooyo hab-raac oo tiir udub dhexaad ah mid kasta oo ka mid ah qaybaha uu buugganii ka kooban yahay. Jaangooyooyinkaasi waa 1) Ka qayb-gal bulshada 2) Khayraadka Maxalliga ah 3) Daraaseynta Hore 4) Istaraatijiyadda wax-ka-qabashada 5) la socoshada 6) Qiimaynta. Waxaana loo bandhigey laba qaybood oo lagu kala magacaabo: Ka qayb-galka Bulshada (Ka Qayb-gal iyo Khayraad) iyo Falanqayn (Daraasayn, Wax-ka-qabasho, la socosho, iyo qiimayn). Marka la adeegsado jaangooyooyinka halkan lagu sharraxay, qoolooyinka ka shaqeeya gargaarka**

**bani'adamnimada iyo xubnaha bulshadu waxa ay taageeraan ka miro dhalinta jaangooyooyinka iyada oo laga fiirinayo dhinacyada Gaaritaan iyo Degaanka barashada, Barid, iyo Barasho, Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Waxbarashada, iyo Siyaasad Waxbarasho iyo Iskudubbarid.**

### Xiriirada kala dhexeeya sharuucda caalamiga ah

Qof walba waxa uu xaq u leeyahay in uu sharaf ku noolaado iyo in la ixtiraamo xuquuqdiisa bani'aadamnimo, oo ay ku jirto xuquuqda waxbarasho. Hay'adaha gargaarka bini'aadamnimada waxaa xil ka saaran yahay in ay gargaarka u fidiyaan si aan khilaafayn xuquuqda aadanaha, oo ay ka mid yihiin xaqa ka qaybgalka, kala faquuqid la'aanta iyo xogta, si waafaqsan baaqa xuquuqda bini'aadamka ee caalamiga ah, sharciyada bani'aadamnimada iyo kuwa qaxootiga. Axdiga Bini'aadamnimada ee Mashruuca Sphere iyo *Xeer Habdhaqan Anshaxeedka ururka Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo kan Bisha Cas, Ururrada aan dowliga ahayn (NGOs) ee ka shaqeeya wax-ka-qabashada masiibooyinka*; hay'adaha bini'aadamnimadu waxa ay ballan qaadaan in ay la xisaabtami karaan dadka ay doonayaan in ay u gargaaraan. Jaangooyooyinka la Wadaagaa waxa ay soo koobayaan mas'uuliyadaha ururrada iyo shaqsiyaadka marka ay bixinayaan badbaado iyo gargaar.

### Muhiimadda ay leeyihiin jaangooyooyinka qaybaha oo dhan ka dhexeeya

Waa lagama maarmaan in marka hore la akhriyo waaxdan ku saabsan Ka Qayb-galka bulshada iyo Falanqaynta inta aan loo gudbin qaybaha farsamada ee ku habboon, maaddaama jaangooyooyinka halka lagu muujiyay ay soo koobayaan nidaamka lagu saleeyay jaangooyooyinka. Soo ururinta iyo falanqaynta xogta waxbarashadu waa kuwa muhiim ah marxalad kasta oo degdeg ah oo lagu jiro. Xaaladdu (masiibadu) marka ay bilowga tahay waxaa loo baahan yahay khayraad, baahida jirta iyo waxyaabaha dhimman waa in la ogaadaa si loo dejiyo barnaamijyo, khayraadka la haystana si habboon loogu jiheeyo.

Barnaamijyada waxbarashda xaaladda degdegga ah ee taabogalka ah ee ay tahay in ay buuxiyaan baahida dadka masiibooyinku aafeeyaan waa in lagu saleeyaa fahamka xaaladda taagan. Daraaseynta hore waxaa lagu lafa gurayaa nooca masiibada, iyo sida ay dadka u saamaynayso. Kartida/tabarta dadka waxyeeladu soo gaadhay iyo khayraadka la hayo waa in la ogaadaaa iyada oo isla markaasna la dersayo baahidooda, nugaylkooda iyo wixii ka dhimman adeegyada muhiimka ah. Si loo hubiyo waxtarka iyo hufnaanta barnaamijyada, daraasaynta waxbarashada ee xaaladda degdegga ah waa in aan laga qayb-gelin dadyawga ay masiibooyinku aafeeyaan keligood, ee waa in ay qayb ka ahaadaan dawladaha hoose, iyo hay'adaha gargaarka ee qaabilsan dhinaca waxbarashada iyo dhinacyada kalaba. Daraasaadku waa in ay tixgeliyaan waxbarashada tooska ah iyo ta dadban ee dhammaan dadyawga kala duwan ee masiibooyinku aafeeyaan. Waxbarashada looma tixgelin karo mid ka go'doonsan kuwa kale, ama ka go'doonsan dhaqaalaha, diinta, caadooyinka, dhaqannada bulshada, siyaasadda iyo arrimaha nabadgelyada, farsamooyinka la qabsiga, ama wixii is beddel ah ee la filaayo mustaqbalka. In la lafo guraa waxayaabaha masiibooyinka sababa iyo waxyeelooyinkoodaba waa arrin aad u muhiim ah. Haddii aan dhibaatadaa la ogaan, lana fahmin waa ay adkaan doontaa, haddiiba aanay suurtogal noqon waayin, in sidii ugu habbooneyd wax looga qabto.

Wax-ka-qabashadu waxa ay ku xiran tahay arrimo dhowr ah, oo ay ku jiraan awoodda ururka, qaybta uu waayo-aragga ku yahay, xaddidnaanta miisaaniyadda, aqoonta uu u leeyahay gobolka ama xaaladda, iyo khataraha nabadgelyo ee shaqaalaha iyo dadka waxbaranaya. Jaangooyooyinka wax-ka-qabashada ee halkan lagu sharxay waxaa loo habeeyay si ay u caddeeyaan "kuma ayaa qabanaaya, wax sidee ah, iyo goorma". Marka la go'aansado wax-ka-qabashada ku habboon, hab-bartilmaameed-ka waa in la sameeyaa, kaas oo u suurto gelinaysa hay'adaha awoodda u leh in ay u siiyaan gargaar si aan eex iyo takoor toonna lahayn iyada oo la eegayo keliya baahiyaha jira.

Hababka lagula soconayo waa in la dejiyaa marka ugu horreysa ee hawsha la bilaabayo si wixii horumar ah ee la gaaro si joogta ah loogu cabbiro, iyada oo la barbar dhigayo ujeeddooyinkii iyo in si joogto ah loo hubiyo in barnaamijku (waxqabadku) uu la jaanqaadayo xaaladaha is beddelaya. Qiimayn la sameeyo inta hawsha lagu dhex jiro ama marka ay dhammaato, ayaa go’aamisa waxtarka guud ee barnaamijka waxaana ay cayintaa casharada ay tahay in la barto si kor loogu qaado waxtarka barnaamijyada kuwan la midka ah ee mustaqbalka. Kuwa danaynaya iyo kuwa baranayaaba waa in ay si ballaaran ugu lug lahaadaan geedi socodka qiimaynta. Geedi socodka, waxyaabaha ay ka kooban tahay iyo natiijooyinka ka soo baxa la socodka iyo qiimaynta waa in ay noqdaan kuwa daah furan, si wayn loogu bandhigay ka faa'iidaystayaasha iyo ciddii kale ee danaynaysa oo dhan, iyada oo aan marnaba gorgortan laga galayn nabadgelyada dadka hawsha ku lugta leh. Xaaladaha qaar, xogtu waa mid siyaasad ahaan dhaqan ahaanba xaasaasi ah, sidaa awgeed waa in loo maareeyaa si taxadar ku jiro.


Taabogalnimada barnaamijyada waxbarashada xaaladda degdegga ah ee bani'aadamnimo waxa ay ku xirnaan doontaa in si ballaaran oo loo fahmo dadka aafoobay iyo firfircoonida ay kaga qayb-qaataan barnaamijyada loo dejinayo. Ereyga "ka qayb-gal bulsho" waxaa loola jeedaa geedi socodka (wadiiqada loo marayo) iyo waxqabadyada u ogolaada in xubnaha dadyawga aafoobay la maqlo, awooddooda la dhiso si ay qayb uga noqdaan geedi socodka go'aan qaadashada, iyo in loo suurtogeliyo in ay tallaabooyin toos ah ka qaadaan arrimaha la xiriira waxbarashada. Kuwani waa heerarka kala duwan ee ka qayb-galka: ka qayb-gal maqaarsaar ah/magac u yaal ah, la tashi iyo ka qayb-gal buuxa. Maadaama inta badan ay adag tahay ka qayb-gal buuxa in lagu guulaystaa marka loo eego xaaladaha degdegga ah ee aynu ku shaqayno, la tashigu waa in uu ahaadaa heerka ugu hooseeya ee la higsanayo marka wax laga qabanayo waxbarashada xaaladaha degdegga ah, iyo in loo dhammaado iyo ka qayb-gal buuxa ayaa ah yoolka la higsanayo.

Waayo-aragnimadu waxa ay ina tusinaysaa in ka qayb-galka maqaarsaarka ahi uu noqonayo fursad la dayacay, waxtar aanu u lahayn bixinta barnaamijyo tayo leh oo mudda dheer socda. Ka-qay-galka dadka masiibooyinku aafeeyeen – oo ay ku jiraan dadka nugul (jilicsan), ee hoos lagu soo koobay – daraaseynta, habeynta, fulinta, iyo la socodka wax-ka-qabashada xaaladaha waa in la gaarsiiyaa halka ugu sarreysa si loo hubiyo ku habboonaanta iyo tayada dadaal kasta oo masiibo wax lagaga qabanayo. Ka qayb-galka firfircoon ee bulshadu waxay uu fududeeyaa ogaanshaha baahida gaarka ah ee waxbarasho iyo istaraatijiyadda ku habboon ee lagu gaari karo. Taas waxaa dheer, ka qayb-galka bulshadu waxa uu noqon karaa xeelad loo adeegsado ogaanshaha iyo helidda khayraadka gudaha ee bulshada lafteedu leedahay, in meel dhexe la isugu yimaaddo iyo in la taageero barnaamijyada waxbarashada. Ka qayb-galka bulshadu waa in uu ahaadaa mid dhab ah, marba-marka ka dambaysa sii kordhaya, joogtana ah, kartida dhisa, isla markaana uu mar walba wax ku sii daraa dadaalladii hore u jirtay.

In uu jiro hab ay cilmiga iyo xogaha isku waydaarsadaan dhammaan kuwa ku lug leh wax ka qabadka masiibooyinku ayaa aasaas u ah in lagu guulaysto in isku si loo fahmo dhibaatooyinka iyo in la sameeyo isku duwid waxtar leh oo hay’adaha dhexdooda ah. Nidaamyo jaango'an iyo farsamooyin lagu soo ururiyo, laguna lafa guro waa in la dejiyaa. Tani waxa ay suurtogelin doontaa in xogaha si fudud loo diiwaan geliyo, la wadaago, iyo in la faafiyaba.

- ***Jaangooyooyinka ugu hooseeya*:** kuwani waa kuwo caadiyan tayo-sheegayaal ah, waxaana ay cayimaan heerka ugu hooseeya ee ay tahay in la gaaro marka wax laga qabanayo dhinaca waxbarashada.

- ***Tilmaamayaasha muhiimka ah*:** Kuwani waa calaamado tusinaya in qiyaastii la gaaray iyo in kale. Waxa ay sahlaan hab loo cabbiro, loona sheego raadka ama natiijada barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raaca iyo farsamada la adeegsaday. Tilmaamayaashu waxa ay noqon karaan tayo-sheegeyaal iyo tiro-sheegayaalba.
- ***Qoraalada hagidda***: kuwani waxaa ku jira baro mucayin ah oo ay tahay in tixgelin gaar ah la siiyo marka lagu dabakhayo Jaangooyooyinka, iyo tilmaamayaasha xaalado kala duwan, hagidda la tacaalidda dhibaatooyinka waaqiciga ah, iyo ka talo bixinta u kala hor marinta arrimaha sida ay u kala muhimsan yihiin. Waxaa kale oo ku jiri kara arrimo aad u xasaasi ah oo la xiriira jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha, iyo sidoo kale qeexidda arrimaha lagu wareero ama kuwa is burinaya, ama dulduleelada ku jira aqoonta arrintan loo leeyahay. Lifaaqa 2aad waxa raacaya liisto loo doortay tixraac, taas oo tilmaamaysa ilihii laga soo kala qaatay xogta guud iyo tan farsamo ahaaneed ee la xiriirta waaxdan.




## Lifaaq 2aad: Tixraacyo,iyo Ilo hagaya Qaybta khusaysa Ka Qayb-galka Bulshada

## Ka Qayb-galka Bulshada Jaangooyada 1aad: Ka Qayb-gal

**Xubnaha ay saamaysay xaaladda degdegga ahi waxa ay si firfircoon uga qayb-qaataan daraasaynta,qorshaynta, fulinta, la socodka, iyo qiimaynta barnaamijyada waxbarashada**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Bulshada ay xaaladda degdegga ahi saamaysay, iyada oo u sii maraysa xubnaha iyaga metala, ayaa ku lug leh kala-hormarinta, iyo qorshaynta waxqabadyada waxbarashada si loo hubiyo waxtarka gudbinta waxbarashada (eeg qoraallada hagidda 1-5)
- Carruur iyo dhallinyaro ayaa ku lug leh kobcinta iyo fulinta barnaamijyada waxbarasho (eeg qoraalka Qoraalka Hagidda 6)
- Guddida Waxbarashada Bulshada waxa ay abaabulaan shirar ay ku ogaanayaan waxqabadyada waxbarashada iyo maaliyaddoodaba (eeg qoraalla hagidda 7)
- Waxaa jira fursado tababareed iyo kuwa kor loogu qaadayo awoodda xubnaha bulshada, oo ay ku jiraan carruurta iyo dhallinyaradu si ay u maamulaan waxqabadyada ku waajahan waxbarashada (eeg qoraal Qoraalka Hagidda 8)

### Qoraallada hagidda

1. ***Ka qayb ahaanshaha bulshada ee barnaamijyada waxbarashada***: marka aynu ka hadlayno jaangooyooyinka ugu hooseeya, ereyga "guddig waxbarashada bulshada" waxaa loola jeedaa guddi loo aasaasay in ay tilmaamaan baahiyaha waxbarasho ee bulshada ayna wax ka qabtaan, iyada oo la adeegsanayo wakiillada ka kala yimid waalidiinta iyo/ama ururka waalidiinta iyo macallimiinta, ururada wadaniga ah, ururada bulshada rayidka ah, ururada bulshada iyo dhallinyarada, iyo ururada haweenka, iyo wixii la mid ah iyo weliba macalimiinta iyo kuwa waxbaranaya (marka ay ku habboon tahay). Guddiga waxbarashada bulshadu waxa uu lahaan karaa guddi hoosaad kuwaas oo xubnihiisu ay ka kala socdaan qaybaha uu guddigu ka kooban yahay. Mararka qaarkood, guddiyada waxbarashada bulshada waxay mas'uul ka noqon doonaan hal barnaamij waxbarasho oo keliya, marar kalana barnaamiyo waxbarasho oo farabadan oo ka socda meel gaar ah.

Xiriirka ka dhexeeya qoyska, bulshada, iyo dugsiga waxaa la xoojiyaa marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah, iyada oo loo sii marayo ku luglahaanshaha waalidka abuuritaanka iyo maamulidda jawi waxbarasho. Abuuritaanka qaab dhismeeyada xiriirka qoyska, bulshada iyo dugsiga waa in lagu abuuraa qaab ka qayb-gal wadatashi ku salaysan. Tani waxa ay sidoo kale saamaynaysaa abuuritaanka guddiyada waxbarashada bulshada iyo ururada waalidiinta –macallimiinta iwm, iyo weliba tallaabooyinka gaarka ah ee loo baahan yahay si wax looga qabto xaaladaha ama dhibaatooyinka (sida qoysaska carruurta madaxda u tahay). Nidaam bulshadu sal u tahay waxa uu gacan ka geysanayaa abuuritaanka qaabab (haddii aanay hore u jirin) iyo sii xoojinta qaab dhismeedyada jira ee waafaqsan dhaqanka dadyawga deegaanka iyo nidaam dhaqameedyada waxbarasho iyo weliba farsamooyinka guduha ee la qabsiga .

2. ***Guddiyada waxbarashada bulshada:*** Wakiiladu waa in ay yihiin kuwa cid walba metela oo ay ku jiraan, hogaamiyaasha dhaqanka, kooxa waxbarashada gaarka u baahan, kooxaha la liido, haweenka iyo gabdhaha, jilibyada, qabiilooyinka, koox da'eed kasta, iwm. Wakiilladu waa in lagu soo doortaa hab dimiquraadi ah. Muddada lagu jiro wejiga dib u dhiska , waa in guddiga waxbarashada sharci ahaan loo

aqoonsadaa, waana in loo aqoonsadaa in ay yihiin hay'ad ama urur sharci ku dhisan. Haddii ay sii jireen guddiyo waxbarasho bulsho oo shaqooyin iyo xilal kuwan la mid ah hayay, waa in kuwaas la sharciyeeyaa si looga badbaado is barbar yaac.

Guddiga waxbarashada bulshadu waa in uu ahaadaa mid loo dhan yahay, isu miisaaman, lagana dheegan karo dhammaan qayabaha dadyawga aafoobay, sida jinsiga, da', isir, kooxo diimeedyo, qaybaha bulshada iwm. Waa mid aad u mihiim ah in haweenka iyo gabdhaha (hablaha) lagu taageero sidii ay si siman uga qayb qaadan lahaayeen arrimaha horumarinta iyada oo la kordhinayo, hubantina laga dhigayo in ay si siman uga qayb-qaataan guddiyada waxbarashada bulshada.

3. ***Doorarka iyo xilalka*** guddiga waxbarashada bulshada xubnahooda waa in si cad loo qeexaa oo ay bulshaduna si cad u ogtahay. In kasta oo aanay kuwan oo keliya ahayn haddana doorarka iyo xilalka, waxaa ka mid noqon kara kuwan soo socda:
   - Shirar joogto ah oo lagaga tashado arrimaha taagan, go'aannana lagu qaato
   - Qoritaanka waxyaabaha shirka lagaga hadlo, go'aamada la qaato iyo waxtarka bulshada ee lacagta ah iyo ta aan lacagta ahaynba
   - In ay dejiyaan iyaga oo ku salaynaya dhaqanka (sida jadwallada dugsiyeed la beddeli karo hadii loo baahdo, manaahij waxbarasho oo ka tarjumaysa baahida bulshada, ayna lug ku leeyihiin xubnaha bulshadu, iwm) iyo
   - Xiriirinta bulshada, barnaamijka waxbarashada iyo/ama maamulayaasha deegaanka ama dalkaba si ay u horumariyaan xiriirada wanaagsan ee u dhexeeya barnaamijyada waxabrashada iyo xubnaha bulshada.

4. ***Ku lug lahaanshaha bulshada ee dejinta waxqabadyada waxbarashada:*** dhammaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba waa in ay isla meel dhigaan, una dejiyaan nidaam si loo hubiyo ka qayb-galka bulshada ee dejinta waxqabadyada dhinaca waxbarashada khuseeya. Nidaamyadaasi waa in ay ahaadaan qaybta ugu muhiimsan waxqabadka laga bilaabo maalinta ugu horaysa, waana in la isticmaalaa qaaciiddada ka qayb-galka si ay u fududaato wax ka qabashada:
   - Baahida waxbarasho ee degdegga ah, ee kooxo-hoosaadyada kala duwan (carruur, dhalinyaro, iyo dad qaan-gaar ah);
   - Awood bani'aadamnimo iyo waqti, iyo sidoo kale lacag iyo khayraadyo kale;
   - Awoodda loolanka (*power dynamics*), ee u dhaxaysa koox-hoosaadyada, sida luuqadaha kala duwan
   - Dhibaatooyinka amniga
   - Qoondaynta goobo (dhul) waxbarashada
   - Ku dhafid xeelado waxbarasho oo ku habboon badbaadinta nafaha dhammaan hawlaha gargaarka ee xaaladda degdegga ah.

   (eeg lafagurka jaangooyada 2aad, Qoraalka Hagidda 5aad ee bogga 24aad, lafagurka jaangooyada 3aad ee bogga 25aad, iyo siyaasadda waxbarashada iyo isku-dubaridka jaangooyada 2aad ee bogga 76aad)

5. ***Qorsho hawleed waxbarshado heer deegaan***: bulshada iyo guddiga waxbarashadu waxa ay kala hormarin/mudnaan-siin karaan ayna qorsheyn karaan waxkaqabadyada waxbarashada iyaga oo u sii maraya ka qayb-gal loo dhan yahay, oo ka tarjumaysa baahiya, walaaca, iyo qiimaha dadyawga aafoobay, gaar ahaan kooxaha nugul. Natiijada ka soo baxda geedi socodkan waxaa lagu magacaabaa qorsho hawleed waxbarasho bulsho. Qorshahani waxa uu siinayaa xayndaab kor u qaadidda tayada adeegyada waxbarashada tooska ah iyo ta dadban iyo barnaamijyada.

Qorsha hawleed waxbarasho waxa uu lahaan karaa ujeeddooyin dhowr ah, oo ay ku jiraan:-

- Kobcinta aragti midaysan oo ka dhaxaysa kooxaha danaynaya sida ay tahay in uu u ekaado jawiga wax lagu baranayo, iyada oo lagu cadaynayo waxqabadyada, tusayaasha, iyo meelaha la higsanayo;
- Gaaritaanka heshiisyo iyo go'aamo la xiriira kala mudnaansiinta xaalado cayiman ee jawiga waxbarashada ah oo ka dhexeeya kooxa danaynaya oo dhan.
- Dejinta qorshe hawleed leh shaqooyin cayiman, iyo xilal loo qaybinayo kooxaha danaynaya hawshaas in muddo cayiman ku dhamaystiraan si loo gaaro yoolka lagu xusey qorshaha.

Qorshe hawleedka waxbarasho ee deegaan waa in uu qeexaa doorarka wadashaqayneed ee kooxaha danaynaya oo dhan, kuwaas oo ay ku jiraan hay'adaha taageerada siinaya, guddiyada waxbarashada bulshada, iyo cidda kale ee barnaamijyada ku lugta leh oo dhan. Qorshayaal hawleedka waa in lagu dhex daraa xeer-dhaqan anshaxeed si hubanti looga dhigo joogtaynta la socodka bulshada iyo daraasaynta, iyo in gacan laga geysto dhidibbo u aasidda dhaqan ku salaysan wax wada qabsi joogto ah iyo weliba in la joogteeyo ka qayb-gal sal balaaran oo xagga bulshada ah. Kuwan waxaa ku jiri kara dhinacyada qorshaynta, badbaadinta carruurta, kor u qaadidda ka qaybgalka gabdhaha iyo haweenka, iyo dad wakiilo ka ah dadyawga nugul, fulinta adeegyada baridda iyo barashada, kormeeridda, la socodka, raadinta khayraadka, shaqaalaynta iyo tababaridda shaqaalaha, dayactirka kaabayaasha iyo kobcintooda, la shaqaynta hay'adaha dibadda ka ah hawsha; iyo weliba mar kasta oo ay suurtogal tahay in lagu dhafo (dhexdaro) waxqabadyada kale ee la xiriira caafimaadka, nadaafadda, nafaqada, biyaha iyo fayadhawrka. Waa muhiim in xubnaha bulshadu dhamaantood ay heli karaan xogta si ay talo u siin karaan guddida waxbarashada sidii ay si tayo leh ugu maamuli lahaayeen barnaamijyada waxbarashada (eeg jaangooyada 2aad ee barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada ee bogga 67aad iyo siyaasadda waxbarashada, iyo iskudubaridka jaangooyada 3aad ee bogga 77).

6. ***Ka qayb-galka carruurta ee hawlaha waxbarashada:*** Qodobka 13aad ee Heshiiska Qaramada Midoobey ee Xuquuqda Carruurta (CRC), waxa uu carruurta xaq u siinayaa in ay cod ku lahaadaan dhammaan arrimaha saamaynaya noloshooda, si ay ugu diyaar garoobaan xilkooda marka ay qaan-gaaraan. Qodobku waa mid ku habboon dhammaan carruuraha ku jira xaaladaha kala duwan ee degdegga ah oo ay ka mid yihiin masiibooyinka daba dheeraada iyo dib u dhiska hore.Kuwa waxbaranaya, gaar ahaan dhallinyarada iyo dadka qaan-gaarka ahi, waa in ay ku lug lahaadaan dejinta nidaamka waxbarashadooda. Carruurta waa in lagu tababaraa dhaqannada gacanta ka geysanaya sidii ay u badbaaadin lahaayeen nafahooda iyo nafaha carruuraha kale ee ay isku deegaanka yihiin.

   Tababarku waa in uu noqdaa mid xoogga saaraya awoodda ka qayb-galka wanaagsan (togan), una horseedaa isbeddel waxtar leh sida: soo jeedimaha kor u qaadidda waxqabadyada dugsiga iyo soo sheegidda xadgudubyada ka dhaca meelaha waxbarashadu ka socoto (eeg jaangooyada 2aad ee gaaridda iyo jawiga waxbarashada ee bogga 45aad iyo Jaangooyada 3aad ee Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee waxbarashada ee bogga 69aad)

   Hawlaha soo shaac baxa marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah (sida carruurta iyo dhallinyarada oo loo abuuro waxqabadyo madadaalo (*recreational activities*) waxaa loo isticmaali karaa in lagu mashquuliyo dhalinyarada, gaar ahaan kuwa aan dugsiyada dhigan, hawlaha muhiimadda u leh bulshada. Tani waxa ay siinaysaa fursad kale oo waxtar leh, kagana mashquulaan dembiyada iyo ku biiridda kooxaha hubaysan iwm.

7. ***Raad-reebka Bulshada (Social Audits)*** waa qiimayn heer bulsho ah oo lagu sameeyo barnaamijka waxbarashada. Waa in lagu daraaseeyaa dhinacyada dadka, maaliyadda, iyo alaabooyinka ee waxtarka u leh la geliyey, waxaa la tilmaamaa waxa weli loo baahan yahay iyo xaqiiqa ahaan waxyaalaha yaalla, waxaana sidoo kale lagula socdaa tayada barnaamijyada iyo dhinacyo kale.

   Waxaa laga yaabaa in aanay mar walba suurtogal ahayn in raad-reeb bulsho la seemayaa marka lagu jiro heerarka bilawga ama kuwa dhexe ee xaaladda degdegga ah. Hase ahaatee, marka xaaladda degdegga ahi ay degto (sida: xaalad masiibo – oo dabadheeraatay, ama heerarka hore ee xilliga dib u dhiska), raad-reebka bulshada waxa ay bulshooyinka u siiyaan fursad ay ku dhisaan awooddooda waxqabad si ay u sii kordhiyaan tayada la socodka barnaamijyadooda waxbarasho (eeg sidoo kale lafagurka jaangooyada 4aad ee bogga 27aad).

8. ***Dhisidda Awoodda:*** mid xaqiiqada ku dhisan ma aha in laga filo xubnaha bulshadu in ay lahaadaan awood farsamo ee ay ku maamulaan, ayna ku yeeshaan waxqabadyada waxbarashada iyada oo aanay helin tababarro ku filan, kuna habboon iyo talo-siin. Barnaamijyada tababarradu waa in ay daraaseeyaan awoodda bulshada , ayna tilmaamaan baahiyaha tabobareed iyo sida baahiyahaas loo daboolayo. Awood dhisidda xubnaha bulshada ee guddiga waxbarashada bulshada, waxaa soo raaca in barnaamijyada waxbarashada ay ka qaybgeliyaan xubanaha bulshada hawsha barnaamijyada waxbarashada ayna siiyaan tababarro si ay kor ugu qaadaan tayada joogtaynta waxtarkooda.

**Ka Qayb-galka bulshada: jaangooyada 2aad: Khayraadka**

**Khayraadka ay leeyihiin bulshada deegaanku ayaa la tilmaamaa, la abaabulaa, waxaana loo adeegsadaa fulinta barnaamijyada waxbarashada iyo fursadaha kale ee wax lagu baranayo**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Beelaha (bulshada), shaqaalaha waxbarashada iyo dadka waxbaranayaa waxa ay isla tilmaamaan khayraadka waxbarashada ee bulshada (eeg Qoraalka Hagidda 1aad)
- Khayraadka bulshada waa la ururiyaa si loogu xoojiyo gaaritaanka waxbarashada, badbaadinta iyo tayada barnaamijka waxbarashada (eeg Qoraallada Hagidda 2-3aad)
- Daneeyayaashu (*stakeholders*) waxa ay aqoonsan yihiin, taageeraanna awoodda bulshada, iyo barnaamijyada waxbarashada ee loo dejiyay in ay sida ugu wayn uga faa'iidaystaan xirfadaha gudaha iyo awoodaha (eeg Qoraallada Hagidda 4-5aad)

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Khayraadka bulshada*** waxaa ka mid ah dadka, aqoonta, maaaliyadda iyo hantida bulshadu leedahay. Abaabulida khayraadka waa in lagu xiriiriyaa kor u qaadidda tayada deegaanka wax lagu baranayo. Tani waxaa ka mid noqon kara kuwa la taaban karo ( hanti iyo xoog ku biirinta dhisidda, dayactirka iyo hagaajinta dugsiga) iyo mid maskaxeed ama dareen (sida dareen nafsaani ah oo ardayda iyo

macallimiinta lagu taageeryo ama wax lagaga qabanayo hawlaha badbaadada). Waa la diiwaan geliyaa si kor loogu qaado daahfurnaanta iyo la xisaabtanka (eeg gaaridda iyo bey'ada wax lagu baranayo jaangooyooyinka 2-3 ee bogagga 45-48)

2. ***Kor u qaadidda gaaritaanka iyo amniga:*** xubnaha bulshadu waa in la dardar geliyaa si ay waqti iyo khayraadba ugu huraan caawinta carruurta ka soo jeedda kooxaha nugul si ay dugsiyada isu qoraan, si joogta ahna u tagaan (tusaale ahaan waxa ay haweenka iyo dhallinyaradu abaabuli karaan in dhawr wan-wanaagsan loo ururiyo carruuraha ka soo jiidaha qoysaska faqiirka ah ama in ay raajin siiyaan qoysaska carruurtu madaxda u tahay (*child-headed families*). Haweenku waxa ay gacan ka gaysan karaan ka qayb-galka hablaha ee iskuulka iyaga oo ka dhigaya kaaliyayaal iskuul, iyagoo ka ilaaliya dhibaataynta (kadeedista) iyo weliba xubnaha bulshadu waxa ay waqti u huri karaan iskuul usii kaxaynta iyo kasoo celinta carruurta haddii ay lagama maarmaan noqoto (sidoo kale eeg gaaridda iyo bay'ada wax lagu baranayo jaangooyooyinka 2-3 ee bogagga 45-48).
3. ***Dhidiba u aasidda waaritaanka*** (*building sustainability*): bulshooyinka waa in la siiyaa tababarro la xiriira doorarka iyo masuuliyadaha maamulka bay'ada wax lagu baranayo, khayraad ururinta, iyo maamulaka iyo waaritaanka (sida: dayactirka agabka, iyo tallaabooyin gaar ah oo hubanti lagaga dhigayo ka qayb-galka ardayda nugul , iwm) muddada dheer.
4. ***Aqoonsiga ka qayb-galka bulshada:*** warbixinaha loo dirayo deeq bixiyayaasha waa in lagu sheegaa waxtarka bulshada tayo iyo tiro ahaanba. Waxtar xoog leh oo ay bulshadu ku darsataa mashaariicda waxa ay aad ugu dhowdahay in loo arko in bulshadaas ay ka go'an tahay, iyo weliba waaritaanka mashaariicda.
5. ***Awoodda gudaha:*** ka qayb-galka hawluhu waa in uu kor u qaadaa dareenka dadka ee sharafta, iyo rajooyinka xilliyada adag marka lagu jiro. Barnaamijyada waa in loo dejiyaa in ay dhisaan awoodda gudaha, lagana taxadaraa in ay wax u dhimaan xeeladaha farsamooyinka la qabsiga ee dadka.

| |
|---|
| **Lifaaqa 1aad**<br>*Xayndaabka Daraasaadka* |
| **Lifaaqa 2aad**<br>*Liista hubineedka qorshaynta lafaguridda xaaladda deg degga ah* |
| **Lifaaqa 3aad**<br>*Fomka xog ururinta iyo daraasaadka* |
| **Dejiska 2aad: Tixraacyo iyo hagaha ilaha ee**<br>*Qaybta lafaguridda* |

## Lafagurid: Jaangooyadaa 1aad:  Daraasaadka bilowga ah

## Isla markiiba waxaa si hawl-karnimo ah oo loo dhan yahay loo daraaseeyaa waxbarashada xaaladda degdegga ah.

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Daraasaad bilow ah oo degdeg ah ayaa waxbarashada loogu sameeya  sida ugu dhaqso badan, iyada oo maskaxda lagu haynayo amniga iyo badbaadada (eeg Qoraallada Hagidda 1-3aad)
- Daneeyayaasha  muhiimka  ahi (*core stakeholders*) waa in ay ku lug lahaadaan cayimaadda (tilmaamidda) xogta loo baahan yahay in la soo ururiyo, kobcinta, tarjumaadda iyo kala hufidda tilmaamayaasha, iyo weliba maamulka macluumaadka iyo baahintiisaba (eeg Qoraallada Hagidda 4-5aad)
- Daraasaad balaaran oo ah baahiyaha waxbarashada iyo khayraadka ee heerarka kala duwan iyo noocyada waxbarashada, iyo  weliba dhammaan goobaha ay masiibooyinka xaaladda degdegga ah aafaysay – iyada oo ay ka qayb-gelayaan daneeyayaasha muhiimka ahi, si joogta ah ayaana  loo casriyeeyaa (eeg Qoraalka Hagidda 4aad)
- Waxbarashadu waxa ay qayb ka tahay daraasaad dhinacyo badan ah oo lagu ururiyo xogaha dhinacyada siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, amniga degaanka; qaybaha dadka (*demographics*) iyo khayraadka la helayo si  loo go'aamiyo adeegyo noocee ah ayaa ay u baahan yihiin dadka aafoobay (eeg Qoraalka Hagidda 6aad)
- Daraasaadka  waxa lagu lafaguraa caqabadaha jira ama ay suurtogalka ah ee wax u dhimi kara badbaadinta dadka waxbaranaya, iyada oo la adeegsanayo  daraasaad khateereed habaysan oo lagu eegayo halisaha, nugalyka, iyo awoodaha (eeg Qoraalka Hagidda 7aad)
- Awoodaha gudaha, khayraadka iyo tabaha (xeeladaha) waxloo baranayo iyo waxbarashada ayaa la tilmaamaa , ka hor iyo inta lagu jiro xaaladda degdegg ah.
- Daraasaadku waxa uu tilmaamaa fahamka dadka guduhu ka haystaan ujeeddada iyo muhiimadda waxbarashada iyo weliba sida ay u kala muhiimsan yihiin baahiyaha waxbarashadu iyo waxqabadkoodu.
- Waxaa la dejiyaa nidaam lagu wadaago, laguna kaydiyo  macluumaadka daraasaadka ka soo baxa  (eeg Qoraalka Hagidda 8aad)

### Qoraallada Hagidda

1. ***Marka la waqtiyaynayo daraasaadka*** waa in maskaxda lagu hayaa badbaadsanaanta iyo amniga kooxaha daraasaadka iyo dadyawga aafoobayba.  Marka uu xaddidan yahay gaaritaanku, waa in laga fekeraa xeelad kale sida xogta hore loo sameeyay, hogaamiyayaasha degaanka iyo shabakadaha bulshada. Marka uu gaaritaanku aad u balaarnaado, waa in  daraasaadkii hore la sii cusboonaysiiya, iyada oo isla isaga laga sii duulaayana waa in xogo iyo macluumaad dheeraad ah oo badan la ururiyaa. Daraasaadka waa in si joogto ah loo casriyeeyaa (ugu yaraan sedexdii biloodba mar) iyada oo isha lagu hayo daba socodka, qiimaynta xogta, dib u eegidda guulaha mashruuca iyo macluumaadka la xiriira baahiyaha aan weli la daboolin**.**

2. ***Xogaha iyo macluumaadka daraasaadka lagu ururiyo*** waa in loo qorsheeyaa, loona sameeyaa in lagu fahmo baahiyaha waxbarashada,  tabarta (awoodaha) iyo dul-duleelada jira. Daraasaadka dhamaystiran ee koobaya dhammaan noocyada waxbarashada iyo goobaha oo dhan, waa in loo dhamaystiraa sida ugu dhaqso badan ee suurtogalka ah, laakiin tani waa in aanay daahin diyaarinta degdegga ah ee daraasaad horudhac ah si markiiba wax looga qabto. Booqashooyinka ay samaynayaan ururada waxbarashada ka shaqeeyaa waa in ay yihiin kuwo wada socda, ilaa intii suurtogal ah, si looga hortago

booqashooyin isdabayaac ah oo caqabad ku noqda shaqaalaha ku hawlan wax ka qabashada xaaladda degdegga ah.
Farsamooyinka lagu cabbiro tayada iyo tirada ee daraasaadka loo adeegsadaa waa in aanay noqon kuwa marwalba is bedelaya, ayna waafaqsanaadaan jaangooyooyinka caalamiga ah, iyo ahdaafta waxbarashada loo dhan yahay (EFA) iyo Qoraallada Hagidda xuquuqda. Tani waxa ay gacan ka geeysanaysaa sidii waxqabadyada caalamiga ah loogu xiri lahaa bulshooyinka deegaanka, iyo weliba kor u qaadida isku xirka heer degaan iyo waxqabadka caalamiga ah iyo tusayaasha. Foomamka xog ururintu waa in ay noqdaan kuwo lagu jaangooyay wadanka gudihiisa si ay u fududeeyaan isku dubarididda mashaariicda hay'adaha dhexdooda, isla markaana ay yareeyaan baahiyaha loo qabo macluumaad bixiyayaal. Foomamku waa in ay meel u baneeyaan macluumaadka dheeraadka ah ee loo arko muhiim ee laga helo jawaab bixiyayaasha beelaha/bulshada .

Tixgelinta anshaxu waa u lagama maarmaan foom kasta oo xog ururin loo adeegsanayo oo la xiriira wax ka qabadka xaaladaha bani'aadamnimo. Macluumaad kasta ujeeddo kasta ha loo ururiyee, taas oo ay ku jirto la socodka, daarsaynta ama sahanka, waxa uu halis gelin karaa dadka – ma aha in sababtu tahay oo keliya xaasaasinimada macluumaadka la ururiyay, laakiinse in ay ka qayb-qaataan hawsha ayaa dadka ka dhigi karta bartilmaameed ama khatar gelin karta. Waa in mabaadi'da aasaasiga ah ee ixtiraamka, dhibid la'aanta, iyo midab kala sooc la'aanta waa in marwalba maskaxda lagu haya, xil ayaana ka saaran kuwa macluumaadka ururinaya in ay badbaadiyaan, ogaysiiyaanna xuquuqahooda. Eeg tixraaca lafaguridda ee lifaaqa 2aad (ee bogga 86aad)eek u lifaaqan dukumentiga. Siinta Badbaadinta Tixgelinta koowaad: Buug-tilmaame ah oo ku daraya badbaadinta ururinta macluumaadka gargaarka bani'aadamnimo.

3. ***Noocyada lafaguridda***: si loo yareeyo dhinac u badashada, xogta waa in la seddex-xagaleeyaa iyada oo laga qaadanayo ilo fara badan marka la lafogurayo**,** inta aan la soo gabo-gabayn. Seddex-xagalayntu waa hab isku dhafan oo loo adeegsado ururinta, iyo falanqaynta xogta si loo cabbiro isku noqnoqashada, iyo weliba wejiyada kala duwan ee fikrad laga haysto, waxaana ay keentaa faham xeeldheer si loo hubiyo xaqiiqo ahaanshaha xogta tayosheegta ah. Falanqaynta sidoo kale waxaa lagu daraa fahamka dadka gudaha, si looga taxaddaro in waxqabadyada lagu saleeyo oo keliya fahamka iyo kala mudnaan siinta kuwa dibadda ka jooga.

4. ***Daneeyayaasha*** waa in lagu soo daraa tirada ugu badan ee suurtogal ah ee ka socda dadyawga kooxaha masiibooyinku aafeeyeen. Ka qayb-galka deenayayaasha ee xogta iyo ururinta macluumaadka, lafagurka, iyo maamulka macluumaadka iyo baahinteedaba waxaa xaddidi kara xaaladaha inta ay socoto daaraasadda hore, laakiin waa in la kordhiyaa la socodka iyo qiimaynta marka daraasaado dambe la samaynayo.

5. ***Natiijooyinka daraasaadka*** waa in loo soo bandhigaa sida ugu dhaqso badan si waxqabadyada loo qorsheeyo. Xogtii la sameeyay aafada ka hor iyo ka dibba ee tilmaamaysa baahiya waxbarashada iyo khayraadka (sida kuwa ay sameeyaan maamulayaasha, ururada aan dawliga ahayn iyo hay'adaha hawlaha khaaska ah u xilsaaran ee wax ka wada hawlaha bani'aadamnimada, iyo weliba bulshada deegaanka) waa in cid-walba oo danaynaysa loo bandhigaa. Tani waxa ay si gaar ah waxtar ugu leedahay hay'adaha hawshan ku shaqada lihi marka aanay gaari karayn goobta marka lagu jiro xaaladda degdegga ah.

6. ***Daraasaynta guud ee xaaladda degdegga ah*** waa in xeeldheerayaal kuwa waxbarashada ama badbaadinta ahí ay qayb ka yihiin kooxda xaaladda degdegga ah si ay u soo ururiyaan xog ku saabsan

waxbarashada iyo badbaadinta y iyo khayraadka loo baahan yaha. Hay'aduhu waa in ay ballan qaadaan kheyraad, ayna dhisaan kartida shaqaalaha, iyo weliba awoodda ururka si ay hawlahaas u qabtaan.

7. ***Lafagurka halista:*** waa muhiim in xaaladaha saamaynta yeelan kara laga fiiriyo dhinacyada caafimaadka, iyo amniga caruurta iyo dhalinyarada, maaddaama ay waxbarashada laftigeedu noqon karto badbaado iyo/ama halisba. Daraasaadka waa in ay ku jiraan liisto ama shax tusinaysa halisaha ("shax khatareed") taas oo tusinaysa kooxa da'eedyada iyo kooxaha nugul iyo halisaha iyo waxyaabaha sababa sida masiibooyin dabiici ah, iyo haliso deegaanka ah; miinada dhulka lagu aaso ama walxaha aan weli qarxin (rasaasta iyo bamamka iwm); amniga dhismayaasha iyo kaabayaasha kale; amniga iyo badbaadinta carruurta; waxyeelooyinka caafimaadka maskaxda iyo jismiga ah; dhibaatooyinka la xiriira heerka waxbarasho ee macallimiinta iyo isqorista dugsiyada iyo manaahijta, iyo macluumaadka kale ee la xiriira (tusaale ahaan shaxda halisaha, eeg MSEE CD-ROM).

   Daraasaddu waa in ay tilmaantaa tabaha loo baahan yahay ee wax ka qabashada halisaha si looga badbaado, loo khafiifiyo iyo hawlaha la xiriira xaaladaha degdegga ah (diyaar garow, wax ka qabasho, dib u dhis iyo dib u kaabid), xilliyada ay dhacayaan masiibooyin is khilaafsan oo dabiici ah iyo kuwa dad samee ihi. Tani mararka qaar waxa ay u baahan kartaa in xarun kasta oo waxbarasho lahaato ku sii talogal iyo qorshe amniga ah si looga hortago ama wax looga qabto xaalad degdeg ah. Haddii loo baahdo dugsi waliba waxa uu diyaarsan karaa khariidad tusinaysa khataraha soo waajihi kara iyo waxyaabaha saameeya u nuglaantooda.

8. ***Wadaagidda natiijooyinka daraasaadka:*** tani waa in ka wada shaqeeyaan madaxda ay khusayso oo dhami, ha noqdaan kuwa heer gobol ama mid dal. Haddii aanay jirin maamulayaal wax ku ool ah ama ururro hawshan qabtaa, waa in urur caalami ahí hawsha hormuud ka noqdaa, sida Xafiiska Isku dubaridka Hawlaha Bani'aadamnimo ee Qaramda Midoobey (UNOCHA) la magacaabaa si uu isugu soo dubarido farsamooyinka wada shaqaynta iyo wadaagidda macluumadka**.** Wadaagidda natiijoyinka daraasaadku waa in ay horseeddaa – in dhaqso loo soo saaro ixsaa'iyaad (statistics) iyo xog ay adeegsan karto cid kasta oo danaynaysaa ( Eeg siyaasadda waxbarashada iyo isku dubarididda jaangooyada 3aad ee bogga 77aad)

## Lafagurid: jaangooyada 2aad: istraatijiyadda waxloo qabanayo

Qaab dhismeed wax looga qabanayo waxbarashada ayaa la dejiyaa, oo ay ku mirto sharaxaad cad oo ku saabsan dhibaatada iyo istaraatijiyada qoran ee waxqabadka ah.

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Xog aasaasi ah (*Baseline data*) ayaa si nidaamsan loo uruuriyaa bilawga mashruuca
- Istaraatijiyadda waxkaqabashada waxbarashada xaaladda degdeg ahí waxa ay ka tarjumaysaa faham cad oo laga qaato xogta oo dhan (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Qiyaaso sax ah (valid benchmarks) iyo tilmaamayaal ayaa la cayimaa si loogula socdo raadka (waxtarka) waxqabadyada xagga waxbarashada carruurta, dhallinyarada, iyo guud ahaan bulshada.
- Macluumaadka la soo ururiyay markii la samaynayay daraasaadka bilawga ah waxaa lagu casriyeeyaa xogta cusub ee tusinaysa horumarka mashraariicda socda (eeg Qoraalka Hagidda 3)

- Istaraatijiyadda wax ka qabashada waxbarashadu waxa ay mudnaanta siisaa amniga iyo ladnaanta carruurta iyo dhallinyarada, oo ay ku jiraan kuwa nugul ama u baahan waxbarashada gaarka ah.
- Istaraatijiyadda wax ka qabashada waxbarashadu waxa ay si isa soo taraysa u dabooshaa baahiyaha dadka ay xaaladda degdegga ahí soo wajahday waxbarasho ahaan tiro iyo tayaba, waxa ayna xoojisaa barnaamijyada waxbarasho ee heer qaran (eeg Qoraallada Hagidda 4-6)

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Baraboosalada (soo jeedinnada) waxqabadyadu*** waa in ay hubiyaan in dhammaan waxqabadyada aasaaska ah loo sameeyo kutalagal miisaaniyadeed oo ku filan si ay u buuxiyaan jaangooyooyinka ugu hooseeya ee halkan lagu qeexay. Baraboosalladu waa in ay tilmaamaan waxqabad waxbarasho oo noocyada ay yihiin iyo goobaha laga fulinayo, iyada oo la qiyaasayo ilaa inta la daboolay baahiyihii la daraaseeyay ee heerarka kala duwan iyo noocyada waxbarashada, iyada oo weliba la tilmaamayo in ay jiraan hay'ado kale oo la yaqaan oo ballan qaaday in ay daboolayaan baahiyaha inta dhiman. Waa in ay jirtaa jajabnaani (f*lexibility*) ilaa intii suurtogalka ah, si wax looga qabto baahiyaha waxbarasho ee dhabta ah, haddiiba ay ka bataan intii la sii saadaaliyay. Waa in lagu dadaalaa in kor loo qaado waaritaanka iyo is-waafajisnaanta u dhaxaysa ururrada marka la dejinayo heerarka iyo noocyada qarashaadka waxbarashada xaaladda degdegga ah ( sida: mushaharooyinka iyo qalabka iwm).

2. ***Dhisidda awoodda xog ururinta iyo lafaguridda:*** barabosallada waa in ay ku jiraan dhisidda awoodda shaqaalahu, gaar ahaan kuwa wadaniga ah, oo lagu tababaro ururinta xogta iyo lafaguridda iyo weliba sida loo sameeyo dabagalka iyo qiimaynta. Badanaaba arrimahan si weyn looma qaddariyo marka baraboosallada la diyaarinayo.

3. ***Casriyaynta istaraatijiyooyinka*:** barabosallada waxqabadyada waa in dib loo eegaa oo la casriyeeyaa ugu yaraan seddexdii biloodba mar muddada lagu jiro xaaladda degdegga ah iyo dib u dhiska xilliga hore. Waana in maskaxda lagu hayaa guulaha la gaaray ilaa maalintaas, isbeddelka xaaladda degdegga ah, iyo qiyaasta inta ay le'eg yihiin baahiyaha aan weli la daboolini. Ujeeddaduna waa in ay ahaataa in kor loo sii qaado tayada iyo baaxadda aagagga la gaaray, iyo weliba waaritaanka, marka ay suurtogalka tahay.

4. ***Waxqabadka deeqbixiyaha*:** deeqbixiyayaashu waa in ay dib u eegid ku soo sameeyaan tayada iyo baaxadda aagagga la gaarsiiyay waxqabadka waxbarashada xaaladda degdegga ah, oo ay ku jiraan isqoridda iyo ku sii jiritaanka ardayda ka timaadda kooxaha nugul.Waa in ay hubiyaan in fursadaha waxbarashadu ay wada gaaraan dhammaan dhulyowga aafadu saamaysay. Waa in maaliyad la geliyaa sidii waxbarashada dadyowga ku nool dhulalka martigeliyay qaxootiga ama barakacayaasha loo gaarsiin lahaa jaangooyooyinka ugu hooseeya (sidoo kale eeg gaaritaanka iyo deegaanka barashada, jaangooyada 1aad, Qoraalka Hagidda 8 ee bogga 44aad)

5. ***Xoojinta baranaamijyada heer qaran*:** wax ka qabashada waxbarashada xaaladda degdegga ah, gaar ahaan waxbarashada dadka aan barokicin iyo inta dib u dhisku socdo, waa in la iswaafajiyaa, lana xoojiyaa barnaamijyada waxbarashada ee heer qaran oo ay ku jiraan qorshaynta, maamulka, maaraynta iyo shaqo ku tababaridda macalimiinta iyo taageero heer qaran iyo heer degaan ee waxbarasho.
6. ***Ka gudbitaanka caqabadaha ka horyimaada waajibaadka hay'adeed*:** ururrada samafalka ee waajibaadkoodu kooban yahay (sida kuwa carruurta, qaxootiga ama dib u celinta oo keliya) waa in ay

hubiyaan hawlaha waxbarashada la iswaafajiyo (la dhexgeliyo) ta ay waddo dawladdu iyo hay'adaha waajibaadkoodu dhinacyada badan saameeyo, si baahiyaha waxbarashada oo dhan loo daboolo. Istaraatijiyadda waxbarasho ee gobol kasta oo ay aafadu saamaysay waa in ay wax ka taraysaa baahiyaha carruurta yaryar (*early childhood development needs* ) iyo sidoo kale ta dhallinyarada, oo ay ku jirto ta dugsiyada sare, waxbarashada sare iyo ta farsamadaba, tababarka macallinimada loogu diyaarinayo, waxbarashooyin kala duwan oo ku habboon. Istaraatijiyadda kobcinta waxbarashada degaanada dadku ku soo noqdaan waa in lagu daraa qorshe muddada fog ah oo lagu taageerayo mashaariicda ay dejintooda qaybta ka yihiin hay'adaha waqtigu ciriiriga ku yahay (sida taageeridda dib u soo celinta iyo is dhexgelinta bilawga ah ee qaxootiga).

## Lafagurid: jaangooyada 3aad: La socod (dabogelid)

Cid kasta oo danaysaa waxa ay si joogto ah ula socotaa waxqabadyada ku aaddan waxbarashada iyo sida ay u kordhayaan baahiyaha wabarasho ee dadyowga aafoobay.

Tilmaamayaasha Muhiimka ah (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Nidaamyo loogu talagalay in si joogto ah loogu dabagalo (lagula socdo) xaaladaha degdegga ah iyo hawlaha socda ayaa jira oo shaqaynayana (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Haween, rag, carruur iyo dhallinyaro ka kala socda kooxaha kala duwan ee aafoobay ayaa si joogto ah loola tashadaaa, waxaana laga qayb geliyaa hawlaha dabagalka (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Xogta waxbarashada si nidaamsan oo joogto ah ayaa loo ururiyaa, iyada oo lagu bilaabayo xogta aasaasiga ah, taas oo ay daba socoto iyada oo si joogto ah loola soconayo wixii is beddel ah ee soo kordha (eeg Qoraallada Hagidda 3-4)
- Shaqaale ayaa loo tabobaraa nidaamka ururinta xogta iyo lafagurkeeda si ay xogtu u noqoto mid la isku hallayn karo, sidoo kalana lafagurku noqdo mid dib loo xaqiijin karo, lana aammini karo (eeg Qoraalka Hagidda 5)
- Xogta waxbarashada waa la lafaguraa, waxaana lala wadaagaa daneeyayaasha oo dhan waqtiyo go'an (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Nidaamyada la socoshada iyo kaydinta xogta si joogto ah ayaa loo casriyeeyaa iyada oo lagu salaynayaa isbedellada soo kordha iyo si ay u sahlaan qaadashada go'aammo dhaxalgal ah.
- Xogta tusinaysa isbedello, waxyaabo cusub oo soo kordhay, baahiyo iyo khayraadka (ilaha) ayaa si joogto ah loo siiyaa maamulayaasha waxbarashda.
- Barnaamijyada waa la isku toosiyaa (hagaajiyaa) marka lagama maarmaanka tahay, ee ay tilmaanto natiijada ka soo baxda la socoshada/dabogalku.

**Qoraallada Hagidda**

1. ***La socoshadu/Dabagalku*** waa in ay ka tarjuntaa is beddellada baahiyaha waxbarasho ee dadka, iyo weliba ilaa xadka barnaamijyadu daboolaan baahiyahaas, si ay u noqdaan kuwa ku habboon oo waxtar leh, maskaxda ku haya suurtogalnimada horumar la sameeyo. Ma aha in xogaha oo dhan waqtiyo isku mid ah la ururiyo. Dejinta nidaamka dabagalku, waxaa ka mid ah in la go'aansado waqtiyada badanaaba ay tahay in la ururiyo xog gaar ah iyada oo lagu salaynayo baahida, iyo khayraadka ku baxaya ururinta xogta iyo lafaguriddeeda (nidaaminteeda). Macluumaad fara badan waxaa laga ururin karaa dugsiyada iyo barnaamijyada kale ee waxbarashada si muunad ahaan ah, iyaga ayaa bixinya tusayaal degdeg ah oo baahiyaha iyo dhibaatooyinka jira ah (sida: xogta isqoridda ardayda, kuwa iskaga tegay, in arday wax cunaan inta aanay dugsiga imaan, tirada buugaagta daabacan, agabka kale ee la xiriira baridda iyo barashada ee yaalla iwm). Dabagalka carruurta aan dugsiyada tegin iyo sababa ay isu qori waayeen, ama u xaadirin waayeen waxaa laga ogaan karaa iyada oo muunad ahaan loo booqdo qoysas dhawr ah oo deggen meelo cayimán, iyo weliba iyada oo lala kulmo kooxaha bulshada.
2. **Dadka ku lugta leh dabagalka/la socoshada**: dad awooda in ay uga soo ururiyaan macluumaadka dhammaan kooxaha dadyawga aafoobay si waafaqsan dhaqanka waa in lugu daraa, gaar ahaan marka laga eego jinsiga iyo xirfadaha luqadda. Dhaqanka awgii waxaa suurtogal ah in loo baahdo in haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay meel gaar ah ay dad gaar ah oo ay dhaqan ahaan oggol yihiin ku waraystaan.
3. ***Nidaamyada maamulka macluumaadka waxbarashada (EMIS***) waxaa wax yeelayn kara xaaladda degdegga ah. Waa in mudnaanta la siiyaa soo celinta xog ururinta muhiimka ah iyo hawlgelinteeda, iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kala duwan iyo maamulayaasha dalka. Samaynta ama kabitaanka Nidaamyada maamulka macluumaadka waxbarashada ee heer qaran waxa uu u baahan karaa awood dhisid iyo khayraadyo heer dal, gobol iyo deegaan si loo dejiyo, ururiyo, maamulo, tarjumo, adeegsado, lana faafiyo macluumaadka la hayo. Hawshan waa in loo bilaaba sida ugu dhaqso badan marka lagu jiro xaaladda degdegga ah, iyada oo ujeeddada laga leeyahayna tahay in la helo nidaam dabagaleed shaqaynaya marka la gaaro wejiga hore ee dib u dhiska.

   Nidaamyada maamulka macluumaadka waxbarshada (EMIS) waxa udub dhexaad (lagama maarmaan u ah) nidaam kombuyuutareed (*software*) loogu tala galay hawshan. Xafiisyada waxbarshada ee heer dal ilaa heer degmo iyo xafiisyo-hoosaadyada kale ee waxbarashaduba (sida Kulliyada waxbarashada ee wadanka) waa in ay haystaan nidaam-kumbuyutareed dhamaystiraya oo xogta kaydsan la jaanqaadaya si loo fududeeyo isweeydaarsiga macluumaadka.
4. ***Dabagalka ku bartayaasha*** waa in ay dhici kartaa waqti kasta ha noqoto marka ay kooraska dhammeeyaan ama ka tagaan. Dabagalka waxaa lagu eegi karaa xifdinta ereyada iyo lambarada iyo helitaanka waxyaabaha la akhristo iskuulka ka bacdi. Dabagalka waxbarashada farsamada, wuxuu noqonayaa in la eego fursada shaqo iyo sida ay dadyawgii la tababaray uga adeegsadeen xirfadahoodi shaqo, iyada oo loo sii marayo shaqo ku meelayn iyo weliba daraasaad lagula soconayo. Dabagalka ka dambeeya fulinta barnaamiyjadu waxa uu jawaab celin qiimo leh siiyaa dejinta barnaamijyada kale (eeg Baridda iyo Barashada, jaangooyada 4aad ee bogga 62aad)
5. ***Taabbogalnimada xogta:*** lafaguriddu waa in ay lahaataa dukumentiyo sharraxaya 1) Qeexid Tilmaame 2) Meesha Xogtu ka timad 3) Sida loo soo ururiyay, 4) nidaamka loo raacay lafaguridda xogta. Isdhaafsanaan kasta (aan wafaqsanayn sidii loogu talogalay) oo dhacda marka macluumaadka la muumalayo, la ururinayo ama la lafogurayo waa in lala socdaa. Xogta waxaa buunbuunin kara jawaab bixiyayaasha doonaya in ay helaan khayr dheeraad ah (sida: tirada isqoridda oo la buunbuuniyo, ama tirada ardayda iwm) ama si canaan la isaga ilaaliyo. Tababaridda shaqaalaha waa in lagu kabaa kormeerro aan hore loo sii sheegin si kor loogu qaado xaqiiqo ahaanshaha xogta.

## Lafagurid: jaangooyada 4aad: Qiimayn

Waxaa jira qaab nidaamsan, aan dhinacna u janjeerin oo lagu qiimeeyo waxqabadyada waxbarashada si loo sii hagaajiyo, oo loo wanaajiyo xisaabtanka

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Qiimaynta siyaasadaha, barnaamijyada iyo natiijooyinka ka dhasha waxqabadka, ayaa la sameeyaa xilliyada ku habboon iyada oo la barbar dhigayo istiraatijiyadaha guud ee waxqabada, ujeeddooyin gaar ah oo la xiriira badbaadinta carruurta iyo waxbarashada iyo jaangooyooyinka ugu hooseeya (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Macluumaadka waxaa loogu talagalay raadadka aan la sii qorshayn ee waxqabadka
- Macluumaadka waxaa loo ururiyaa si daah-furan, iyo si dhex u ah daneeyayaasha oo dhan, oo ay ku jiraan dadyowga aafoobay iyo la-hawlgalayaashooda qaybaha kale.
- Daneeyayaasha oo dhan, oo ay ku jiraan dadka dulman, guddiyada waxbarashada bulshada, saraakiisha waxbarashada ee heer qaran iyo heer degaan, barayaasha iyo bartayaasha, waxa ay ka qayb galaan hawlaha qiimaynta (eeg Qoraalka Hagidda 2)
- Casharrada iyo wayaabaha ku dayashada mudan waxaa si balaaran loola wadaagaa dalka, deegaanka iyo samafalayaasha, waxaana loo adeegsadaa taageeridda ka dambaysa xaaladda degdegga ah, barnaamijyada, iyo siyaasadaha waxbarashada ee waxtarka u leh baltilmaameedyada qaranka iyo adduunyadaba (eeg Qoraalka Hagidda 3).

## Qoraallada Hagidda

1. ***Qiimayntu*** waa in ay soo ururisaa xogaha iyada oo eegaysa tayada iyo tiradasa si loo helo sawir dhammaystiran. Xog-tayeed waxa ay bixisaa macluumaad xaaladeed iyo caawin in loo sharraxo xogta tirokoobka ah (statistical data). Xog-tayeedka waxaa lagu ururin karaa iyada oo la adeegsanayo waraysiyo la qaado, indho indhayn io dukumentiyo qoran; xogo-tayeed waxaa kale oo la ururin karaa iyada oo la deegsanayo sahamin iyo su'aalo qoran oo dadka la waydiinayo.

   Waa in si dhammeystiran loo qiimeeyaa dadka, agabka iyo maaliyadda ee waxtarka u ah waxbarashada; gaaritaanka kuwa waxbaranaya, ku negaanshaha, u dhammaanshaha, iyo badbaadada, geedi-socodka baridda, barashada; aqoonsiga iyo caddaymaha (*certificates*) barashada; shaqo ku tababaridda barayaasha; raadka ay waxbarashadu ku yeelato ardayda, oo ay ku jiraan fursado u helidda waxbarasho dheeri ah iyo shaqaalayn; iyo saamaynta guud ee bulshada.

2. ***U adeegsiga qiimaynta dhinaca dhisidda awoodda*:** Miisaaniyadda qiimaynta waa in lagu daraa aqoon isweeydaarsi loo sameeyo daneeyayaasha (*stakeholders*) si looga dhaadhiciyo fikradda qiimaynta, si wadajir loogu dejiyo qaabka guud iyo geedi-socodka ku salaysan ka qaybgalka, iyo dib u eegidda, iyo tarjumidda natiijooyinkaba. Waxaa muhiimad gaar ah leh in shaqaalaha barnaamijyada waxbarashadu ku lug lahaadaan geedi-socodka qiimaynta. Tani waxa ay gacan ka siin doontaa in ay ka qaataan faham aasaas u noqda "yeelasho" dambe iyo dhaqan gelinta talooyinka. Ka faa'iidaystayaasha mashruucu sida: barayaasha iyo shaqaalaha waxbarashadu waxa kale oo ay tilmaami karaan caqabadaha jira ee ay waajahaan iyo caqabadaha ay suurtogalka tahay in ay ka dhashaan dhaqan gelinta talooyinka qaarkood.

3. ***Wadaagidda natiijooyinka iyo casharrada laga baratay***: qiimeeyayaasha waa in la waydiiyaa in ay qaabeeyaan warbixintooda si ay ugu daraan qayb lala wadaagi karo dadweynaha, iyo qayb sir ah ama natiiyoinka gudaha ee lagu soo bandhigay qaybta labaad ee ay tahay in aan cid walba lala wadaagin.

# Jaangoooyayaasha ay wadaagaan Qaybaha oo dhami: Lifaaqyo

## Lifaaqa 1aad: Qaab Dhismeedka Daraasaynta

<table>
<tr><td rowspan="7">KA QAYBGALKA LAFAGURKA AWOODAHA iyo NUGEYLKA (tusaala ahaan, jinsiga, oo ay ku jiraan daäda iyo jinsiga, kala saarsaaridda)</td><td colspan="6">ILAALINTA (Jireed, sharciyeed iyo agab)/XUQUUQDA AADANAHA/XUKUNKA SHARCIGA</td><td rowspan="7">DADWEYNAHA (Tirada guud ee dadka, kooxaha gaarka ah ee nugul, tirada dadka wax marti geliyey, kuwa barokacay, kuwa la la yahay, jinsigooda, iwm.</td></tr>
<tr><td colspan="6">GEERIDA</td></tr>
<tr><td colspan="3">EELKA/SILICA</td><td colspan="3">XAALADDA NAFAQADA</td></tr>
<tr><td>Helidda biyo la cabbi karo</td><td>Helidda adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka, nafaqeynta iyo kuwa nafsaani-bulsho</td><td>Cunto-qaadashada</td><td>Helidda iyo ku habboonaanta hoyga</td><td>Hab-dhaqan caafimaad leh</td><td>Heerarka fayadhowrka</td></tr>
<tr><td colspan="3">Haqab-beelka Cuntada</td><td colspan="3">Hufnaanta Adeegyada caafimaadka, nafaqeynta iyo kuwa nafsaani-bulsho</td></tr>
<tr><td colspan="2">Xaaladda Dhaqaale iyo Tan suuq ee qoysaska</td><td>Waxbarashada</td><td colspan="2">Xaaladda Dhaqan-Bulsho ee Qoysaska</td><td>Sinnaan la'aanta jirta</td></tr>
<tr><td colspan="3">XAALADDA QARANKA<br>Siyaasad, dhaqaale, taariikh, bulsho, awoodda dowladeed, kaabayaasha, nidaamyada, dhulka, cimilada, ahlisaaha dabiiciga ah, ururada caalamiga ah , iwm.</td><td colspan="3">SUUQYADA QARANKA<br>Kuwo shaqeynaya (markaasna gargaarka dibadda looga baahan yahayooo yaraada) ama aan shaqeynin?</td></tr>
</table>

Qaab-dhismeedkeeda guud ee daraasaadku  waxaa loo adeegsadaa inuu saldhig u noqdo munaaqashada iyo lafaguridda, iyada oo ujeeddada laga leeyahay tahay in la isla wada fahmo baahiyaha ay qabaan dadyow gaar ahí. Lafaguriddu waxa ay kulmisaa marqaatiyada iyo go'aaminta (*judgement*). Qaab-dhismeedka daraasaadku waxa uu isu keenaa dhammaan qaybaha mudan in la tixgeliyo, ee kuma dhisna oo keliya baahida. In kasta la carrabaayayo sida ay qaybiba uga dhalato haddana qaab-dhismeedka guud cad uma sheegayo arrintan, waxaana loo baahan yahay sharraxaado dheeri ah oo la xiriira qalabka (agabka), si uu u caawiyo kooxaha daraasadda samaynaya. Ilaa la isku-dubbarido agabkaas (qalabkaas), kooxuhu waxa ay dooran karaan sharraxaad ka bixinta sababaha. Qaab-dhismeedku waxa uu bixiyaa nidaam aan isbed-bedelin iyo daah-furnaan dheeraad ah oo macluumaadka la isku dhaafsado iyada oo danta laga leeyahay tahay qorshaynta waxqabad bani'aadamnimo  ku salaysan sida ay u kala mudan yihiin marka ay jiraan masiibooyin. In kasta oo ay jiraan kala mudnaanta walaacyada (dhibaatooyinka) lagu xusay heer kasta oo qaab-dhismeedka ah, haddana tani ma tilmaamayso waxqabad isu xiga sida uu u kala mudan yahay. Qaab-dhismeedka guud waxa uu tusiyaa in qaybaha kala duwan ay isku xiran yihiin, ayna tahay in sidaas loo tixgeliyo.  Qayb kasta oo qaab-dhismeedka ka mid ah waa in si gaar ah loo daraaseeyaa (tusaale ahaan: waxbarashada) iyo iyada oo ka mid ah daraasayn dhinacyo badan isugu jirta ( sida: raadka ay xaaladda waxbarasho ku leedahay qaybaha kale ee qaab-dhismeedka). Badbaadinta/xuquuqda bani'aadamka/sharciga waa arimo aad u muhiim ah, oo  u baahan in siyaabo gooni –gooni ah loo darso, la iskuna dubbarido. Bilowga daraasadu waxa ay noqotaa mid lagu saleeyay degaan gaar ah ama  dad gaar ah.

## Lifaaqa 2aad: Qorshaynta Xaaladda degdegga:
## Liisto hubineedda Lafaguridda Xaaladda

Cunsuraha (*factor*s), arrimaha, dadka, iyo hay'adaha aad u baahan tahay in aad ogaatid, fahantidna, si aad u qorshayso una fuliso barnaamij.

1. **Daraasaynta Xogta aasaasiga ah**

- Xog noocee ah baa loo baahan yahay in ay aasaas u noqoto daraasaynta
- Xog noocee ah ayaad u baahan tahay si aad u qorshayso fulinta adiga oo barbardhigaya waxa aad haysatid sida goobaha dugsiyada loogu talagalay (tiradooda, meelaha ay ku kala yaallaan); tirada ardayda la filayo; tirada barayaasha iwm?
- Ma jirtaa fursad lagu ururin karo xogta aasaasiga ah, inta aadan bilaabin barnaamijka?

2. **Nooca Xaaladda**
    - Waa maxay nooca xaaladdu (mid tartiib-tartiib u bilaabatay, mise mid ku soo booddo ah)?
    - Ma jiraan kooxo (dhaqan ahaan , da' ahaan , jinsi ahaan iwm), si gaar ah ugu nugul ama ay xaaladda degdegga ahi saamaysay?

3. **Degganaanshaha Xaaladda**

- Xaaladdu ma mid deggan baa (muddo gaaban/dhex-dhexaad ah), mise waa mid weli isa soo taraysa?
- Ma jiraan ixtimaalaad (waxyaabo dhici kara) la sii arki karaa (xaalad cusub oo degdeg ah, ama isbeddel ballaaran oo laga yaabo in uu ku yimaaddo xaaladda degdegga ah ee hadda jirta)?
- Waa maxay waxyaabaha la cayimi karo ee ay aadka ugu dhawdahay in ay sababaan is beddel deg-deg ah/ama isbedello la taaban karo?

4. **Nidaamka Waxbarasho ee hadda jira**

**Nidaamka Waxbarasho**

- Ma jiraa nidaam waxbarasho oo shaqaynayaa?
- Ma jiraan nidaamyo ka badan hal mid oo ka dhex shaqaynaya dadyawga baltilmaameedka ah?
- Sidee ayaa ay xaaladda degdegga ahí u saamaysay nidaamka/nidaamyada waxbarasho ee jira?
- Ma Burbureen/la la' yahay dhismayaashii iyo kaabayaashii dugsiyada (jikooyin, musqulo, iyo bakhaaro iwm.)
- Waa sidee bey'ada barashada ee hadda jirtaa (goob, agab, fasallo, shaqaale iwm.)?
- Xaalacdu ma si isku mid ah ayaa ay u saamaysaa wiilasha, gabadhaha,ama carruurta ka kala yimid meelo iyo isirro kala duwan?
- Carrurtu dugsiga ma isqoreen, si joogto ahse ma u tagaan? Hadday jawaabtu tahay maya, maxaa ka hortaagan?
- Carruurtu ma gaajoodaan marka ay dugsiga joogaan (sida: qurac la'aan, masaafada dugsiga guryaha u jiro, nafaqada guud)?
- Carruurta ma saameeyeen nafaq-xumo (*micronutrient deficiencies*) gaar ahi? Waa kuwee?

**Manaahijta iyo Waxbaridda (*instructions*)**

- Ma jirtaa manaahij midaysani?
- Ma jirtaa luuqad/luuqado laga midaysan yahay oo wax lagu bartaa?

- Ma jiraan macallimiini/ agabka loo isticmaalo baridda iyo/ama barashada?
- Ma loo baahan yahay in la tababaro barayaal cusub/ ama kuwii horeba?
- Ma loo baahan waxbarashada dadban ama tababaro xirfadeed la siiyo (carruurta/askarta hub ka dhigista lagu sameeyay, carruurta aan iskuulka dhigan, ama kooxo kaleba)

**5. Kuwa ugu muhiimsan ee ku lugta leh (daneeyayaasha)**
**Magacaw kuwa ugu muhiimsan ee lugta ku leh waxbarashada**

- Kuma ayaa waxee qabanaya?
- Kuma ayaa mas'uul ka ah waxee?
- Kuma ayaa qorshaynaya waxee?
- Kuma ayaa mas'uul ka ah go'aannadee?
- Ururada kale ee caalamiga ah
- Ururada aan dawliga ahayn (caalami iyo wadani)
- Dawladda
    - Waa mid caynkee ah xaaladda dawladda dhexe/ta hoose (sharci ahaan, kumeel-gaar)
    - Yaa maamula waxbarashada?

- Dugsiyad (barayaasha, maamulayaasha, guddida waalidiinta iyo barayaasha - PTAs)
- Bulshada/beesha (hogaamiyayaasha, guurtida, wadaaddada, ururrada haweenka, adeegayaasha caafimaadka, ama ururro bulsheedyo kale).
- Qoys
    - Waa sidee nidaamka kala sarrayntu?
    - Xaaladda degdegga ahí ma saamaysay qaab-dhismeedkii qoyska?
    - Yaa gaara go'aannada khuseeya carruurta (gaar ahaan) gabdaha in ay waxbartaan?

**6. Khayraadka/ilaha jira**
**Xagga waxbarashada (eeg: Nidaamka Waxbarasho ee hadda jira- ee kor ku xusan)**

- Ma jiraan goobo amni ah oo barashada loogu talogalay?
- Agabka dugsiga ee jiraa si buuxda ma loo wada hawl-geliyay?
- Ma jiraan barayaal iyo shaqaale ku filan in ay hawl-maalmeedka dugsiga si wanaagsan u gutaan?

**Cunto Gargaar**

- Sidee ayaa ay muhiim u tahay in la bilaabo cunto qaybin?
- Ma jiraan shaqaale u diyaar ah cunno qaybinta?
- Maxay yihiin agabka loogu talogalay in cunno lagu diyaariyo (jikooyinka iskuulka, bakhaarro, weelka karinta/cunidda, dhuxusha/gaaska karinta iyo ilo-biyood?
- Suurtogal ma tahay in agabkaas la diyaariyo (rakibo)?
- Ma jiraan kaabayaasha gaadiidka iyo bakhaarada?
- Cunnooyin noocee ah ayaa la heli karaa? Xagee iyo sidee ayaa sida ugu dhaqso badan looga heli karaa, loona gaarsiin karaa goobta qaybinta?
- Ma jiraan wax goobo caafimaad ah oo iskuulku leeyahay oo ay tahay in la dhamaystiro/ama la dhiso?

**7. Caqabadaha iminka taagan iyo kuwa la filay**
**Amni**

- Ma jiraan meelo amni ah oo wax lagu baran karaa?

- Goobaha waxbarashadu ma yihiin kuwo si nabadgelyo ah ay u gaari karaan carruurta, barayaasha, iyo shaqaalaha gargaarku?
- Ma jirtaa meel amni ah oo loo diyaariyay in cunno lagu diyaariyo ama lagu qaybiyo?
- Nabadgelyada gaadiidka iyo raridda cunnadu ma tahay mid sugan?
- Cunnada ma loo kaydiyaa si ammaan ah?

**Caqabado Jinsiyeed (gender)/Qoomiyeed(*ethnic*)**

- Ma jiraan dhibaatooyin haysta jinsi(haween/rag) gaar ah?
- Ma jiraan dhibaatooyin/arrimo si gaar ah u taabanayo kooxo (qoomiyad/ deegaanno)

**Sharci Ahaansho**

- Ma jirtaa dawlad si cad qayb uga ah qorshaynta iyo fulinta waxqabadyada?
- Abuuritaanka iyo taageeridda waxbarashu ma haysataa taageerada siyaasiyiinta iyo hogaamiyayaasha bulshada? Haddii ay jawaabtu tahay maya, waa maxay sababtu?
- Khatar ma keenaysaa hadii la'aanta taageeradooda ay sii jirto?
- Wadashaqayn mala abuuri karaa?
- Barnaamijka ma loo qaabeeyay in uu soo jiidan karo taageero?

Waxaa laga soo qaatey: :World Food Programme, Planning for School Feeding in the Emergency Setting – Situation Analysis,Designing the Programme, Implementation, 2004. http://www.wfp.org

**Lifaaqa 3aad: Ururinta Macluumaadka iyo Daraasaynta Baahiyaha**

**Su'aalo**

Aagga:__________________________________________________________

Nooca Xaaladda degdegga ah: ________________________________________

Dhibaatada ugu wayn: ________________________________________________

Weli Dugsiyada ma qaar baa weli shaqayanaya?

| Haa/Maya | Goobta/aha | Tirada Carruurta ka qayb-galaysa Gabdho | Wiilal |
|---|---|---|---|
| ________ | ______________________ | __________ | ____________ |
| ________ | ______________________ | __________ | ____________ |
| ________ | ______________________ | __________ | ____________ |

**1. Sababta (aha) ugu muhiimsan iyo/ama caddaymaha dhibaatada** ☐

- Dhismayaasha dugsiga waxyeelo ayaa gaartay ☐
- Kaydka biyaha ee dugsiga waa mid bed-qaba ☐
- Carruurtu dugsiga dibadda ayay ka yihiin ☐
- Lama hayo qalabka/agabka ☐
- Qoysasku ma awoodaan in ay ay iibsadaan agabka dugsiga ☐
- Barayaashii way tageen ama laga tegay ☐
- Waa la la' yahay dad waaweeyn oo waxbartay oo beddeli kara barayaasha ☐
- Barayaashu ma shaqaynayaan haddaan mushahar la siin ☐
- Safritaanku waa mid halista ah ☐
- Barayaasha ciiddamada ayaa la qoraa ☐
- Qaar carruurta ka mid waa ay qaraxmeen. ☐
- Qaar carruurta ka mid ahí waa kuwa lixaadkoodu kala dhimman yahay ☐
- Carruurta ciidammada ayaa la qoraa ☐

**2. Cayimidda tirada Carruurta**

| | **Tiro guud** | **Hablo** | **Wiilal** |
|---|---|---|---|
| Tirada carruurta | _______ | _______ | ______ |
| 0-5 sano jir | ______% | _____% | ____% |
| 6-13 sano jir | _____ % | ______% | ____% |
| 14 -18 sano | _____ % | _____% | _____% |
| Degaan | _____ % | _____% | _____% |
| Kooytada (IN-movers) | _____ % | _____% | _____% |

**3. Is bar-bar dhigidda Ka horeeya Xaaladda degdegga ah**

| | **Tiro-guud** | | | **Gabdho** | | | **Wiilal** | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Tirada carruurta** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |
| 0-5 sano jir | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |
| 6-13 sano jir | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |
| 14 -18 sano | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |

| | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Degaan | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |
| Kooyto | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** | **Ka yar** | **La mid** | **Ka badan** |

**Sharrax haddii ay jiraan isbedello xagga jinsiga ahí**

Miyay jiraan arrimo muhiim ah oo ay tahay in wax laga qabto sida: jiritaanka kooxo qoomiyad gaar ah ahí? Sharrax

4. Waa sidee heerka waxbarashada carruurtu?

| | Waxbarashada barbaarinta ilmaha | Dugsi hoose | Dugsi dhex (qaan-gaar) |
|---|---|---|---|
| % da' kooxeedka dadka Dhammaystay | ___________ | _________ | __________ |

5. **Maxay yihiin/tahay luuqadda/ha carruurtu adeegsato?**

| | Afka hooyo | Ku hadal | Qorid |
|---|---|---|---|
| Luuqadda degaanka (magacaw) | ______________ | ☐ | ☐ |
| | _______________ | ☐ | ☐ |
| | _______________ | | |
| Kuwo kale (magacaw) | _______________ | ☐ | ☐ |
| | _______________ | ☐ | ☐ |
| | _______________ | ☐ | ☐ |

6 a.Miyaad haysaa khariidadda gobolka oo dhismayaasha bulshada ku muujisan yihiin (sida: dugsiyadda, goobaha caafimaadka iyo meelaha wax lagu caabudo).

6 b. Haddii jawaabta su'aasha 6a ay tahay maya, m asoo heli kartaa mid?

6c. Hadii jawaabta su'aasha 6a tahay haa tilmaan sida loo heli karo macluumaadkan

7. Goobtee baa loo adeegsan karaa fasallada?

| | | Tiradda caruurta ah ee fadhiisan karta |
|---|---|---|
| Dugsiga/fassallada | ☐ | ______________________________ |

| | | |
|---|---|---|
| Xarun dhaqan celis | ☐ | ______________________ |
| Hoy | ☐ | ______________________ |
| Bannaanka (har ah ama geed hoostii) | ☐ | ______________________ |
| Guri | ☐ | ______________________ |
| Dhimsa diimeed | ☐ | ______________________ |
| Xarun caafimaad | ☐ | ______________________ |
| Meelo kale (Faah-faahi) | ☐ | ______________________ |

**8. Adeegyadan soo socda ma yihiin qaar si fudud loo heli karo?**

| | Agagaarka | Fogaan dheer (mitir) | lama heli karo |
|---|---|---|---|
| Biyo (magacaw) | ☐ | ☐ | ☐ |
| Musqulo | ☐ | ☐ | ☐ |
| Goobo qubays | ☐ | ☐ | ☐ |
| Suuliyo | ☐ | ☐ | ☐ |
| Adeeg caafimaad | ☐ | ☐ | ☐ |
| Adeegyada naafadda | ☐ | ☐ | ☐ |
| Nal(layr) | ☐ | ☐ | ☐ |
| | ☐ | ☐ | ☐ |
| | ☐ | ☐ | ☐ |
| | ☐ | ☐ | ☐ |

**9. Socdaal intee la'eg bay carruurtu u maraan si ay fasallada u tagaan?**

| | **0**-25% | 25- 50% | 51-75% | 76-100% |
|---|---|---|---|---|
| **(Inta mitir)** | | | | |
| 500 mitir ama ka yar | -------- | ---------- | -------- | --------- |
| 500 mitir ilaa 1000 mitir | -------- | ---------- | -------- | --------- |
| > 1000 mitir | -------- | ---------- | -------- | --------- |
| **(Inta mayl)** | | | | |
| 1/2 mayl ama ka yar | -------- | ---------- | -------- | --------- |
| 1/2 ilaa 1 mayl | -------- | ---------- | -------- | --------- |
| > 1 mayl | -------- | ---------- | -------- | --------- |

**10. Carruurtu miyaa ay ka qaybqaataan u adeegidda qoyska ama shaqo kale?**

| | Gabdhaha | Wiilasha |
|---|---|---|
| % | ……… | ----------- |

| | | |
|---|---|---|
| Inta saacadood maalintii | ----------- | ------------ |
| Badi gelinka hore ama galinka dambe | ----------- | ------------ |

**11. Tiro intee le'eg (qiyaas ahaan)oo agab waxbarasho ah baa la heli karaa ama loo baahan yahay?**

| (canugiiba) | Inta la heli karo | Inta loo baahan yahay |
|---|---|---|
| Buugaagta daabacan | -------------------- | ----------------------- |
| Maaddada 1aad | -------------------- | ----------------------- |
| Maaddada 2aad | -------------------- | ----------------------- |
| Maadadda 3aad | -------------------- | ----------------------- |
| Looxaan | -------------------- | ----------------------- |
| Taabaashiir | -------------------- | ----------------------- |
| Tirtire **(Ball sponge)** | -------------------- | ----------------------- |
| Buugta qoraalka | -------------------- | ----------------------- |
| Qalmaan | -------------------- | ----------------------- |
| Qalin qori | -------------------- | ----------------------- |
| Qalin midabeeye | -------------------- | ----------------------- |
| Kuwo kale ( magacaw ) | -------------------- | ----------------------- |

**12. Waa maxay tayada agabka wax lagu baro (qiyaastii) ee la heli karo ama loo baahan yahay?**

| | inta la heli karo | inta loo baahan yahay |
|---|---|---|
| (Fasalkii) | | |
| Tilmaame bare | -------------------- | ----------------------- |
| Buugga diiwaan gelinta | -------------------- | ----------------------- |
| Sabuuradda | -------------------- | ----------------------- |
| Khariidaddaha iyo tusaha | -------------------- | ----------------------- |
| Qalmaan/qalin qori | -------------------- | ----------------------- |
| Agab xafiiseed | -------------------- | ----------------------- |
| Kuwo kale (magacaw) | -------------------- | ----------------------- |
| Qalabka ciyaaraha | -------------------- | ----------------------- |

**13. Qofkee baa laga yaabaa in uu u gacan bannaan yahay in uu wax baro carruurta?**

| | Tirada | Haween(%) | Rag (%) |
|---|---|---|---|
| Bare tababaran | --------- | ------------ | --------- |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Xirfadle kaabayaal | --------- | ------------ | --------- |
| Xirfadleyaal kale | --------- | ------------ | --------- |
| (caafimaad kaabayaal/para-medical) | | | |
| Carruurta waaweyn | --------- | ------------ | ---------- |
| Xubno Bulshada ka mid ah | --------- | ------------ | --------- |
| Xubno ka mid ah hay'adaha aan dawliga ahayn | | | |
| | --------- | ------------ | --------- |
| Mutadawaciin | --------- | ------------ | --------- |
| Kuwa kale (magacaw) | --------- | ------------ | --------- |

**14. Ma jiraan dad kale oo la heli karo si ay u taageeraan barayaasha?**

| | Tirada | Haween(%) | lab(%) | Heerka waxbarasho/ shahaadada |
|---|---|---|---|---|
| Xirfadle kaabayaal | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| Xirfadle kale | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| (caafimaad kaabayaal/para-medical) | | | | |
| Carruurta waaweyn | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| Xunbo Bulshada ka mid ah | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| Xubno ka mid ah hay'adaha aan dawliga ahayn | | | | |
| | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| Mutadawaciin | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |
| Kuwa kale (magacaw) | -------- | ------- | ----- | --------------------------------- |

**15. Caruurta miyaa la weheliyaa ama la soo raacaa?**

| | % kooxaha carruurta |
|---|---|
| Qoyska oo dhan baa weheliya | ------------------------- |
| Ugu yaraan hal waalid baa weheliya | ------------------------- |
| Walaal ka weyn baa weheliya | ------------------------- |
| Qof kale oo qoyska ka tirsan baa weheliya | ------------------------- |
| Mutadawac baa weheliya | ------------------------- |
| Qofna ma weheliyo ee waa keli | ------------------------- |

**16. Madaxa qoysku waa ayo?**

| | % kooxaha caruurta |
|---|---|
| Hooyo | ------------------------- |
| Aabbe | ------------------------- |
| Qof kale oo weyn (faahfaahi) | ------------------------- |
| Ilmo kale (walaal gabadh ah oo weyn) | ------------------------- |
| Ilmo kale (walaal wiil ah oo weyn) | ------------------------- |
| Cid kale (magacaw) | ------------------------- |

**17. Laf-dhabarta dhaqaalle ee qoyska ilmuhu waa?**

| | % |
|---|---|
| Beeroley | ------------------------- |
| Farshaxan | ------------------------- |
| Reer-guuraa | ------------------------- |
| Lo' dhaqato | ------------------------- |
| Kuwo kale (magacaw) | ------------------------- |

**18. Waa kuwee farriimaha gaar ahaaneed ee caruurtu gubinayaan?**

Farriimaha fayadhawrka iyo nadaafadda ------------------------------------------------------------ ------------ ---------- -------
-----------------------------------------------------

Farriimo caafimaad ------------------------------------------------------------------------- --------------------------------- ----------
------------------- ---------------------------------------------

Farriimo la xiriira ka digtoonaansho khatareed sida kuwa miinada dhulka lagu aaso ---------------------------------------
------------------------------------------------------------------

----------------------------------------------------------------------------------------------------

Nolol xirfadle --------------------------------------------------------------------------------------------------------- -------------------
------------------------------------------------------------

Kuwo kale (magacaw) --------------------------------------------------------------------------------------------------------------
---------------------------------------------------------------

**19. Jiritaanka hay'adaha hormuudka ah ee shaqeeya kuwaas oo saamayn ku yeeshay bulshada (qaar kood magacaw):**

| Guddidda Bulshada | Caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

| Haynta wasaaradda warbarashada | caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

| Mac-hadka tababarka barayaasha | caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

Hay’adaha waxbarasho ee heer-qoys ee an dawliga ahayn

| | caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

| Hay’adaha Qaramada Midoobay | caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

| Kuwo kale (magacaw) | caam | joogto | aan joogto ahayn | aan jirin |
|---|---|---|---|---|
| 1. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2. ----------------------------- | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

# 2. Gaaritaanka (access) iyo Bey'ada Waxbarashada

**Hordhac**

Marka lagu jiro xaaladda adag ah, helitaanka xuquuda iyo khayraadka (*resources*) mahuraanka ka ah ee waxbarasho aad bay u yaraayeen. Hase ahaatee, waxbarashadu waxay ay ka ciyaari kartaa door muhiim ah sidii bulshada loo gaarsiin lahaa gargaar wax ku ool ah si maaro loogu heli iyada oo la siinayo aqoon iyo xirfado lagaga badbaadin karo xaaladda ay hadda ku sugan yihiin si ay dib ugu soo ceshadaan noloshii caadiga ahayd. Isla markaana, waxa adag in lagu tallaabsado waxqabadyo waxbarasho marka lagu jiro xaalad deg-deg ah, sidoo kale waxaa suurtogal ah, gaar ahaan dadka nugul, in ay halis gasho helitaanka fursadaha waxbarasho ee loo qoondeeyay. Dawladaha, bulshooyinka iyo hay'adaha gargaarka bani'aadannimaduba waxay mas'uul ka yihiin sidii ay hubanti uga dhigi lahaayeen qof kasta inuu helo fursad waxbarasho tayo leh, iyo meel ku habboon goob waxbarasho, goobtaasi oo ah mid kobcinaysa maskaxda, dareen ka iyo rabitaanka bartaha (ardayga).

Barnaamijyada waxbarasho ee xaaladaha degdegga ahí waxa ay siin karaan kuwa waxbaranaya, gaar ahaan carruurta, dhallinyarada iyo shaqaalaha waxbarashada badbaadin jir ahaaneed, mid bulsheed iyo mid xagga garashada ah. Si kastaba ha ahaatee badanaaba kuwa waxbaranaya (ardayda) waxaa soo waajaha haliso jir ahaneed iyo kuwo nafsaani ah marka ay u socdaan iyo marka ay ka imaanayaan dugsiyada iyo weliba bey'ada waxbarashada dhexdeeda. Dhibaatooyinkaasi waxa ay si aan isu dheelitirnayn ugu dhacaan gabdhaha iyo macallimiinta haweenka ah. Marka la bixinayo adeegyo waxbarasho, waxaa waajib ah in hubanti laga dhigo in ardaydu ay amni helaan (badbaadin) marka ay dugsiyada aadayaan iyo marka ay ka imaanayaan iyo weliba inta ay ku dhex jiraan goobta wax lagu baranayo laftigeeda.

Waa in la bixiyaa fursado waxbarasho toos ah iyo kuwa dadban oo mar walba la sii horumarinayo. Haddii waxbarasho toos ahí aanay isla marka xaaladda degdegga ahí bilaabataba suurtogal ahayn, barnaamijyada waxbarasho waa in ay habeeyaan jimicsiyo xagga jirka ah (cayaaro kala duwan), waxbarasho dadban, barnaamijyo kor loogu soo qaadayo heerka waxbarasho ee carruurta roon-roon si ay ula qabsadaan (haddii ay lagama maarmaan noqoto); sidoo kale waa in ay abuuraan fursad dhallinyaradu ay ku sii wataan, korna ugu sii qaadaan waxbarashadooda xirfadeed ee aasaasiga ah, iyo waxbarasho dadban ama tabobar xirfadeed la

siinayo carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweeynba ee aan dhamaysan ama aan bilaabinba waxbarashada aasaasiga ah.

Dadyawga kooxo ama shaqsiyaad ka mid ah ayaa laga yaabaa  in ay si gaar ah dhibaato ugu noqoto in ay gaari karaan waxbarasho iyo fursado barasho taas oo ka dhalatay kala isir soocid. Kuwa waxbarashada gacanta ka geeysanaya (gacanta ku haya)  waa in ay daraaseeyaan baahiya gaar ahaaneed ee kooxaha nugl ee leh baahiya gaarka ah, sida dadka lixaadkoodu kala dhiman yahay, gabdhaha qaan-gaarka ah, carruurta la xiriira xoogagga dagaalamaya, carruurta la afduubay, hooyooyinka ummula iyaga oo da'doodu aadka u yar tahay,  iwm si loo hubiyo in ay ka faa'iidaystaan fursadaha waxbarasho. Wax ka qabashada dhinaca waxbarashu waa in aanay xoogga saarin waxbarashada tooska ah iyo ta dadban oo keliya, laakin sidoo kale waa in ay awoodda saaraan caqabadaha kale ee ay ka midka yihiin isir soocidda, ujuurada dugsiga, dhibta xagga luuqadaha la xiriirta, ee kooxo gaar uga saaraya dadka inta kale. Gaar ahaan, fursado dheeri ah, ha noqdaan kuwa toos ah, dadban ama farsamada  ah, ayaa loo baahan yahay si loo daboolo baahiyaha gabdhaha iyo haweenka ay u suurtoobi wayday waxbarasho ama caqabadaha kala kulma si ay u wataan waxbarashadooda.

## Xiriirka kala dhexeeya jaangooyooyinka ay wadaagaan qaybaha oo dhami

Nidaamka kobcinta iyo fulinta waxqabadyada waxbarashadu waa kuwo aad  muhiim ugu ah waxtarkeeda. Waaxdan waa in la adeegsadaa iyada oo lala xiriirinayo jaangooyooyinka ay qaybaha oo dhami wadaagaan, kuwaas oo ah bulshada, ka qayb-galka, khayraadka gudaha, daraasaadka bilawga ah, wax ka qabashada, la socodka iyo qiimaynta. Gaar ahaan, ka qayb-galka dadyawga masiibadu aafaysay – oo ay ku jiraan kooxaha nugul – waa in la gaarsiiyaa heerka ugu sarreeya si loo hubiyo  tayadeeda iyo ku haboonaanshaheedaba.

- ***Jaangooyooyinka ugu hooseeya*:** kuwani waa kuwo caadiyan tayo-sheegayaal ah, waxaana ay cayimaan heerka ugu hooseeya ee ay tahay in la gaaro marka wax laga qabanayo dhinaca waxbarashada.
- ***Tilmaamayaasha muhiimka ah*:**  Kuwani waa calaamado tusinaya in qiyaastii la gaaray iyo in kale. Waxa ay sahlaan hab loo cabbiro, loona sheego raadka ama natiijada barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raaca iyo farsamada la adeegsaday. Tilmaamayaashu waxa ay noqon karaan tayo-sheegeyaal iyo tiro-sheegayaalba.
- ***Qoraalada hagidda***: kuwani waxaa ku jira baro mucayin ah oo ay tahay in tixgelin gaar ah la siiyo marka lagu dabakhayo Jaangooyooyinka, iyo tilmaamayaasha xaalado kala duwan, hagidda la tacaalidda dhibaatooyinka waaqiciga ah, iyo ka talo bixinta u kala hor marinta arrimaha sida ay u kala muhiimsan yihiin. Waxaa kale oo ku jiri kara arrimo aad u xasaasi ah oo la xiriira jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha, iyo sidoo kale qeexidda arrimaha lagu wareero ama kuwa is burinaya, ama dulduleelada ku jira aqoonta arrintan loo leeyahay.Lifaaqa 2aad waxa raacaya liisto loo doortay tixraac, taas oo tilmaamaysa ilihii laga soo kala qaatay xogta guud iyo tan farsamo ahaaneed ee la xiriirta waaxdan.

| |
|---|
| **Lifaaqa 1aad**<br>**Liistada hubeedka arriamahs nafsaani-bulsheedka ah (Psychosocial)** |
| **Lifaaqa 2aad**<br>**Liista hubineedka  Barnaamijka Quudinta Carruurta** |
| **Lifaaqa 3aad**<br>**Foomka xog ururinta iyo daraasaadka** |
| **Dejiska 2aad: Tixraacyo iyo hagaha ilaha ee**<br>**Qaybta Gaaritaanka iyo  Bey'ada Waxbarashada** |

## Gaaritaanka Bey'ada Waxbarasho, jaangooyada1aad: Gaaritaan loo siman yahay

### Shaqsi waliba wuxuu heli karaa fursado waxbarasho oo ku habboon, tayana leh

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Qofna looma diidi karo, iyada oo la isir soocayo, gaaritaanka waxbarasho iyo helitaanka fursado waxbarasho.
- Dukumentiyo ama shuruudo kale waa in aanay caqabado ku noqon isqoritaanka (Qoraallada Hagidda 1-2)
- Fursado waxbarasho toos ah iyo kuwo dadban ayaa si isa soo taraysa loo siiyaa dadyawga aafoobay si looga haqabtiro baahiyahooda waxbarasho (Qoraallada Hagidda 4-5)
- Iyada oo la adeegsanayo tababarro, iyo wacyigelin waa in bulshada si isa soo taraysa ugu lug lahaataa si loo hubiyo in xubnaheeda oo dhami ay u helaan xuquuqda ay u leeyihiin waxbarasho ku habboon, tayo fiican na leh (Qoraallada Hagidda 6-7)
- Dhaqaale (khayraad) ku filan ayaa ay u qoondeeyaan mas'uuliyiinta, deeq-bixiyayaasha, iyo NGO-yada, iyo ururrada kale ee horumarinta iyo bulshooyinku, si hubanti looga dhigo sii socodka waxqabadyo tayo leh oo xagga waxbarashada ah ee dhammaan wejiyada xaaladda degdegga ah iyo dib u dhiska hore (eeg Qoraalka Hagidda 8)
- Kuwa waxbaranayaa (ardayda) waxa ay fursad u haystaan in ay galaan ama dib mar labaad ugu noqdaan waxbarashada tooska ah sida ugu dhaqsaha badan, xaaladda degdeg ah ee qas gelisay waxbarashadooda ka bacdi.
- Barnaamijka waxbarashada waxaa aqoonsan maamulayaasha wadanka loo martida yahay iyo/ama wadankii ay ka yimaadeen.

**Qoraallada Hagidda**

***1. Takoorka waxa loola jeedaa*,** in kasta oo aanay ku koobnayn, caqabadaha la hordhigay ee ay sababeen saboolnimo, dhedig/labood, da'ada, jinsiyadda, isir, diin, luuqad, dhaqan, xiriir siyaasadeed, jinsiga, aasaaska dhaqaale bulsheed, degaanka, ama baahida waxbarasho ee gaar ahaaneed.

Xeer caalamiga ah ee xuquuqda Dhaqaale, Bulsho, iyo Dhaqan waxa uu sheegayaa sida soo socota:-

- Qodobka 2 waxa uu aqoonsan yahay "xuquuqda waxbarasho ee aan ku salaysnayn isir sooc nooc-kastaba ha noqdee sida: jinsi, midab, lab/dhadig, luuqad, diin, siyaasad ama fikir kale, jinsiyadda dhalashada, asal ahaan halka uu ka soo jeedo, hanti, dhalasho ama xaalad kale;
- Qodobka 13 waxa uu aqoonsan yahay xuquuqda qof waliba u leeyahay wax barashada taas " oo lagu jiheeyay sidii si dhamaystiran oo loogu kobcin lahaa awoodda qofnimo ee shaqsiga iyo dareenka sharaftiisa, iyo xoojinta ilaalinta xuquuqda aadamaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah. Waxbarashadu waxa ay u suurtogalin doontaa dadka oo dhan in ay si waxtar leh uga qayb-qaataan bulshada xorta ah dhexdeeda, kor u qaadaan is fahanka, dulqaadka, iyo saaxiibtinimada u dhexaysa wadammada iyo dhammaan jinsiyadaha, isirka (quruumaha) ama kooxa diimeedyada, iyo weliba waxqabadyada Qaramada Midoobey ee la xiriira joogtaynta nabadda". Qodobka 13aad sidoo kale waxa uu ku waajibinayaa dawladaha in ay aqoonsadaan in, iyaga oo ka duulaya sidii si dhamaystiran loogu guulaysan lahaa xaqiijinta xuquuqdan 1)waxbarashada aasaasiga ahí in ay tahay mid qasab ah oo lacag la'aan u ah cid walba 2)waxbarashada dugsiga sare noocyadeeda kala duwan oo ay ku jiraan kuwa

farsamo, xirfadaha ee heerka waxbarasho ee dugsi sare, guud ahaan, waa in cid waliba ay heli kartaa, kuna gaari kartaa dariiq kasta oo ku habboon, iyo gaar ahaan waxbarasho lacag la'aan ah oo tartiib-tartiib dadka loo wada gaarsiiyo; 3) waxbarashada aasaasiga ah waa in la dhiirigeliyaa ama lagu fidiyaa ilaa inta suurtogalka ah dadka aan helin ama aan dhamaystiran waxbarashadooda heerka hoose.

***2. Sharciyada caalamiga ah iyo xeerarka*** cadaynaya xuquuqda waxbarashada marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah waa in lagu dhegganaadaa. Kuwaasi waxaa ka mid ah, in kasta oo aanay iyaga uun ku koobnayn:-

- Fulitnii Qorshihii Waxbarashada Adduunka ee Dhakar, Horumarinta Waxbarashada Loo dhan yahay, taas oo mid ka mid ah ujeeddooyinkeeda ku caddaysay in ay tahay in dawladuhu "ay daboolaan baahiyaha nidaamyada waxbarasho ee dadyawga ay aafeeyaan, iska hor imaadyada, masiibooyinka dabiiciga ah, iyo degenaansho la'aanta, iyo in ay barnaamijyada waxbarashada u qaabeeyaan hab ku salaysan isfahan, nabad iyo dulqaad, gacanna ka geysanaya ka hortagga qalalaasaha iyo iska hor imaadyada;
- Heshiiskii Jineefa (IV) ee la xiriiray badbaadinta dadka shicibka ah xilliyada dagaaladu socdaan (qodobka 50aad) "xoogagga meesha qabsaday waa in ay, iyaga oo iskaashi la samaynaya maamulka heer degaan iyo mid qaran, ay fududeeyaan sidii ay si habboon ugu shaqayn lahaayeen hay'adaha u xilsaaran carruurta iyo waxbarashadooda;
- Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta (CRC) ee damaanad qaadaya ilaalinta jir ahaaneed, bulsho ahaaneed, mid nafsaani ah ee ku barashada xaaladda degdegga ah.

**3. *Oggolaanshaha (admisions) iyo isqoridda*:** shuruudaha diiwaan gelintu waa in ay yihiin kuwo aan adkayn, waana in aan loo baahan caddaymo wadaninimo, da'eed ama dhalasho, warqadaha cadaymaha, warbixinaha dugsiyada, iwm, maaddaama dadyawga aafoobay aanay haysan dukumintiyadan, carruurta iyo dhallinyarada dadka masiibooyinka aafeeyeen waa in aan lagu xirin da'. Ardayda dugsiyada iskaga taga waa in fursad labaad loo siiyaa oo dib loo qoraa. Waa in dedaal gaar ah, la qaadaa, kaas oo lagu bartilmaameedsanayo, lagagana qayb gelinayo dadka la xaqiro, iyo kuwa nugul ee waxbaranaya. Haddii uu jiro walaac xagga amniga ahí, waa in dukumintiyada in la qariyaa.

**4. *Fursadaha waxbarasho*:** fursadahaas waa in ay ku jiraan ciyaalka aadka u yar-yar (xanaanada caruurta), dugsi hoose iyo mid sare, xirfadaha, iyo tababaro farsamo, iyo waxbarasho dadban (oo ay ku jiraan akhris qoraal far barad iyo tiro barad ah) iyo fursado la dedejiyay oo wax barasho, marka ay haboonaato. Qaracan (*truama*) ay soo mareen oo ka dhashay xaaladda degdegga ah waa in aanu cudur daar u noqon in ay waxbarashada ka dhacaan ama gaari waayaan.

Jadwal debecsan, oo ay ku jiraan saacado kala duwan dugsiyada la dhiganayo, iyo kaltamo (shifts), dugsiyada, barnaamijyada dadka fog lagu gaarayo, adeegyada xannaanada carruurta ee loo fidiyo hooyooyinka dhalay iyaga oo da'doodu aad u yar tahay (dhowr iyo toban jirro), iyo taageero ay kuwa la da'da ahí u fidiyaan ardayda ay ku adkaato in ay la wadaagaan ama ay ku milmaan fasallada, iyo fasallo kor loogu soo qaadayo heerkooda waxbarasho, iyo barasho farsamo, waxaa laga yaabaa in ay kuwo badan oo waxbarasho doonaya u suurtogeliso in ay uga faa'iidaystaan fursado waxbarasho. In lagu qasbo dadka waaweeyni in ay la fasal noqdaan carruurta amaba loo oggolaado in ay si mutadawacnimo ah fasallada caadiga ah ee carruurta – ka yar yar, waxa ay ku keeni kartaa cirib xumo carruuta iyo dadka waaweeyn ee waxbaranayaba iyo weliba iyada oo sababta oo aan midkoodna helin waxbarasho ku filan. Siyaabo kala duwan, sida iyada oo fasallo gaar ah loo sameeyo dadka waaweeyn iyo koorasyo degdeg ah, waa in la adeegsadaa marka ay habboonaato. Xubno ka wakiil ah dhallinyarada, ururrada haweenka, hogaamiyayaasha bulshada iyo qaybaha kale ee bulshada waa in lala tashadaa ka hor inta aan loo beddelin dugsiyada kuwa dadban.

Farsamooyinka ay ka midka yihiin "Khariidadaynta Dugsiyada – *school mapping*" waa in la adeegsadaa inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah iyo ka dibba si loo qorsheeyo in si aan qaali ahayn ay dadka ay suurtagal tahay in ay waxbartaan ee goobo kala duwan jooga ay u soo gaari karaan dhammaan waxqabadyada waxbarashada ee la bixinayo waqtiga xaaladaha degdegga ahi jiraan.

**5. *Kooxo da'eed*** *(age groups)* Fursadaha waxbarasho waa in ay mudnaanta siiyaan kooxo da'eedyo (carruurta iyo dhallinyarada), iyo waxyaabaha ay ka kooban tahay (sida macluumaadka naf-badbaadinta ee dhammaan wejiga bilowga ee xaaladda degdegga ah). Isla marka xaaladda degdegga ahi degto, fursadaha waxbarasho waxaa loo fudin karaa da'aha kala duwan ee dadka oo dhan si siyaabo kala duwan oo ku habboon kor loogu qaado noloshooda.

**6. *"Tayo"*** *iyo "Waxbarasho ku habboon"* eeg dhejiska (annex) 1aad: Jaangooyooyinka ugu hooseeyaha ee Waxbarashada Xaaladaha degdegga ah: Eray bixinta bogga 79aad ee qeexidda tibaaxahaas.

**7. *Ku lug lahaanshaha bulshada:*** bulshooyinku waa in ay si firfircoon ugu lug lahaadaan geeddi-socodka waxbarashada. Tani waxa ay gacan ka geeysan kartaa buuxinta xiriirada dhiman, raadinta khayraadyo dheeraad ah, iyo wax ka qabashada welwelka nabadgelyada la xiriira iyo kor u qaadidda ka qayb-galka kooxaha la fogeeyo (*marginalized groups*) (eeg sidoo kale dhejiska 1aad: Eray bixinta bogga 79aad iyo Jaangooyooyinka ka qayb-galka bulshada 1-2 ee bogagga 14-19).

**8. *Khayraadyada*:** deeq bixiyayaashu waa in ay noqdaan kuwo debacsan ayna taageeraan istaraatijiyado kala duwan si hubanti looga dhigo sii socodka waxqabadyada waxbarashada, laga bilaabo heerka bilawga ah ee xaaladda degdegga ah ilaa laga gaaro dib u dhiska. Dawladaha heer qaran ayaa iska leh waajibaadka kama dambaysta ee damaanad qaadka waxbarashada waxaana ay u dhawdahay in ay maalgelin ka helaan ilo kala duwan. Deeq-bixiyayaasha kale waxaa ka mid ah bulshada caalamiga ah (heshiisyo laba-geesood ama ka badan), ururrada caalimaga ah iyo kuwa wadaniga ah ee aan dawliga ahayn, maamulayaasha degaanka, ururro diimeedyada, ururrada bulshada rayidka ah, iyo la-hawlgalayaasha (*partners*) kale ee horumarinta (eeg jaangooyada 2aad ee Lafaguridda, Qoraalka Hagidda 4aad ee bogga 24aad).

Yoolka qorshaynta khayraadku waa in uu ahaadaa sidii loo fidin lahaa fursadaha waxbarasho ee dhaqsaha ah, laakiin waaritaanka iyo qorshaha muddada dheeri (oo ay ku jiraan suurtogalnimada ah in xaaladda degdegga ahi dabadheeraato) iyo sida uu noqonayo dib u dhiska mustaqbalku waa in iyana lagu xisaabtamaa. Wadashaqaynta iyo isku dubbarididda mas'uuliyiinta ay khusaysaa waxa ay caawin kartaa in hubanti laga dhigo degenaanshaha (sidoo kale eeg Siyaasadda waxbarashada iyo iskudubbarididda, jaagooyadaa 3aad ee bogga 77).

Wax ka qabashada degdegga ah ee waxbarashadu marka lagu jiro xaalado degdeg ah waxay u baahan tahay in maalgelin dhaqso loo helo. Maalgelinta marka lagu jiro xaalado degdeg ah oo dabodheeraaday, waa in maalgelintu ku fillaataa daboolidda waxbarashada carruurta iyo dhallinyarada u oggolaan doonta inay sii wataan horumarkooda iyaga oo u sii maraya barnaamijyada dugsiyada caadiga ah. Marka la marayo heerka xilliga hore ee dib u dhiska, waa in la maalgeliyaa meesha u baahan si loo xoojiyo maamulka iyo qorshaynta waxbarashada ee heer wadan iyo mid degaanba. Khayraadka deeq-bixiyayaashu waa in uu suurtogeliyaa in barnaamijyada waxbarashadu ay ka taabogalaan goobaha oo dhan iyaga oo adeegsanaya guryo (gabboodyo) ku meel gaar ah, bixinayana agabka waxbaridda iyo barashada.

## Gaaritaanka Bey'ada Waxbarasho, jaangooyada 2aad: Badbaadin iyo Fayoobid (*well-being)*

### Bey'ada wax lagu baranayaa waa mid nabad ah, horena u marinaysa amniga iyo maskaxda iyo dareenka fayoow ee kuwa waxbaranaya

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Dugsiyada iyo bey'ooyinka waxbarashadu waxa laga sameeyaa meel u dhow dadyawga ay u adeegayaan (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Jidadka loo maro goobaha waxbarashadu waa kuwo amni iyo badbaado cid walba u ah (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Goobta waxbarasho xor ayaa ay ka tahay halis soo gaarta kuwa wax baranaya (eeg Qoraallada Hagidda 4-5)
- Barnaamijyada tababarka barayaasha iyo kuwa baranaya iyo bulshaduba door ayaa ay ku leeyihiin kor u qaadidda badbaadada, amniga iyo ilaalinta.
- Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada waxa la siiyaa taageero xirfado nafsaani ah (*psychosocia*l) si ay kor ugu qaadaan fayoobida dareenka bartaha (eeg Qoraalka Hagidda 6)
- Bulshada waxaa laga qayb-geliyaa go'aaminta meesha laga dhigayo goob waxbarasho, iyo dejinta nidaamyada iyo siyaasadaha si hubanti looga dhigo in kuwa waxbaranayaa ay helaan amni iyo badbaado.
- Baahiyaha nafaqo iyo cuntada muddada gaaban ee kuwa waxbaranaya waa in wax laga qabtaa si ay ugu saamaxdo in goobta waxbarashada ay ka dhacdo waxbarasho tayo waxtar lihi (eeg Qoraalka Hagidda 7)

***Qoraallada Hagidda***

1. ***Dhawaansho*** *waa* in loo qeexaa su waafaqsab jaangooyada deegaanka/dalka, iyada oo maskaxda lagu hayo dhibaatooyinka amniga la xiriira ama walaacyada kale ee badbaadada. Meelaha ay fogaantu tahay mid yara durugsan, waan in faracyo (dhow oo kuwa tooska ah u soo gudbiya ardayda) fasallo ah laga sameeyo goobaha u dhow guryaha kuwa aan meelna gaari karin sida carruurta aadka u yar yar ama gabdhaha qaangaarka ah.

2. ***Ammaan***: haddii dhismayaasha caadiga ah ee waxbarashadu aanay jirin ama aanay amni ahayn, waa in la doortaa goobo kale oo amni iyo badbaado ah. Xoogagga nabad-sugiddu waa in aanay goobaha waxbarashada ka dhigan gaboodyo ku meel gaar ah.

3. ***Waddooyinka la maro:*** Dawladda waxaa ku waajib ah in ay damaanad qaaddo sugidda ammaanka. Amaankani waa uu ahaadaa mid ku filan, lehna tayo wanaag booliska ah, iyo ciidan la dhigo marka ay haboonaato, ayna lagama maarmaanka tahay. Si kor loogu qaado badbaadada iyo hubinta in jidadka la marayaa ay yihiin kuwo amni ah, ayna ku badbaadayaan dhammaan kuwa waxbaranaya iyo shaqaalaha waxbarashuba (iyada oo aan loo eegayn jinsiga, da'ada, dhalashadiisa, isirkiisa, halka uu kasoo jeedo, iyo awooddiisa jir ahaaneed), bulshooyinku waa in ay ka wada hadlaan, kuna heshiiyaan talaabooyin ka hortag, sida dad waaweeyn oo sii gelbiya. Tani waxa kale oo ay qayb ka noqon kartaa ajandaha guddiga waxbarashada bulshada.

4. ***Badbaado***: kuwa waxbaranaya waa in laga badbaadiyaa haliso waxyeelayn kara, oo ay ka mid yihiin in kasta oo aysan ku koobnayn, halisaha dabiiciga ah, hub, rasaas, miino, waxyaabaha qarxa, ciidamada hubaysan, meelaha la isku rasaaseeyo, handadaadaha siyaasadeed iyo ciidan, iyo in askar ka dhigasho.

Ardayda, gaar ahaan kuwa laga tirada badan yahay iyo gabdhuhu, badanaaba waxa ay bar tilmaameed u noqdaan xadgudubyada, fadqalalooyinka, askar ka dhigasho, ama afduub marka ay dugsiyada ku socdaan ama ka imaanayaan. Marka xaaladaha noocan ah lagu jiro, amniga ardayda waxaa kor loogu qaadi karaa iyada oo la isku daro ololayaal bulshada lagu wacyi gelinayo iyo in ay dadka waaweeyn sii kaxeeyaan, soona celiyaan ardayda. Meelaha ay tahay in ardaydu dugsiyada ka yimaadaan habeenkii ee leh waddooyinka mugdiga ah, waa in dharkooda ama shandadahooda lahaadaan meelo iftiinka soo celiya (*reflectors*), ama lagu dhejiyaa calaamado iftimaya ama waa in loo habeeyaa toojaj (iftiino) lagu gudbiyo. Xilliga iyo hadfii loo baahdo waa in haween joogaan goobaha ay dhadiggu wax ku baranayaan si damaanad loo siiyo. Sidoo kale waa in barnaamijyada waxbarashada lagu daraa nidaam lagula soconayo heerka tacadiyada la soo gudboonaada hablaha iyo dumarka.

5. ***Maareyn fasalka ee aan rabshad lahaynd***: daandaansiga ayaa ka mid ah iyo sidoo kale: werwer maskaxeed, fadqalalo, xadgudubyo, iyo isir sooc. Barayaasha waa in lagu tababaraa sida habboon ee fasalka loo maareeyo si ay hubanti uga dhigaan in aaney dhicin daandaansi (ka caraysiin), ganaaxa horjoogaha fasalka waa in aan la adeegsan ama la dhiirri-gelin.

6. ***Fayoobi***: fayoobidda dareen ahaaneed iyo maskax ahaaneed waa in si dhamaystiran loo fahmaa waxa u wanaagsan qofka: nabadgelyadiisa, badbaadadiisa, tayada adeegga, farxadda, iyo diirrimaadka xiriirada ka dhexeeya kuwa waxbarashada bixinaya iyo kuwa la siinayo. Waxqabadyada la adeegsanayo si loo hubiyo fayo-qabka ruuxa waxbaranaya waa in xoogga lagu saaraa kor u qaadidda kobcin garasho wanaag, aasaas adag oo is dhexgalka bulshada ah, iyo caafimaad wanaagsan. Hubinta fayo-qabku sidoo kale waxa ay gacan ka gaysataa in ruuxa waxbaranayaa si dhamaystiran ugu guulaysto barnaamijka waxbarashada tooska ah ama ta dadban (eeg Lifaaqa 1 ee bogga 49aad ee liisto hubineedka nafsaani-bulsho (*psychosocial*)

7. ***Nafaqo***: baahiyaha waqtiga dhow iyo gaajada waa in wax laga qabtaa iyada oo loo adeegsanayo barnaamijka quudinta dugsiyada iyo barnaamijyada kale ee haqab tirka cuntada ee ka baxsan goobta waxbarashdaa. Haddii barnaamijka quudinta dugsiga la fuliyo, waa in loo raacaa Qoraallada Hagidda ay adeegsadaan hay'adaha kale, sida WFP (eeg Lifaaqa 2aad ee bogga 51aad, ee liistada hubinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada).

## Gaaritaanka Bey'ada Waxbarasho, Jaangooyada 3aad: Sahalayaasha (*facilities*)

**Sahalayaasha Waxbarashada waxa ay u fiican yihiin fayoobida jir ahaaneed ee kuwa waxbaranaya**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Nidaamka barashadu iyo goobtu waxa ay u furan yihiin cid walba, iyada oo aan loo eegayn lixadkiis jir ahaaneed
- Bey'ada waxbarashada waxaa ay leedahay soohdimo muuqda iyo calaamado cid waliba arki karo, marka ay ku habboonaato
- Qaab dhismeedka maadiga ah ee oo loo adeegsaday goobta waxbarashadu waxa uu ku habboon yahay xaaladda oo ay ku jirto aag ku filan fasallada iyo maamulka, ciyaaraha iyo arrimaha nadaafadda la xiriira (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Dhulka u dhexaynaya iyo sida kuraasta loo habaynayo waxaa lagu salaynayaa saamiga tirada ardayda ee bare walba ku soo aadaysa iyo sidoo kale heerka fasalka, si loo horumariyo nidaamka ka qayb-galka iyo waxbaridda bartuhu xuddun u yahay (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Bulshadu waxa ay ka qayb-qaadataa dhismaha iyo dayactirka bey'ada waxbarashada (eeg Qoraalka Hagidda 2)
- Caafimaadka iyo nadaafadda aasaasiga ah ayaa laga dhiiri geliyaa goobaha waxbarashada
- Musqullo ku filan waa in la sameeyaa, iyada oo lagu xisaabtamayo da'ada, jinsiga, baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah iyo tixgelinaha, oo ay ku jiraan gaaritaanka dadka lixaadkoodu kala dhimman yahay (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Tiro ku filan oo goobaha biyaha laga cabbo iyo kuwa la isku nadiifiyaba waa in laga heli karaa goobaha waxbarashada (eeg Qoraalka Hagidda 4)

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Dhismaha***: ku habboonaanshaha dhismahu waa in maskaxda lagu hayaa adeegsiga muddada dheer (xaaladda degdegga ah ka dib), miisaaniyadda la hayo iyo ku luglahaanshaha bulshada iyo in ay ku dayactiri karaan masuuliyiinta deegaanka iyo/ama bulshada qiimo suurtogal. Waxaa suurtogal ah in dhismahu yahay mid ku meel-gaar ah ama mid meel dhexaad ah, mid joogta ah (muddada dheer), joogto u dhow, ama mid marba meel loo raro.

Waa in arrimahan maxkaxda lagu hayaa:-

- Agab degaanka laga soo iibsan karo iyo shaqaale, marka la heli karo, waa in loo isticmaalaa dhismaha. Waa in la qaadaa tallaabooyin lagu hubinayo in dhismaha iyo qiimaha uu ku kacayaa ay yihiin kuwo isu qalma iyo dhismaha (sida saqafka iyo sagxadda) in ay yahiin kuwa raagaya;
- Iftiin ku filan, hawo-marin iyo iyo kulayl ku filan (marka loo baahdo) waa in la heli karaa si kor loogu qaado bey'ada baridda iyo barashada.
- Iyada oo lagu salaynayo xaqiiqada dhabta ah ee degaanka ka jirta waa in la go'aamiyaa cabbirka ugu weyn ee fasalku noqon karo, waana in la sameeyaa wax kasta oo suurtogal ah in dhul bannaan loo reebo fasallo dheeraad ah haddii isqoriddu kororto, si isa soo taraysa loogu yareeyo kaltanka (*shifts*) badan.

- Barnaamijyada waxbarashada ma aha in la joojiyo ilaa kaabayaasha uu ka kooban yahay la dhamaystirayo, ee weli ba dhulka dheeraadka ah ee kor lagu xusay la helayo. Qaybahaasi, si kastaba ha ahaatee, waa in loo meel-mariyaa sida ugu dhaqso badan.

(Eeg xiriirka kala dhexeeya Jaangooyooyinka Dhejiska *Sphere* ee MSEE CD-ROM ee jaangooyooyinka gabboodka ee *Sphere*)

2. Dayactirka Bey'ada (goobta) wax lagu baranayaa waa in ay ku jiraan sahlayaasha (sida musqulada, dhuumaha biyaha iwm) qalabka (sida kuraasta, miisaska, sabuuradaha, iyo armaajooyinka iwm.)
3. Sahalayaasha nadaafadda waa in ay ku jiraan meelaha qashinka adag lagu asturo (haamo, godadka qashinka), kannaallada wasakhdu (kuwa nuuga iyo kuwa fogeeya) iyo biyo ku filan is nadiifinta qofka, iyo musqulo nadiif ah. Goobta waxbarashadu waa in ay lahaataa musqullo u kala soocan labka iyo dheddigga, oo si fiican u asturan. Agabka caafidhowrka haweenka waa in uu u yaalla (Eeg xiriirka kala dhexeeya Jaangooyooyinka Dhejiska *Sphere* ee MSEE CD-ROM ee jaangooyooyinka asturidda qashinsaarka iyo dharka).
4. Biyo waa in laga heli karaa goobta waxbarashada ama meel aan ka fogeyn si waafaqsan jaangooyooyinka caalamiga/deegaanka (Eeg xiriirka kala dhexeeya Jaangooyooyinka Dhejiska *Sphere* ee MSEE CD-ROM ee jaangooyooyinka *Sphere* ee biyaha).

# Gaaritaanka iyo Bey'ada Barashada

# Lifaaqyada

## Lifaaq 1aad: Liisto hubineedda nafsaani-bulsho (psychosocial)

Hababka gaarka ah ee loo sahmiyo waxa ay ku xirnaan doonaantaa xaaladda degaanka iyo dhaqanka. Kuwa soo socdaa waxa ay metelaan nooca macluumaadka ee muhiimka u ah marka laga hadlayo arimaha fayoobidda nafsaani-bulsho iyo iyo soo kabashada.

**Xaaladaha Guud**

- Ma ahaayeen xaaladaha fadqalaladu kuwo ka dhashay dhacdooyin argogax (jaahwareer leh)?
- Miyay istaageen xaaladahii xadgudbiyadu mise weli way socdaan oo wax ay u abuurayaan jawi nabadgelyo darro carruurta iyo qoysaskooda?
- Qoysasku ma wada nool yihiin?
- Ma haystaan asturnaan (privacy) ku filan?
- Maxaa la qabtay si loogu suurtogeliyo qoysasku in ay carruurtoodu ku noolaadaan sharaf, la siiyo daryeel, iyo badbaado?, Maxaase la qaban karaa?
- Maxay yihiin waxqabadyada bulshada ee caadiga ah ee loogu talagalay in lagu caawiyo carruurta dhibaatooyinka qaba?
- Maxay yihiin farsamooyinka bulshadu u adeegsato wax ka qabadka iyo la tacaamulidda silica nafsaani-bulsho (psychosocial)? Sidee baa loo sii xoojin karaa ama loo dhisi karaa?
- Sidee ayay nidaamyada guud ee nolosha iyo nidaamayada isku xirnaanshaha bulshada u saameeyeen badbaadinta iyo daryeelka carruurta?
- Tallaabooyin noocee ah ayaa la qaadi karaa si kor loogu qaado xaaladaha nolosha ee carruurta iyo qoysaskooda?
- Ma jiraan shaqsiyaad bulshada ka tirsan oo waxqabad joogto ah u fidiya carruurta, sida waxbarasho dadban, ciyaar, iyo jimicsiyo?

**Waalidiinta**

- Waa maxay nooca dhibaatada iyo qalafsanaanta soo waajahay waalidiinta ee saamaaynaya fayoobidooda iyo weliba sida ay carruurtooda u daryeelayaan?
- Tallaabooyin noocee ah ayay tahay in la qaado si dhibtan loo yareeyo?
- Miyaa la arkay waalidiinta oo carruurtooda u garaacaya si ka badan inta dhaqankoodu oggol yahay?
- Ma jiraan fursado ay waalidiintu kaga wada tashan karaan ayna xal ugu raadin karaan xaaladdahan qallafsan ee ay tahay iyaga iyo carruurahooduba ay la tacaamulaan?

**Carruurta**

- Carruurta miyaa la siiyaa korin iyo daryeel aan ku fillayn?

- Tallaabooyin noocee ah ayaa la qaadi karaa si kor loogu qaado daryeelka ay carruurta tahay in ay helaan?
- Ma jiraan carruur keligood ahí?
- Ma jiraan carruur dabeecaddoodii noqotay dagaal iyo fadqalalooyin xad-dhaaf ah? Ma la siiyaa carruurta fursado dhaqan ahaan ku habboon oo ay kaga hadlaan walaacooda, ku dhiibtaan fikradaha, iyo su'aalaha ay qabaan?
- Carruurtu fursado ay ku ciyaaraan ma haystaan?
- Baahiyaha gaarka ah ee carruurta aan cidi la socon ee muddo badan meesha joogay iyo kuwa xiran (xabsiyada ku jira) wax ma laga qabtay?

**Adeegyada**

- Ma loo fidiyay waxbarasho iyo adeegyo kale si carruurtu u awoodaan in ay ka qayb-qaataan kor u qaadidda joogtada ah ee waxqabadyadaas kor loogu qaadayo iyo sii joogtayntooda?
- Dadka waaweeyn iyo carruurta qaxootiga ah ma heli karaan adeegyada bulshada si ay wax uga qabtaan dhibaatooyinkooda?
- Ma jiraan nidaamyo (habab) lagu garan karo, waxna lagaga qaban karo carruurta ay la soo deristay kadeed (*distress*) oo nafsaani ahí?
- Barayaasha ma la siiyaa tababarro iyo taageero? Ma haystaan shaqaale xagga daryeelka caafimaadka u qaabilsan iyo shaqaale kale oo gacan ka geeysta sidii carruurta taageero tan dhaanta loo siin lahaa?
- Ma jiraa adeeg u gaar ah caafimaadka maskaxda oo loo gudbiyo carruurta aadka u kadeedan (dhibaataysan)?

**Waxaa laga soo qaatey: UNICEF, adapted from *Refugee Children: Guidelines on Protection and Care*, UNHCR, 1994.**

## Lifaaq 2aad: Liisto hubineedda Barnaamijka Quudinta Dugsiyada

Su'aalaha soo socdaa waa muhiim in la is weeydiiyo haddii loo arko cuntada in ay tahay khayraad loo adeegsan karo hawlaha waxbarashada:

**Ujeeddooyinka Barnaamijka**

- Haddii cunto lagu taliyo, sidee baa loo isticmaali doonaa? Quudin dugsi, raashin guryaha loo qaato, cunto shaqo ku beddelasho, cunto tababar ku bedelasho, iyo cunto la siiyo barayaasha?
- Maxay barnaamijka quudintu (ama kuwa kaleba) ugu habboon yihiin xaaladda taagan?
- Waa maxay ujeeddada barnaamijkani? Ma yahay isticmaalka cuntada ee lagu taliyay mid gacan ka geysanaya in la daboolo baahiyaha waxbarasho ee la arkay (taagan)? Cuntadu ma u soo jiidaysaa carruurr tiro badan dugsiga?
- Ujeeddadee ayaa gaar ku ah xaaladda degdegga ah?
- Ma haysaa xogta lagama maarmaanka u ah in la sababeeyo baahida loo qabo in ujeeddooyinkaas la gaaro (xaalad nafaqo, isqorid, iyo soo xaadirid iwm).

**Dadyowga la bartilmaameedsanayo**

- Waa kuwee dadyowga ka faa'iidaysanaya barnaamijka ee la bartilmaameedsanayaa?
- Ma haysaa xogta lagama maarmaanka u ah in la isla garto dugsiyada ama gobollada aad ka u aafoobay ama aadka ugu sii baahan gargaarka (xaaladda hubinta cuntada, heerka akhris-qorista iyo isqoridda iwm)?
- Kooxdee ayaa laga yaabaa in ay ka faa'iidaysato raashinka guriga loo qaadanayo (sida gabdhaha, kooxaha laga tirada badan yahay, iwm)?

**Awood/karti dhisid, Waaritaan iyo Isku-dubbaridid**

- Maxay yihiin waxqabad awood/karti dhisidda (*capacity building*) ee muhiimka ah inta aan la bilaabin barnaamijka?
- Dugisyadu ma leeyihiin nidaam ama qaab-dhismeed taageeraya barnaamijka quudinta dugsiga (sida helitaanka biyaha, agabka wax lagu kariyo iyo maacuunta iwm)?
- Waa maxay doonista waxbarasho ee taagan ee bulshooyinka, waalidiinta, carruurta? Sidee bay cuntadu wax uga beddeli doontaa arrintan?
- Sidee ayay bulshooyinka, waalidiinta, barayaasha, ardayda, iyo saraakiisha waxbarashu u arkaan barnaamijka cuntada? Ma laga yaabaa in cuntada ay ka abuurto ama sii kordhiso xiisado u dhexeeya bulshooyinka ama bulshada dhexdeeda?
- Waa kuwee kaabayaasha lagama maarmaanka ah ka hor inta aan cuntada la diyaarin ee iyo inta aan quudinta carruurtu bilaaban? Nidaam wax soo iibineed iyo qandaraas noocee ah ayay tahay in la helo?
- Waa kuwee kaabayaasha ay tahay in la diyaariyo ka hor cunto diyaarinta iyo quudinta?
- Habayn noocee ah ayaa loo baahan yahay si loo sameeyo goobo xafiisyo, bakhaaro, iyo gaadiid? Isgaarsiin? Gaadiid iyo waddooyin?
- Ma jiraan tiro ku filan oo barayaal, agab iyo kaabayaal ah oo xammili kara oo ku filan arday dheeri ah? Ma u dhowdahay ama sidee lagayaabaa in ay cuntadu u maanshayso dugsiyadii markoodii horeba buuxdhaafsanaa?
- Cuntadu ma tahay mid sii soconaysa (waaraysa)? Hadday tahay haa, sidee? Sidee ayaa looga gaashaamanayaa marka gargaarka cuntadu dhamaanayo? Sidee ayay tan saamayn ugu yeelanaysaa waxbarashada?

- Hay'adaha kale ee waxbarashadu ma ka shaqeeyaan isla goobtaan ama meelo u dhow? Cuntada miyay u adeegsadaan barnaamijyadooda waxbarashada? Hadday haa tahay, sidee? Ma danaynayaan in aad wadashaqaysaan? Cuntada ma si joogto ah ama mar-mar ah ayay u isticmaalaan hay'adaha kala duwan? Sidee ayay cuntada oo aan la bixin laga yaabaa in ay sababto in ay arday iyo barayaal ka tagaan dugsi iyaga oo tegaya mid kale?
- Raad noocee ah ayay ku yeelanaysaa shaqaalaynteenna iyo ta hay'adaha aynu wadashaqaynta leenahay? Tirada shaqaalaha ee hadda joogtaa ma ku filan tahan maamulidda cuntada lagu taageerayo barnaamijyada waxbarashada iyaga oo xilal koodii hore aan laga weecin? Ma loo baahan yahay kor u qaadid micno leh?

**Doorashada Cuntooyinka iyo Tixgelimaha Nafaqooyinka**

- Cunto noocee ah ayaad bixinaysaan?
- Barnaamijku ma bixinayaa cuntada guryaha loo qaadanayo? Sidee ayaa barnaamijka loola soconayaa?
- Badeecooyin noocee ah ayaa la heli karaa?
- Ma waxaa jira dhibaatooyin gaar ah oo la xiriira xannuuno gaar ah, nafaqo-xumo ama deris ku nool ku dhalata carruurta dugsiga? Haddii ay sidaas tahay suurtogal ma tahay in nafaqo-xumo nooc gaar ah la bartilmaameedsado iyada oo la isticmaalayo badeecooyinkaas?
- Dhaqan ahaan waa kuwee cuntooyinka la door bidaa ee dhadhanka u leh carruurta dugsiga?

**Wax ka qabashada badbaadada cuntada, Caafimaad iyo Nadaafadda**

- Ma ka jiraan agabkii nadaafadda iyo biyo la qaadan karaa dugsiyada?
- Sidee ayaa dejinta barnaamijyada loogu dhex dari karaa tababarrada si wax loo baro, loona dhiso kartida kuwa hawsha gacanta ku haya?
- Sidee ayaa halista sumowga loo yarayn karaa?
- Ma jiraan dhibaatooyin la xiriira deris ku nool (goryaamo) ku dhalata caloosha carruurta dugsiyada? Hadii ay tahay haa, lagama maarmaan ma noqonaysaa in si joogto ah gooryaan daaweeyn la sameeyaa qayb uga noqoto barnaamijka quudinta dugsiga?
- Ka hortagga HIV/AIDS ma ku jiraan barnaamijyada waxbarashada ee socda ee carruurta dugsiga?
- Sidee ayaa ka hogtagga HIV/AIDs loogu dhex dari karaa dejinta barnaamijyada?
- Qorshe la sii meel dhigtay ma jiraa haddii barayaashu qaadaan HIV/AIDS?

**Waqti**

- Qiyaas ahaan waqti intee le'eg ayaa la filayaa in gargaarku socdo?
- Xog intee le'eg ayaa laga hayaa weji walba oo hawlgalka ah (daraasadda bilowga, cilmi baaris aasaasi ah (baseline study), la socod iyo qiimayn?
- Cuntada ma la heli doonaa?
- Awood dhisid intee le'eg ayay tahay in laga hormariyo bilawga barnaamijka oo waana goorma waqtiga ay u dhaw dahay in la bilaabo barnaamijka?
- Sidee ayaa kaalmada degdegga ah (iyo ka soo kabashada) loo joojinayaa iyo goorma, marka ay haboonaato, suurtagal ma tahay in si fudud loogu gudbo barnaamijka horumarinka ee ku xiga?

**Deeq Bixiyayaasha**

- Waa kuwee deeq bixiyayaasha muhiimka ahi? Goorma ayaa khayraadyada deeq bixiyaha la helayaa?
- Ma loo diyaariyay deeq bixiyayaasha dalabaad (proposal) dhamaystiran oo aad u faahfaahsan oo ah barnaamijka ugu wanaagsan ee la doonayo in la fuliyo?

- Muddo intee le'eg ayay sii soconaysaa cuntada laga helayo deeq bixiyayaasha? Bilo farabadan, 1-2 sannadood, 5-10 sano? (Hadii cuntada laga helayo deeq bixiyuhu ay sii soconayso bilo farabadan, waxaa fiicnaan lahayd in barayaasha loo siiyo dhiiri gelin ahaan, halka loo isticmaali lahaa barnaamijka quudin dugsiga, kaas oo qaadanaya ugu yaraan muddo in la bilaabo).

Waxaa laga soo qaatey: Adapted from:World Food Programme, P*lanning for School Feeding in the Emergency Setting – Situation Analysis,*
*Designing the Programme, Implementation*, 2004, http://www.wfp.org; and Catholic Relief Services, *Checklist: Determining*
*Whether to Use Food as a Resource*, www.crs.org.

# 3. Barid iyo Barasho

**Hordhac**

**In la go'aansado waxa muhiimka ah ee ay tahay in cid la baraa waxa ay ku adag tahay dadka aqoonyahannada ah oo dhan. Marka lagu jiro xaaladda degdegga ah, go'aanka muhiimka ah ee loo baahan yahay waa nooca adeegga waxbarasho ee ay tahay in la bixiyo, ha noqoto mid toosan ama mid dadban; manhajka ay tahay in la raaco, in lagu saleeyo manhajka dalkii dadku ka yimaadeen ama kan ay martida u yihiin; iyo kala mudnaan-siinta barashada; in awoodda la saaro mid samato-bixineed; xirfad farsamo ama waxbarasho caadi ah. Waxaa kale oo loo baahan karaa in manaahijta dib u eegis lagu sameeyo ama la dejiyo.**

Waxa lagama maarmaan ah in waxbarashadu ahaato mid la jaanqaadi karta cidda baranaysa. Tani waxa ay u baahan tahay in si buuxda loola shaqeeyo, iyada oo taloooyin laga qaadanayo bulshada si la isula garto baahidooda aqooneed. Tan caadiyan micnaheedu waa in lala shaqeeyo nidaamyada waxbarasho ee jira, hadday suurtogal tahay, halkii mid goonni ah loo dejin lahaa. Taas waxaa looga jeedaa in awoodda la saaro in bulshadu si firfircoon uga qayb-gasho dedaallada waxbarashada oo dhan, oo ay ku jiraan go'aan qaadashada khuseeysa waxyaabaha la baranayaa waxa ay ka koobnaanayaan. Manaahijta la qaatay waa in uu yahay mid ku habboon baahiyaha waxbarasho ee hadda iyo kuwa mustaqabal ee dadka wax la barayo, sidaa awgeed waa in lagu xiriiriyaa macluumaadka ah in baahiyaha bulshada ay is beddeleen khal-khalka jira awgeed, sida xirfadaha nolosha, barashada nabadda, barashada waddaniyadda, ka feejignaanta miinada, waxbarashada caafimaadka iyo nafaqada, HIV/AIDS, xuquuqda aadamaha, iyo bey'ada (deegaanka). Waxbarasho dheeri ah oo xirfadaha nolosha (*life skills*) waa in la siiyaa carruurta aan dugsiyada dhigan, waalindiintooda, dadka waayeelka ah iyo kooxaha aan codkoodu muuqan.

Barnaamijyada waxbarashada xaaladda deg-dega ahi waa wax ka qabasho nafsaani-bulsho (*psychosocial* ) sababta oo ah waxa ay bud-dhig u noqdaan bey''ad waxbarasho oo ku habboon, waxa ay siisaa jadwal joogto ah iyo dhiirrigelinta rajo mustaqbal wax ku ool ah. Qof kasta oo ka qayb-qaataa habka gudbinta waxbarashada, gaar ahaan barayaasha iyo maamulka dugsiyadu waa in ay helaan wacyi-gelin (*hanuunin*) ku saabsan doorkooda Fududaynta nafsaani-bulsho iyo raad busho ahaaneed ee ay ku yeelanayso kuwa baranaya.

**Barid iyo Barasho**

Adeegyada waxbarashadu waa in ay aqoonsadaan in dadku ay wax u bartaan siyaabo kala duwan iyo xawli kale duwan iyo baahida loo qabo in ay si firfircoon uga qayb-qaataan geedi-socodka barashada. Si ay dadku si waxtar leh wax ugu bartaan, barid ka qayb-gal ku salaysan, iyo xeelado barasho, oo ay ku jiraan nidaamyada bartuhu xuddunta u yahay (*learner centered methodologies*), waxa lagama maarmaan ah Nidaamaka canuggu xuddunta u yahay barashadu waa in uu yahay mid taabanaya baahida qof oo dhan., xirfadaha baridda ee aasaaska u ah samatabaxa, koriinka shaqsiga, is-dhexgalka bulashada iyo barashada cilmiga. Dadka waaweyn, barashadu waa mid u socota inta uu nool yahay waana mid waayo-aragnimo la halmaasha. Waxbarashadooda waxa kor loogu sii qaadi karaa sii wanaajinta marka ay arki karaan ujeeddo hadaf leh, qiime iyo muhiimadda waxa ay marka ay arki karaan ujeeddada , qiimaha, iyo la jaanqaaditaanka waxa ay baranayaan iyo iyada oo la siiyo fursad ay ku noqdaan ka qayb-galayaal firfircoon waxbarashadooda.

Marka barayaashu aanay tabobarnayn, waa lagama maarmaan in ay helaan tabobar ku haboon, keliya aan ahayn maaddooyinka asaasiga  ah balse maaddooyinka kale ee ku taxaluqa (xiriirka la leh) xaaladaha deg-degga ah. Waxaa kale oo loo baahan yahay tabobaro dheeri ah oo la xiriira  wax-ka-qabashada baahiyaha nafsaaniga ah ee dadka la bartilmaameedsanayo.

Bulshooyinku waxa ay doonayaan in ay ogaadaan in dawladuhu aqoonsan doonaan waxbarashada ubadkooda, iyo in ubadku kari karaan inay aqoontoodu u adeegsan doonaan inay ku helaan waxbrasho tan ka sii saraysa iyo shaqo. Walaaca ugu weyni waxa uu ka taagan yahay in ay dawladaha, mac-hadyada waxbarashada iyo kuwa loo shaqeeyaaba aqoonsan yihiin manhajka iyo shahaadooyinka la bixiyo. Marka dhinac la iska dhigo sharcinimada natiijada imtixaanka ardayga, shahaaddooyinka qalin jebintu waxa ay aqoonsadaan guusha ardayda, waxaana ay ku dhiiri-geliyaan in ay dugsiga tagaan. Marka xaalad qaxooti lagu jiro, caddayamaha (shahaadooyinka) waxa ay caadiyan ka dhalataa wadaxaajoodyo  dhex mara dalka magan-gelyada bixiya iyo dalka qofka qaxootiga ah ka soo jeedo. Sida habboon, xaaladaha qaxootinimo ee  muddada dheer qaata, manhajku  waa inuu wajahaa ‘laba midkood ba’ oo uu qanciyaa dalkii ay qaxootigu ka yimaadeen iyo dalka ay martida u yihiin labadaba. Tani waxay u baahan tahay iskaashi goboleed mugleh iyo weliba iskaashiga hay'adaha oo dhan dhexmara si la isu waafajiyo waxqabadyada xagga waxbarashada iyo  culaysyada qaxootiyada ee dawlahadaha kala duwan.

## Xiriirka kala dhexeeya jaangooyooyinka ay wadaagaan qaybaha oo dhami

Nidaamka kobcinta iyo fulinta waxqabadyada waxbarashadu waa kuwo aad muhiim ugu ah waxtarkeeda. Waaxdan waa in la adeegsadaa iyada oo lala xiriirinayo jaangooyooyinka ay qaybaha oo dhami wadaagaan, kuwaas oo ah  ka qayb-galka bulshada, khayraadka gudaha, daraasaadka bilawga ah, waxka qabashada, la socodka iyo qiimaynta. Gaar ahaan, ka qayb-galka dadyawga masiibada u aafaysay – oo ay ku jiraan kooxaha nugul – waa in la gaarsiiyaa heerka ugu sarreeya si loo hubiyo tayadeeda iyo ku haboonaanshaheedaba.

- ***Jaangooyooyinka ugu hooseeya*:** kuwani waa kuwo caadiyan tayo-sheegayaal ah, waxaana ay cayimaan heerka ugu hooseeya ee ay tahay in la gaaro marka wax laga qabanayo dhinaca waxbarashada.
- ***Tilmaamayaasha muhiimka ah*:** Kuwani waa calaamado tusinaya in qiyaastii la gaaray iyo in kale. Waxa ay sahlaan hab loo cabbiro, loona sheego raadka ama natiijada barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raaca iyo farsamada la adeegsaday. Tilmaamayaashu waxa ay noqon karaan tayo-sheegeyaal iyo tiro-sheegayaalba.
- ***Qoraalada hagidda***: kuwani waxaa ku jira baro mucayin ah oo ay tahay in tixgelin gaar ah la siiyo marka lagu dabakhayo Jaangooyooyinka, iyo tilmaamayaasha xaalado kala duwan, hagidda la tacaalidda dhibaatooyinka waaqiciga ah, iyo ka talo bixinta u kala hor marinta arrimaha sida ay u kala muhimsan yihiin. Waxaa kale oo ku jiri kara arrimo aad u xasaasi ah oo la xiriira jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha, iyo sidoo kale qeexidda arrimaha lagu wareero ama kuwa is burinaya, ama dulduleelada ku jira aqoonta arrintan loo leeyahay.Lifaaqa 2aad waxa raacaya liisto loo doortay tixraac, taas oo tilmaamaysa  ilihii laga soo kala qaatay xogta guud iyo tan farsamo ahaaneed ee la xiriirta waaxdan.

**Dhejiska 2aad: Tixraacyo iyo Qoraalka Hagidda Khayraadka ee Waaxda Barid iyo Barasho**

## Barid iyo Barasho, jaangooyada 2aad: Manaahij

**Dhaqan, bulsho iyo luuqad ahaanba manhaj ku habboon ayaa la adeegsadaa si loo bixiyo waxbarasho toos ah iyo mid dadban oo ku habboon xaalad degdeg ah oo gaar ah.**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Manhajyada jira dib u eegid ayaa lagu sameeyaa si loo ogaado ku haboonaanshahooda da'da iyo heerka koritaanka, luuqadda, dhaqanka iyo awoodda iyo baahiyaha dadyowga ay aafaysay xaaladda degdegga ahí. Manhajyo ayaa la adeegsadaa, la dhaqan geliyaa ama la sii hagaajiyaa marka ay lagama maarmaanka noqoto (eeg Qoraallada Hagidda 1-3)
- Marka dejinta ama dhaqan gelinta manhajyada loo baahdo, waxaa loo maraa ka qayb-gal waxtar ah oo ay ku lug leeyihiin dhammaan kuwa ay khusaysaa, iyo weliba tixgelin la siiyo danaha iyo baahiyaha kuwa waxbaranaya (eeg Qoraallada Hagidda 4-5)
- Manhajku wuxuu awoodda saaraa xirfadaha nolosha, akhris-qoraalka iyo tirada iyo tiirarka muhiimka ah ee waxbarashada aasaasiga ah ee la jaanqaadaya heerarka kala duwan ee xaaladda degdegga (eeg Qoraallada Hagidda 4-5)
- Manhajku waxaa sidoo kale uu muhiimad gaar ah siiyaa baahiyaha fayoobida nafsaaniga ah ee barayaasha iyo kuwa waxbaranaya si ay si hufan ula qabsadaan nolosha marka xaaladda degdegga ah lagu jiro iyo ka dibba (eeg Qoraalka Hagidda 6)
- Waxyaabaha la baranayo waxa ay ka kooban yihiin, agabka waxbarashada, iyo luqadda casharadu ku baxayaanba waa in ay noqdaan luuqada (ha) ardayda wax la barayo iyo barayaasha, gaar ahaan sanadaha bilowga waxbarashada (eeg Qoraalka Hagidda 7)
- Manhajka iyo agabka waxbarashadu waxa ay ku salaysan yihiin baahida taagan ee kuwa waxbaranaya (ardayda), waxaana ay kor u qaadayaan fursadahooda waxbarasho ee mustaqbalka (eeg Qoraalka Hagidda 8)
- Manhajka iyo agabka barashadu waa in ay noqdaan kuwa tixgelin siinaya jinsiga (lab/dhadig), ay aqoonsadaan kala duwanaanshaha, ayna hormariyaan xaq-dhawridda kuwa waxbaranaya (eeg Qoraalka Hagidda 9)
- Agabka barida iyo barashada oo ku filan ayaa la bixiyaa mar kasta oo loo baahdo si gacan loo siiyo waxqabadyada waxbarashada la xiriira. Waxaa muhiimad gaar ah la siiyaa agabka degaanka laga heli karo si marwalba loo joogteeyo (eeg Qoraalka Hagidda 10)

### Qoraallada Hagidda

1. ***Manhaj waxaa lagu qeexi karaa*** in uu yahay qorshe waxqabad oo loogu talogalay in uu caawiyo in kuwa waxbaranayaa (ardaydu) ay balaariyaan aqoontooda iyo xirafadahooda. Iyada oo laga duulayo jaangooyooyinka ugu hooseeya, "Manhaj" waxa loo adeegsadaa erey ballaaran oo loo adeegsan karo barnaamijyada waxbarashada ee tooska ah iyo kuwa dadbanba, oo ay ku jiraan ujeeddooyinka loo baranayo, waxa la baranayaa waxa ay ka kooban yihiin, nidaamka iyo farsamada (tabaha) baridda, agabka waxbarashada, iyo noocyada daraasaynta. Barnaamijyada waxbarashada tooska ah ama ta dadban waa in uu hagaa manhaj dhisaya aqoonta iyo waayo-aragnimada ardayda, waana in uu la jaanqaadi karaa bey'adda ay ku nool yihiin. Marka lagu salaynayo jaangooyooyinka ugu hooseeya qeexidaha soo socda ayaa la adeegsadaa:-
    - Ujeedooyinka barashadu waxa ay tilmaamaan cilmiga, xirfadaha,, qiimaynta iyo dabeecado la dejiyay iyada oo la adeegsanayo waxqabadyo waxbarasho;

- Waxa la baranayo (*learning content)*, waa agabka (cilmi, xirfado, qiimo iyo dabeecado) ay tahay in la barto ama la daraaseeyo;
- Habka baridda (*teaching methodology*) waa habka loo door biday in loo adeegsado, lagu soo bandhigo waxa la baranayo;
- Farsamooyinka/tabaha (*teaching technique*) bariddu waa nidaam isku dhafan, waxaanu ka kooban yahay dariiqada loo marayo fulinta nidaamkaas oo isku dhan;
- Agabka waxbaridda waxaa looga jeedaa buugta, sawir loox (poster) iyo agabyada kale ee baridda iyo barashada loo adeegsado.

Manhajka habooni waa mid ka kooban waxyaabo la baranayo oo tayo leh oo aad uga feejigan arrimaha la xiriira jinsiga (lab/dhadig), ku habboon heerka barashada, adeegsanayana luuqada (ha) ay ardayda iyo barayaashu wada fahmi karaan. Nidaamyada ka qayb-galku waa in ay noqdaan qayb ka mid ah manhajka, si loo dhiirigeliyo ardaydu in ay si firfircoon uga qayb-qaataan waxbarashadooda (eeg Dhejiska 1: Eraybixin ee bogga 79aad, ee qeexidaha "tayada waxbarashada" iyo "ku haboonaanta (la jaanqaadidda) waxbarashada").

***2. Ku habboonaanshaha da'da iyo heerarka kobcinta:*** manhajka waa in aad loo baaraa si loo hubiyo in aanu ahayn keliya mid ku habboon da'da oo keliya, laakiin sidoo kale uu yahay heerka korriinku mid la socda horumarka ardaygu samaynayo. Waxaa laga yaabaa da'da iyo heerarka korriinku in ay aad u kala duwanaadaan marka laga hadlayo barnaamijyada waxbarashada xaaladaha degdegga ah ee tooska iyo ta dadban, ee u baahan dabakhaadda manhaj iyo nidaamyo. Tibixda "ku habboonaansha da'eed" waxa loola jeedaa qiyaas da'eed isku xiga" halka "korriin ahaan ku habboon" ay tahay baahiyaha dhabta ah ee kuwa waxbaranaya iyo korriinka fikerka.

***3. Dejinta Manhajku*** waxa uu noqon karaa geedi socod dheer oo dhib badan, laakiin manhajyada xaaladaha degdegga ah badanaaba waxaa laga qaataa wadanka martida loo yahay, ama wadanka asal ahaan ka soo jeedaan ama xaalad kale oo degdeg ah. Waa lagama maarmaan in la hubanti laga dhigo in manhajka degdegga ah ee tooska ah ama dadban ee bilowga ahí inuu tixgelin gaar ah siiyo baahiya gaarka ah ee dhammaan dadka waxbaranaaya, oo ay ku jiraan carruurta la xiriirta xoogagga dagaalamaya, hablaha, iyo ardayda da'doodu ka roontahay heerkooda waxbarashadooda, kuwa dugsiyada ka dhacay, iyo dadka waaweeyn. Sidoo kale iyana waxaa muhiim ah in dadka ay khusaysaa ay ku lug yeeshaan dejinta manhaka iyo weliba dib u eegidda barnaamijyada waxbarashada. Waxaa dhici karta in dad kala duwan lala tashado, oo ay ku jiraan ardayda, xubnaha bulshada, barayaasha, fududeeyayaasha/tababarayaasha, mas'uuliyiinta waxbarashada iyo maamullada barnaamijyada, iwm.

Meelaha barnaamijyo waxbarasho oo toos ah laga aasaasay marka lagu jiro xaaladaha degdegga ah ama ka dib, waa in tixgelin gaar ah la siiyaa isticmaalka, iyo haddii ay lagama maarmaan noqoto dhaqan-gelinta iyo sii hagaajinta, manhaj la aqoonsan yahay oo dugsiyada hoose iyo sareba ah. Waxaa la door bidaa in barnaamijyada waxbarashada tooska ah ee qaxootiyada lagu saleeyo manhajka dalka ay asal ahaan ka soo jeedaan dadka qaxootiga ah, si loo dhiirri geliyo gurya-noqosho iskeed u madax bannaan, in kasta oo aanay tani mar walba ahayn ta ugu habboon. Go'aamadaas marka la qaadanayo waa in laga eegaa labada dal kan martigeliyey iyo kan ay qaxootiga ka soo jeedaan.

Sida habboon, xaaladaha muddada dheer ee qaxootiga, manhajku wuxuu u baahan yahay in uu "waajaho labada dhinacba" ayna oggolaan karaan labada dal ee midna martida loo yahay midna asal ahaan laga soo jeedo. Tani waxa ay u baahan tahay wadashaqayn heer gobol ah oo dhex marta hay'adaha oo dhan si la isu waafajiyo

waxqabadyada waxbarashada iyo culayska qaxootiyada ee wadamada kala duwan. Arrimaha gaarka ah ee ay tahay in la go'aansado waxaa ka mid ah heerka luuqadaha iyo aqoonsiga maxsuulka imtixaanada si loo caddeeyo.

4. ***Nidaamyo waxbarisho oo ku habboon*** waa in la dejiyaa, laguna qiyaasaa xaaladda jirta, baahiya, da'da, iyo awoodda kuwa waxbaranaya. Fulinta nidaamyo cusub marka lagu jiro heerarka bilowga ah ee xaaladda degdegga ah waxa ay noqon kortaa mid jahawareer ku keenta barayaasha waayo-aragnimada leh, iyo sidoo kale ardayda, waalidiinta iyo xubnaha bulshada, kuwaas oo u fahmi kara tan in ay tahay is beddel aad ugu weyn, aadna ugu degdeg badan waxbarashada xaaladaha degdegga ah ama xilliga hore ee dib u dhiska waa in loo siiyaa barayaasha xaalad waxbarashada tooska ah fursad ay isbeddel ku sameeyaan, laakiin waa in la siiyaa waqti kala wareegitaan ah oo ku salaysan ka qayb-gal ama nidaamyo barineed ku habboon ardayda (kuwa baranaya) ayaa loo maareeyaa si taxadar iyo feejignaan leh. Marka la ambaqaadayo waxbarasho dadban, nidaamyada ay xuddunta u yihiin ardaydu ayaa suurtogal ah in si degdeg ah loo dhaqan geliyo iyada oo la adeegsanayo tabobarid mutadawiciin, iyo fudaydiyayaal/tababarayaal.

5. ***Rukumada ugu muhiimsan*** (core competencies) waa in la tilmaamaa ka hore inta aan la dejin ama la dhaqan gelin waxyaabaha la baranayo, ama agabka tabobarka barayaashu. Marka la dhaafo akhriskta/qorista iyo tirada "Rukumada ugu muhiim ee waxbarashada aasaasiga ahi" waxa ay loola jeedaa aqoonta lagama maarmaanka ah, xirfadaha, dabeecadaha iyo dhaqanka ay u baahan yihiin kuwa waxbaranaya ee ka mid ka ah dadyawga ay xaaladda degdeggu aafaysay si ay uga qayb-qaataan si firfircoon oo qiimo leh iyaga oo xubno ka ah bulshadooda ama wadankooda.

6. ***Baahiyaha Nafsaaniga ah iyo koboca*** kuwa waxbaranaya, iyo sidoo kale shaqaalaha waxbarashada, waa in tixgelin la siiyaa, waxna laga qabtaa inta lagu jiro dhammaan heerarka kala duwan ee xaaladda degdegga ah, oo ay ku jiraan khalkhalka, iyo ka soo kabashadu. Dhammaan shaqaalaha waxbarashada tooska ah iyo ta dadban, waa in loo tabobaraa in ay aqoonsadaan (gartaan) calaamadaha kadeedka/jahwareerka ee kuwa waxbaranaya (ardayda) iyo talaabooyinka ay tahay in ay qaadaan si ay wax uga qabtaan iyo sida ay dabeecadahan oo kale jawaab uga bixiyaan marka la joogo goobaha waxbarashada. Waa in tabaha (farsamooyinka) la tixraacayo si wanaagsan loogu caddeeyaa shaqaalaha waxbarashadu si ay gacan dheeraad ah u siiyaan kuwa waxbaranaya ee la dhibaataysan qaracanka aadka u daran. Nidaamyada loo adeegsanayo waxbaritaanka carruurta iyo dhallinyarada qaracanku ku dhacay waa in ay ku jiraan habab la sii mala awaali karo, xilliyo gaab–gaaban oo waxbarideed si loo soo celiyo fahamkooda, Qaabab edbineed leh waxtar togan iyo in ardayda dhammaantood laga qayb-geliyo waxqabadyada waxbarashada, iyo ciyaaro iskaashi.

   Baahiyaha nafsaaniga ah ee shaqaalaha waxbarashadu waxa sidoo kale ay u baahan doonaan in la tixgeliyo, maaddaama shaqaalaha laga dhex qaatay dadyawga aafoobay, ay soo waajahdo kadeedid ama qaracan la mid ah ta soo waajahda ardayda.Tabobarid, la socod iyo taageerooyinka loogu kuur-gelayaa waa in ay si cad u tixgeliyaan arimahaas (eeg Baridda iyo Bey'ada Barashada, lifaaqa 1aad ee bogga 49 ee liista hubineedda nafsaani-bulsho (*spychosocial)*; eeg sidoo kale jaangooyada 2aad ee bogga 45aad iyo Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee waxbarashada jaangooyada 3aad ee bogga 69).

7. ***Luuqad:*** ma aha wax lala yaabo in wadammada magan-gelyada bixiyaa ay ku adkaystaan in barnaamijyada waxbarashada ee qaxootigu ay buuxiyaan jaangooyooyinkooda, oo ay ku jiraan adeegsiga luuqaddooda, iyo manaahijta. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in la tixgeliyo mustaqbalka

kuwa waxbaranaya, gaar ahaan kuwa jecel in ay sii wataan waxbarashadooda marka laga baxo xaaladaha degdegga ah. Ururrada bani'aadamnimadu waa in ay aad ugu dhiiri-geliyaan dawladaha martida loo yahay in ay qaxootiga u oggolaadaan in ay guryahooda wax ku bartaan ama luqadaha wadankooda. Haddii tan la oggolaado waxyaabaha la baranayo dhamaantood, Qoraallada Hagidda (tilmaamayaasha) baraha, buugta akhriska ee ardayda, iyo waxyaabaha kale ee qoran ama maqal – muuqalka ah ee aan ku qornayn luuqada ardayda iyo barayaashu waxa ay u baahan doonaan in loo tarjumo – loo bedelo luuqadda casharada lagu bixinayo. Taasi haddii la oggolaan waayo, fasallo dheeri ah kuwa caadiga ah oo luuqada ardayda kor loogu qaadayo waa in la sameeyaa.

8. **Waxa la baranayaa waxyaabaha ay ka kooban yihiin (*learning contents*) iyo fikradaha** furaha ah (*key concepts*): marka la go'aansanayo waxyaabaha la baranayaa waxa ay ka kooban yihiin, waa in la tixgeliyaa aqoonta, xirfadaha iyo luuqadaha muhiimka u ah ardayda heer kasta oo xaalad degdeg ah oo lagu jiro iyo weliba xirfadaha gacanta ka geysanaya awooddooda isku filaansho, iyo wax-soo-saar ee marka lagu jiro xaaladda degdegga ah iyo marka xaaladdu caadi noqoto iyo in ay awoodi karaan sii wadashadooda helitaanka fursadaha waxbarasho.

   Waxa la baranayaa waxyaabaha ay ka kooban yihiin iyo fikradaha furaha ahí waa in ay ku saleysnaadaan arrimahan:
   - waxbarashada caafimaadka oo xirfado ku saleysan (ku habboon da'da iyo xaaladdaba), gargaarka degdegga ah, caafimaadka taranka, caabuqyada galmada la isugu gudbiyo, HIV/AIDS;
   - Xuquuqda aadamaha, qawaaniinta bani'aadamnimada; waddaninimada firfircoon; waxbarashada nabadda/dhisidda nabadda; shaqaaqo(fadqalallo) la'aan, sida iska hor-imaadyada looga hortago/maamulo/ loo xalliyo; badbaadinta carruurta; nabadgelyada iyo badbaadada;
   - Waxyaabaha la xiriira dhaqanka sida musikada, qoob ka ciyaarka, riwaayadaha, isboortiga iyo ciyaaraha;
   - Macluumaadka samatobixineed ee la xiriira bey'ada cusub; miinada dhulka ku aasan, iyo wacyi gelin ku saabsan waxyaabaha qarxa ee aan weli qarxin; daad-guraynta degdegga ah iyo helitaanka adeegyada;
   - Kobcinta dhallaanka iyo dadka qaan-gaarka ah; iyo
   - Xirfadaha hab-nololeedka iyo tabobarada farsamada gacanta;

9. ***Kala-duwanaanshaha*** waa in la tixgeliya marka la qaabaynayo iyo marka la fulinayo waxqabadyada waxbarashada ee dhammaan heerarka kala duwan ee xaaladda degdegga ah, gaar ahaan waa in aan la ilaawin in ay ku jiraan arday kala geddisan, barayaal/fududeeyayaal kala gedisan oo meelo kala duwan ka soo kala jeeda iyo kor u qaadidda dulqaadka iyo istixgelinta. Waxyaabaha laga yaabo in ay dhiirigeliyaan kala duwanaanshaha waxaa ku jiri kara, in kasta oo kuwa kalana jiri karaan, jinsi (lab/dhadig), dhaqan, dhalasho, isir, diin, awooddo barashada, ardayda leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah, iyo heerarka faraha badan iyo da'aha kala duwan ee baridda.

10. ***Agabyada degaanka ay ka helayaa***n ardaydu (kuwa baranayaa) waa in la daraaseeyaa marka xaaladda degdegga ahí bilowga tahayba: Marka laga hadlayo Qaxootiyada, kuwan waxaa ka mid noqon kara agabyada laga keenay wadankoodii ama meeshii ay asal ahaan ka yimaadaan. Agabyadaas waa in la qabatimaa, la badiyaa ama la soo iibiyaa, lagana heli karaa tiro ku filan. Waxaa loo baahan yahay in lala socdo kaydinta, qaybinta iyo adeegsiga agabkaas. Ardaydu waa in ay xiriir is kala dhaxaysiin karaan waxyaabaha la baranayo, sido kalana waa in agabku yahay mid ka tarjumaya, ixtiraamayana dhaqanka ardayda.

## Baridda iyo Barashada, jaangooyada 2aad: Tababarid

**Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu waxa ay helaan tabobarro muddaysan, oo ku habboon, kuna salaysan baahidooda iyo xaaladahooda**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Tababarku waxa uu la jaanqaadayaa kala mudnaansiinta baahiyaha, ujeeddooyinka waxqabadyada waxbarashda iyo waxyaabaha ay ka kooban yihiin waxyaabaha la baranayo (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Marka ay habboonaato, tababarka waa in ay ansixiyaan (oggolaadaan) masuuliyiinta waxbarashada ee ay khusaysaa (eeg Qoraallada Hagidda 3-4)
- Tababaarayaal aqoon leh ayaa bixiya tababarada, tixgelin gaar ahna waxaa la siiyaa taageerid iyo tilmaamid joogto ah, waxaana lagu sameeya dabagal ku habboon, la socod iyo kormeerid, iyo tababaro lagu kaabo kuwii hore (eeg Qoraalka Hagidda 4)
- Tababarka, oo ay ku jiraan la socod dabagal ah, wuxuu ku dhiirigeliyaa barayaasha in ay ahaadaan kuwo gacan ka geysanaya horumarinta goobta wax lagu baranayo, kor u qaadidda baridda ku salaysan ka qayb-galka, iyo weliba isticmaalka agabka loo adeegsado waxbaridda.
- Waxyaalaha tababarku ka kooban yahay si joogto ah ayaa loo daraaseeya si loo hubiyo in ay daboolayaan baahiyaha barayaasha, ardayda iyo bulshada, dib u dersid ayaana lagu sameeyaa marka ay lagama maarmaanka noqoto.
- Tababarku waxa uu barayaasha siiyaa xirfado ku habboon oo u saamaxa in ay qaataan door hogaamineed marka ay uga baahdaan xubnaha bulshada.

***Qoraallada Hagidda***

1. *"**Bare**"* waxaa loola jeedaa macallimiinta dhiga waxbarashada tooska ah iyo weliba kuwa fududeeya barnaamijyada waxbarashada dadban (eeg jaangooyooyinka 1-3 ee Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee waxbarashada ee bogagga 65-69 ee khuseeya macluumaadka shaqo-qorista iyo xulahsada, xaaladaha shaqada iyo taageeridda iyo kormeeridda)

2. ***Dejinta Manaahijta tababarada iyo waxyaabaha ay ka kooban yihiin*** waa in lagu saleeyaa baahiyaha shaqaalaha waxbarashada iyada oo xaaladda ay ku jiraan loo eegayo, iyo weliba waqtiga iyo miisaaniyadda loo hayo. Barnaamijka tababarku waa in uu wax ka tari karaa caqabadaha soo waajaha waxbarashada qiimaha ku salaysan xilliyada lagu jiro xaaladaha degdegga ah waana in lagu dhex daraa xirfadaha nolosha iyo barashada nabadda, marka loo baahdo.

   Manhajka tababarku waxaa ku jiri kara, inkasta oo aanay ku koobnayn maaddooyinka cilmiga; barashada macallinimada, habka wax dhigista; horumarinta carruurta; baridda dadka waaweeyyn; qaddarinta kala duwanaanshaha, qaabka wax loo baro ardayda u baahan waxbarashada gaarka ah; baahida nafsaaniga ah, iyo horumarinta; ka hortagga iska hor-imaadyada; xirfadaha nolosha ee barayaasha (oo ay ku jiraan HIV/AIDS); xiriirada dugsiyada iyo guddiyada; isticmaalka khayraadka bulshada; iyo aqoonsiga iyo daboolidda baahiyaha dadka waddada ku jira iyo kuwa guryo noqonaya, sida dadka gudaha ku barokacay, ama qaxootiga.

3. ***Taageeridda tababarka iyo isku dubbarididda***: Marka xaaladda degdegga ahi ay degto, maamulayaasha waxbarashada ee heer qaran iyo heer degaan iyo guddiyada waxbarashada bulshada waa in laga qayb

galiyaa qaabaynta iyo dhaqan gelinta waxbarashada tooska ah iyo ta dadbanba ee tababarada macallimiinta, marka ay suurtogalka tahay. Waxaa lagu taliyaa in la bilaabo doodaha manaahijta ee macalliimiinta shaqada ku dhex tababaranaya, iyo farsamooyinka aqoonsiga tababarrada la bixiyay, bilawga waxqabadka xaaladda degdegga ah. Si kastaba ha ahaatee, inta badan xaaladaha qaxootiga marka lagu jiro waxaa jira xiriir ka dhexeeya bulshada qaxootiga iyo barnaamijyadeeda waxbarasho iyo nidaamka waxbarasho ee deegaanka.

Halka ay suuurtogalka tahay, tababarayaal degaanka ah waa in la xushaa si ay u dejiyaan, una fuliyaan tabobarka macalimiinta oo ku habboon, iyada oo awooddooda wax dhigis kor loo qaadayo, iyo xirfaddaha tabobaridda marka loo baahdo. Marka ay aadka u yar yihiin tababarayaashu ama iyaga laftigoodu aanay helin tababar ku filan, hay'adaha kale (sida Qaramada Midoobey, NGO-yada caalamiga ah) iyo macaahidda heer degaan iyo heer qaran waa in ay awooddooda isugu geeyaan in ay xoojiyaan nidaamka jira ama kala guurka ah iyo in ay siyaan tabobarro hay'adaha iyo macaahidda bixinaya tababarka macallimiinta inta ay shaqada ku jiraan iyo tababarashada macallimiinta ee shaqada ka hor.

4. ***Aqoonsi iyo Awoodsiin***: Oggolaanashaha iyo awoodsiinta masuuliyiinta waxbarasho ee heer degaan iyo heer qaran ayaa la raadiyaa si ay qayb ahaan u hubiyaan tayada iyo aqoonsiga xaaladda markaas lagu jiro iyo weliba xilliga ka dambeeya xaaladda degdegga ah. Marka laga hadlayo macalimiinta qaxootiga ah, mas'uuliyiinta waxbarashada ee martida loo yahay ama wadanka/deegaanka ama mid uun kuwan ka mid ah waa in ay aqoonsadaan tababarka. Ujeeddadan awgeed, waa lagama maarmaan in koorasyada tababarada macalimiintu ay noqdaan kuwa si fiican loo habeeyay, si hagaagsanna loo diiwaan geliyay, waana in u dhigmaan shahaadooyinka ay macallimiinta uga baahan yihiin masuuliyiinta waxbarashadu iyo weliba wax kasta oo kale oo la xiriira xaaladda degdegga.

## Baridda iyo Barashada, jaangooyada 3aad: Sharaxaaad

**Sharaxaaddu waa in ay noqotaa mid ardaygu xuddun u yahay, oo leh ka qayb-gal iyo u dhamaansho.**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Ardayda waxaa la siiyaa fursado ay si firfircoon ugaga qayb-galaan barashadooda (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Noocyada ka qayb-galka ayaa la isticmaalaa si loo dhiirigeliyo in kuwa waxbaranayaa (ardayda) ay ku lug lahaadaan waxbarashadooda, iyo in lagu hormariyo bey'ada barashada.
- Iyada oo la adeegsanayo waxqabad dhab ah iyo in la dhexgalo bartayaasha, macallimiintu waxa ay muujiyaan in ay fahansan yihiin waxyaabaha casharku ka kooban yahay, iyo xirfadaha baridda ee ay heleen intii lagu guda jiray koorasyadii tababarka.
- Bariddu waxa ay taabataa baahiyaha ay leeyihiin dhammaan kuwa wax baranayaa, oo ay ku jiraan kuwa baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah leh, iyada oo la dhiirigelinayo u dhamaanshaha iyo yaraynta caqabadaha barashada (eeg Qoraalka Hagidda 2)
- Waalidiinta iyo hogaamiyayaasha bulshadu waxa ay fahmaan, ayna oggolaadaan waxyaabaha la baranayaa waxa ay ka kooban yihiin iyo habka baridda ee la adeegsanayo (eeg Qoraalka Hagidda 3)

***Qoraallada Hagidda***

1. ***Ka qaybgelin firfircoon (active engagement):*** bariddu waa in ay noqotaa mid ku salaysan ka is-dhexgal iyo ka qayb-gal. Sidoo kale waa in loo adeegsadaa hababka ugu habboon ee baridda iyo barashada. Tan waxaa ka mid noqon kara, iyada oo ay jiraan kuwa kale, hawl-kooxeed, mashruuc, wax kala barasho, jilitaan, sheekooyin, ciyaaro, fiidiyow iwm. Barashada firfircoon waxay gacan ka gaysataa dhisidda xiriir laba geesood ah oo dhex mara baraha iyo ardayda, iyo weliba ardayda dhexdooda, waxaa kale oo ay caawisaa hubinta fayoobida xagga damiirka (eeg gaarida iyo bey'ada barashada jaangooyada 2aad, Qoraalka Hagidda 6 ee bogga 46)
2. ***Caqabadaha barashada:*** Barayaasha waa in loo tabobaraa in ay kala hadlaan waalidiinta, xubnaha bulshada, hogaamiyayaasha waxbarashada iyo ciddii kale ee ay khusayso muhiimadda ay leeyihiin waxqabadyada waxbarashada tooska ah iyo ta dadbani marka lagu jiro xaaladda degdegga ah, iyo sidoo kale in lagala munaaqashoodo arrimaha kala duwanaanshaha, u dhamaanshaha iyo gaaridda goobaha durugsan. Wadahadallada lala yeelanayo hogaamiyayaasha waxbarashada, waalidiinta iyo xubanaha bulshada waxaa loogu baahan yahay si loo hubanti looga dhigo fahamkooda iyo taageeradooda loo wada dhan yahay, iyo weliba bixinta agabka muhiimka ah.
3. ***Doorashada iyo Adeegsiga qaababka waxbariddu*** waxa ay u baahan doonaan in la tixgeliyo waxbarashada, waayo-aragnimada, tababarka, iyo baahida barayaasha. Barayaashu waxa ay u baahan doonaan in ay si wayn u fahamsan yihiin waxyaabaha is beddelay, iyo sidoo kale isbeddelka feejignaanta iyo dabeecadda ee laga filayo baraha. Ku lug lahaanshaha iyo oggolaanshaha waalidiinta, bulshada, hogaamiye dhaqameedyada iyo kuwa diintu waxay lagama maarmaan u yihiin tifaf tiridda (qodxo ka siibidda) waxqabadyada iyo nidaamyada waxbarid si wax looga qabto walaacyada bulshadu ka qabi karto.

## Baridda iyo Barashada, jaangooyada 4aad: Daraaseyn

Habab ku habboon ayaa loo adeegsadaa qiimeynta iyo aqoonsiga guulaha waxbarasahada

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Habab daraaseyn iyo qiimeyn oo joogto ah ayaa jira si loogu qiimeeyo waxbarashada si muddeysan oo ku habboon. Waxaa jira nidaam loo adeegsado in xogtaas lagu wanaajiyo tayada waxdhigista (eeg qoraalka hagidda 1).
- Waxaa la aqoonsadaa guulaha ay gaaraan bartayaasha waxaana la bixiyaa natiijo ama caddeymo in maaddadaa la dhammeystirtey (eeg qoraallka hagidda 2).
- hababka daraaseynta iyo qiimeynta ayaa la aaminsan yihiin in ay caddaalad ku dhisan yihiin, la isku halleyn karo oo aaney handadaad ku ahayn bartaha (eeg qoraalka hagidda 3).

***Qoraallada Hagidda***

***1. Habab iyo tallaabooyin daraaseyn iyo qiimeyn waa in la qaadaa kuwaas oo ay ka muuqato in la tixgeliyey.***

- *U habboonaanshahooda* (tusaale ahaan, imtixaannada oo ku habboon waxa la baranayo.
- *Joogtanimadooda* (tusaale ahaan hababka qiimeynta oo ay og yihiin oo si simmanna ay macallimiinta kala duwan ugu adeegsadaan goobaha kala duwan).
- *Fursadda* (Bartayaasha maqan oo la siiyo fursad cusub oo lagu qiimeeyo)
- *Waqtiga* (Qiimeyntu waxa ay dhacdaa inta ay socot iyo dhammaadka sharaxaadda).
- *Soo noqnoqashada (*arrintan ayaa laga yaabaa in ay saameyso xaaladda degdegga ah).

- *Goob ku habboon* (goob iyo dhisme ku habboon ayaa la helayaa marka la sameynayo qiimeyn rasmi ah (imtixaanno) oo ay qaadaan hawlwaddeenno waxbarasho oo ku habboon. Iyo
- *Daneeyayaasha iyo daahfurnaanta (natiijooyinka qiimeynta ayaa waxaa lala wadaagaa bartayaasha iyo marka carruur laga hadlayana waalidkooda).*

2.. ***Natiijooyinka qiimeynta:*** marka laga hadlayo barnaamijyada waxbarashada tooska ah. Waa in qiimeynta loo sameeyaa si ay guulaha bartayaasha iyo natiijooyinka imtixaannaadka ay u aqoonsan karaan madaxda waxbarashada ee dalka martida loo yahay iyo/ama dalka laga yimid. Marka laga hadlayo qaxootiga, waa in dadaallo lagu bixiyaa in aqoonsi laga helo madaxda waxbarashada ee deegaannada laga yimid. Qoraallada lagu caddeynayo in kooras waxbarasho la dhammeystey waxaa ku jiri kara, laakiinse aaney ku koobneyn, diplomayaal, shahaadooyin qalin jebin. Iwm.

*3.. **Xeer dhaqan anshaxeedka qiimeynta:** daraaseynta iyo qiimeynta waa in loo sameeyaa loona fuliyaa si waafaqsan xeer dhaqan anshaxeedka. Daraaseynta iyo qiimeyntu waa in ay laga aaminsan yahay in kuwo caddaalad ku dhisan la isku halleyn karo waana in loo sameeyaa si aan kordhineynin cabsi iyo qaracan. Waa in laga taxadaraa in aan lagu xadgudbeynin bartayaasha iyaga oo looga beddelanayo natiijo wanaagsan ama dhiirigelin uu ka hely dugsiga ama barnaamijka dhexdiisa.*

# *4. Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada*

## Hordhac

**Dhammaan dhinacyada gargaarka bani'aadamnimo waxa ay ku tiirsan yihiin xirfado, aqoon iyo dadaalka shaqaalaha iyo mutadawiciinta ku shaqaynayaa xaaladaha adag ee wiliba aan amniga ahayn. Waxa laga doonnaya ayaa noqon kara kuwoaan fududayn, markaa si ay u gaaraan jaangooyooyinka ugu hooseeya, waxaa lagama maarmaan ah in si ku habboon loo tababaro, maamulo, loola socdo, iyo weliba in la siiyo agabka, taageerada iyo kormeerka lagama maarmaanka ah.**

Marka lagu jiro xaalad degdeg ah, shaqo qorista iyo xulashada barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu waa in uu ku salaysnaadaa ka qayb-gal buuxa, iyo daahfurnaan, waana in lagu saleeyaa shuruudo cayiman. Haddii ay suurtogal noqoto shaqaalaha waxbarashada waa in laga dhex qaata dadyawga aafoobay. Tani waxa ay saamaxaysaa in barnaamijyada waxbarashada lagu lifaaqo (dhexgeliyo) caadooyinka, dhaqanka, iyo waayo aragnimada qadarinaysa dhaqannada suuban, waxyaabaha dadku rumaysan yihiin, iyo baahiyaha dadyawga tabaaloobay.

Marka la shaqaaleeyo barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu waa in ay si wadajir ah ula shaqeeyaan bulshada si loo dejiyo xeer hab dhaqan anshaxeed iyo in la qeexo shuruudaha shaqada. Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada waa in lagu shaqaaleeyaa heshiiyso cad-cad, oo qeexaya xuquuqdooda (mushahar ama dhiiri gelin, maalmaha shaqada, iyo saacadaha, iyo shuruudaha shaqada iwm), iyo waajibaadyada saaran iyo xilalkooda. Xeer habdhaqan anshaxeedka waa in uu sameeyaa jaangooyooyin cad cad ee la xiriira dabeecadda barayaasha iyo shaqaalaha waxbarashada iyo weliba in uu qeexo ciqaabta ku imaanaysa qofkii aan u hogaansanaan ama gaarin jaangooyooyinkaas la dejiyay. Waxbarashada oo loo helo taageerada dadyawga aafoobay, waxa ay gacan ka geysanaysaa geedi socodka shaqaalaynta iyo shaqo ku sii haynta barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada iyo doonitaanka waalidiinta ee ah in ay carruurtooda dugsiyada u diraan.

Meelaha khalkhalku ka taagan yahay, barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu, si la mid ah dadka kale ee bulshada, waa in ay  xal u raadiyaan dhibaatooyinka soo waajaha, ayna  dib u dhisaan noloshooda. Shaqaalaha waxbarashada tooska ah iyo kuwa waxbarashada dadbaniba taageero ayay u baahan yihiiin si ay ula qabsadaan xaaladda degdegga ah, iyo weliba jaah-wareerka iyo kadeedka (werwerka iyo walaaca) ka dhashay masiibada ama iska horimaadka. Taageero farsamo oo u suurtogelin karta in ay dhexdooda is caawiyaan, sidoo kalana waa in lagu qalabeeyaa qalabka iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah in ay kor u qaadaan fayoobida kuwa waxbaranaya

In tababar ku habboon la siiyaa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu waxa uu lagama maarmaan u yahay guulaysiga barnaamijyada waxbarashada xaaladda degdegga ah. Jaangooyooyinka tababarada waxaa laga helaa waaxda Baridda iyo Barashada.

Barayaasha iyo shaqaalaha waxbarashadu sidoo kale waxa ay u baahan yihiin in lagu taageero kormeerid.  Heer bulsho ahaaneed, waalidiin, hogaamiyeyaal tuulo, guddiyada waxbarashada bulshada iyo saraakiisha dawladda hoose waxa ay u baahan yihiin tababarro la xiriira sida loola socdo, loona taageero barnaamijyada waxbarashada ee goobahooda. Marka dadka aafoobay la dhiso awooddooda si ay u maamulaan barnaamijyadooda waxbarasho, waxa ay adeegsadaan xuquuqdooda isku xisaabtanka, waxaana ay xal u heli karaan dhibaatooyinkooda.  Ka qayb-galka bulshada ee taageeridda iyo kormeeridda  shaqaalaha waxbarashadu waxa ay kor u qaaddaa xiriir miro dhal leh oo ku dhex mara bulshada iyo barayaasha bey'ada (goobaha) waxbarashada.

Waxqabadka maamulka dugsiga, barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada waa in si joogto ah loola socdaa, loona qiimeeyaa si loo hubiyo tayada iyo taageerada joogtada ah ee dadyawga aafoobay. Waa muhiim in la socodkaas iyo qiimayntaasi ay noqdaan qaab hagineed, ee aanay noqon kantaroolid/xakameyn keliya. La socodka iyo qiimaynta ku salaysan ka qayb-galku waxa ay aasaas u yihiin hagaajinta tayada shaqada barayaasha iyo waxqabadkooda. Qiimaynta waxqabadka shaqaaluhu, ilaa inta suurtogalka ah, waa in ay u noqotaa barayaasha mid waayo aragnimo u kordhisa.

## Xiriirka kala dhexeeya jaangooyooyinka ay wadaagaan qaybaha oo dhami

Nidaamka kobcinta iyo fulinta waxqabadyada waxbarashadu waa kuwo aad  muhiim ugu ah waxtarkeeda. Waaxdan  waa in la adeegsadaa iyada oo lala xiriirinayo jaangooyooyinka ay qaybaha oo dhami wadaagaan, kuwaas oo ah bulshada, ka qayb-galka, khayraadka gudaha, daraasaadka bilawga ah, waxka qabashada, la socodka iyo qiimaynta. Gaar ahaan, ka qayb-galka dadyawga masiibadau aafaysay – oo ay ku jiraan kooxaha nugul – waa in la gaarsiiyaa heerka ugu sarreeya si loo hubiyo  tayadeeda iyo ku haboonaanshaheedaba.

- ***Jaangooyooyinka ugu hooseeya*:** kuwani waa kuwo caadiyan tayo-sheegayaal ah, waxaana ay cayimaan heerka ugu hooseeya ee ay tahay in la gaaro marka wax laga qabanayo dhinaca waxbarashada.
- ***Tilmaamayaasha muhiimka ah*:**  Kuwani waa calaamado tusinaya in qiyaastii la gaaray iyo in kale. Waxa ay sahlaan hab loo cabbiro, loona sheego raadka ama natiijada barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raaca iyo farsamada la adeegsaday.  Tilmaamayaashu waxa ay noqon karaan tayo-sheegeyaal iyo tiro-sheegayaalba.
- ***Qoraalada hagidda***: kuwani waxaa ku jira baro mucayin ah oo ay tahay in tixgelin gaar ah la siiyo marka lagu dabakhayo Jaangooyooyinka, iyo tilmaamayaasha xaalado kala duwan, hagidda la tacaalidda dhibaatooyinka waaqiciga ah, iyo ka talo bixinta u kala hor marinta arrimaha sida ay u kala muhimsan yihiin.

Waxaa kale oo ku jiri kara arrimo aad u xasaasi ah oo la xiriira jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha, iyo sidoo kale qeexidda arrimaha lagu wareero ama kuwa is burinaya, ama dulduleelada ku jira aqoonta arrintan loo leeyahay.Lifaaqa 2aad waxa raacaya liisto loo doortay tixraac, taas oo tilmaamaysa ilihii laga soo kala qaatay xogta guud iyo tan farsamo ahaaneed ee la xiriirta waaxdan.

| |
|---|
| **Lifaaqa 1aad**<br>**Xeer Hab dhaqan Anshaxeed** |
| **Dhejiska 2aad: Tixraacyo iyo hagaha khayraadka ee**<br>**Waaxda Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Waxbarashada** |

## Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee waxbarashada Jaangooyada 1aad:

## Shaqo qorista iyo Xulashada

Waxaa la shaqaaleeyaa tiro ku habboon oo barayaal iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada ah iyada oo shuruudaha lagu xulanayaa ay yihiin kuwo ku salaysan daahfurnaan iyo ka qayb-gal ka tarjumaysa kala duwanaansho iyo sinnaan.

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Tilmaanta qoran oo cad kuna habboon shaqada (job description) ayaa la sameeyaa ka hor inta aan la gudagelin shaqaalaynta (eeg haga 1aad)
- Tilmaame (hab-raac) cad oo loo raacayo shaqaalaynta ayaa jira
- Guddi xulasho, oo ay ku jiraan xubno bulshada wakiil ka ah, ayaa xusha barayaasha iyaga oo ku salaynaya daraasayn daahfuran tartame walba dhinacyadii uu ku wanaagsan yahay, tixgelinna siinaya jinsiga (gender), kala duwanaanshaha iyo oggolaanshaha bulshada (eeg Qoraallada Hagidda 2-5)
- Tirada barayaasha shaqada la qorey iyo la hawl geliyay waa mid ku filan ka hortagga in fasalladu buux dhaafaan (eeg Qoraalka Hagidda 6).

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Tilmaanta qoran ee shaqada*** waa in ay ku jiraan, doorarka, xilalka iyo cidda qofku warbixinta sii marinayaa, iyo sidoo kale xeer hab dhaqan anshaxeed iwm.
2. ***Waayo-aragnimo iyo Shahaadooyin:*** marka lagu jiro xaalad degdeg ah, waa in ujeeddadu ahaataa in la shaqaaleeyo barayaal aqoon leh oo haysta shahaadooyin la aqoonsan yahay, laakiin, xaaladaha qaarkood, kuwa leh waayo-aragnimo yar ama aan lahaynba ayaa loo baahan doonaa in la tixgeliyo. Marka xaaladaha noocaas ahí jiraan tababarro ayaa loo baahanayaa. Haddii barayaasha aqoonta lihi, aanay haysan caddaymo iyo dukumentiyo, waa muhiim in la helaa nidaam kale oo wax lagu kala saaraa sida: imtixaan laga qaado kuwa shaqada soo qorta. Iyada oo ay tahay in da'da qofka ugu yar ee bare noqon karaa ay tahay 18 sano, haddana waxaa laga yaabaa in ay lagama maarmaan noqoto in la shaqaaleeyo barayaal da'daas ka yar. Waa muhiim in hore loo shaqaaleeyo haween barayaal ah iyo in la isku miisaamo shuruudaha shaqaalaynta ama geeddi-socodka si kor loogu qaado isle'ekaanshaha labka iyo dhadigga, marka ay suurtogalka tahay ee ay habboonaato.

   Waa lagama maarmaan in la shaqaaleeyo barayaal ku hadlaaya luqadda/ha rasmiga ah ee dadyawga wax baranaya ee laga tirada badan yahay kuwaas oo lagu barayo luqadda wadanka ee aan lagu barayn luuqadooda usii gaarka ah. Marka ay habboonaato, koorasyo degdeg ah oo ah luuqadaha wadankooda iyo/ama wadanka martida loo yahay waa in la siiyaa ( Sidoo kale eeg Baridda iyo Barashada jaangooyada 1aad, hgaha 7 ee bogga 58aad).

3. ***Shuruudaha waxaa ku jiri kara:***

   - Shahaadooyin xirfadeed, jaamacadeed, waayo-aragnimo barrenimo ama cilmi nafsiga/cilmiga bulshada ah (psychosocial); waayo-aragnimo farsamooyin kale iyo luuqadaha loo baahan yahay.

- Aqoonsiyada shaqsiga; da'da; jinsiga (shaqaalayntu waa in ay isu dheelitirtaa labka iyo dhaddigga haddii ay suurto-gal tahay)' isirka, iyo diinta; kala duwanaanshaha (si loo hubiyo in bulsho walba cidi metasho);
- Aqoonsiyada kale; oggolaanshaha iyo dhexgelidda bulshada; iyo ka mid ahaanshaha dadyawga aafoobay.

4. ***Xulasho:*** Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada marka la xulanayo waa in ahmiyadda koowaad la siiyaa oo laga soo dhex xushaa dadyawga aafoobay, laakiin haddii ay lagama maarmaan noqoto waa laga soo shaqaalayn karaa dibadda, Haddii xero qaxooti ama mid dad soo barakacay la sameeyo, arjiyada shaqada ee dadka degaanka ee buuxin kara shaqadaas waa suurtogal in la tixgeliyaa haddii loo arko inay wanaajinayso xiriir wanaagsan oo samaysma. Xulashada waa in la sameeyaa iyada oo lala tashanayo bulshada; bulshada martida loo yahay iyo mas'uuliyiinta degaanka.
5. ***Tixraacid/markhaati kac:*** Xaaladaha qalafsan marka lagu jiro, waa in hubin lagu sameeyaa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada si aan loo shaqaalayn dad saamayn xun ku reebi kara kuwa wax baranaya iyo/ama aan xuquuqda ixtiraamayn.
6. ***Jaangooyo degaan ahaan macquul ah*** waa in loo dejiyaa ugu badnaan fasalku inta ruux ee uu qaadi karo, waana in wax walba la sameeyaa si loo shaqaaleeyo barayaal ku filan, lagana digtoonaadaa (taxadaraa) in jaangooyadaa lagu xadgudbo. Warbixinaha la socodku waa in ay tusiyaan tirada fasallada buux dhaafay ee heerarka kala duwan ee dugsiga.

## Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada, jaangooyada 2aad: Xaaladaha Shaqada

Barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu waxa ay leeyihiin shuruudo qeexan oo la xiriira shaqadooda, xeer hab-dhaqan anshaxeed la raaco , waxaana ay helaan xaq-siin ku habboon.

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Xaqsiinta iyo shuruudaha shaqada waxaa lagu cayimaa heshiiska shaqada, xaqsiinta si joogto ah ayaa loo bixiyaa, iyada oo lagu salaynayo heerka aqoonta iyo hufnaan u gudashada hawsha (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Ururrada caalamiga ahi waxa ay la shaqeeyaan mas'uuliyiinta waxbarashada, gudiyada waxbarashada ee bulshada iyo Ururrada aan dowliga ahayn si loo dejiyo istiraatiijiyada ku habboon, iyo in la isla meel dhigo qiyaas go'an oo mushahar ah, oo caddaalad ah, la oggolaan karo, joogtana ah oo la siinayo qaybaha iyo darajooyinka kala duwan ee barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada (eeg Qoraalka Hagidda 2)
- Xeer hab dhaqan anshaxeed iyo shuruudo cad-cad oo xagga shaqada ah ayaa la dejiyaa iyada oo loo dhan yahay, ayna ka qayb-gelayaan shaqaalaha waxbarashada iyo xubno bulshada ka tirsan, sidoo kalena waxaa jira nidaam cad oo qeexaya sida loo fulinayo (eeg Qoraallada Hagidda 1 iyo 3)
- Xeer hab dhaqan anshaxeedka waxaa saxiixa, raacana shaqaalaha waxbarashada, sidoo kalena waxaa la diiwaan geliyaa tallaabooyinka la qaadayo haddii lagu xadgudbo iyo/ama haddiiba la jebiyo xeer hab dhaqan anshaxeedka (eeg Qoraallada Hagidda 3-4)

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Shuruudaha shaqadu*** waa in ay caddeeyaan shaqada qofku qabanayo, xaqsiinta, soo xaadiridda, saacadaha iyo maalmaha shaqada, muddada heshiisku soconayo, taageerada iyo nidaamka kormeeridda, iyo farsamooyinka murannada yimaadda lagu xalinayo (eeg jaangooyada 1aad, Qoraalka Hagidda 1).

2. ***Xaqsiintu*** waxa ay noqon kartaa lacag ama wax kale, waana in ay ahaatee mid ku salaysan (sidii lagu heshiiyay), waana in si joogto ah loo bixiyaa. Heerarka xaqsiinta ee habbooni waa in ay ahaadaan kuwa dejintooda la hubiyay in ay ka qayb-qataan dhammaan cidda ay khusaysaa. Waa in ay ujeeddadeedu tahay ilaa heer hubanti ka dhigaysa xirfadda iyo socodsiinta adeegga iyo joogtaynta. Gaar ahaan, waa in ay noqotaa mid ku filan in ay barayaasha u suurtogeliso in ay awooddooda oo dhan saaraan xirfaddooda shaqo halkii ay ka raadin lahaayeen ilo kale oo ay wax ka soo gaalaan si ay u daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah. Xaqsiintu waa in ay ahaataa mid ku salaysan ku dhaqan shuruudaha shaqada iyo xeer hab dhaqan anshaxeedka.

Waa in aad looga digtoonaadaa in barayaasha ka kala yimid meelo kala duwan (dhalashooyin iyo qaxootiyo) ay helaan mushaharooyin heerkoodu kala duwan yahay. Kuwa hormuudka ka ah hawshan waa in laga qayb-geliyaa dejinta istaraajiyadda waqtiga dheer ee joogtaynta nidaamka xaqsiinta.Waa in ay jirtaa wada shaqayn ka dhaxaysa Hay'adaha Qaramada Midoobay, Ururrada aan dawliga ahayn (NGOs), maamulayaasha waxbarshada iyo ururrada kale si ay u go'aansadaan heerar xaqsiimeed oo isku mid ah.

3. ***Xeer hab dhaqan anshaxeedku*** waa in uu dejiyaa xirmo jaangooyooyin cad cad ah oo khuseeya dhaqammada shaqaalaha waxbarashada, si gaar ahna u qeexaa tallaabada ay waajibka tahay in laga qaado qofka hareer mara jaangooyooyinkaas. Xeer hab dhaqan anshaxeedka waa in lagu dabakhaa goobaha waxbarashada iyo dhacdooyinka iyo waxqabadyada barnaamijyada waxbarashada (eeg lifaaqa 1aad ee bogga 70aad – muunad xeer hab dhaqan anshaxeed).

Xeerku waa in uu damaanad qaadaa in barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu ay ka shaqeeyaan horumarinta bey'ada waxbarashada iyo fayoobaanta(baraaraha) kuwa waxbaranaya. Xeerku waa in uu caddeeyaa in shaqaalaha waxbarashadu ay:

- Soo bandhigaan dhaqan ay ku dheehan tahay xirfadlenimo iyaga oo joogtaynaya anshax aad u sarreeya, naftooda oo ay xakameeyaan iyo dabeecad uu anshax iyo milgo ku dheehan yihiin.
- Ka qayb-qaataan abuuritaanka jawi u wada cuntami kara ardayda oo dhan;
- Joogteeyaan bey'o fayo iyo caafimaad qabta, oo xor ka ah kadeedi/ dhibaatayn (oo ay ku jiraan kadeedid la xiriirta galmada), daandaansi, xadgudubid iyo fadqalallo iyo isir soocid;
- Joogteeyaan soo xaadiridda shaqada, waqtigana ilaaliyaan;
- Soo bandhigaan xirfadlanimo iyo waxqabad hufan;
- Muujiyaan dabeecadaha kale ee loo arko in ay ku soo dhawaynayaan bulshada iyo kuwa ay waxbarashadu khusaysaa.

4. ***Sida loo hirgelinayo Xeer Habdhaqan Anshaxeedka***: waa in uu jiro tabobar ku saabsan xeer hab dhaqan anshaxeedka oo loo qabto dhammaan shaqaalaha waxbarashada iyo kuwa aan ahayn ee ku lugta leh goobta barashada. Tabobar iyo taageero waa in la siiyaa xubnaha guddiyada waxbarashada bulshada iyo kormeerayaasha waxbarashada iyo maareeyayaasha – tabobaradaas oo la xiriira doorarkooda iyo xilalkooda la socodka iyo dhaqan gelinta xeer hab dhaqan anshaxeedka. Waa in sidoo kale laga caawiyaa in ay carrabaabaan (tilmaamaan), ayna waafajiyaan wixii walaac ah ee xeer hab dhaqan anshaxeedka ka dhasha qorshayaasha barnaamijyada dugsiyada tooska ah iyo kuwa dadbanba. Farsamooyin kormeer waa in loo dejiyaa nidaam warbixineed daah-furan iyo nidaamyo la socod, kuwaas oo ilaalinaya sirta qaybaha ku lugta leh oo dhan (eeg jaangooyada 3aad ee hoose).

## Barayaasha iyo Shaqaalaha kale ee waxbarashada, jaangooyada 3aad:

## Taageero iyo Kormeer

**Farsamooyin taageero iyo kormeer ayaa loo dejiyaa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada, si joogto ah ayaana farsamooyinkaas loo adeegsadaa**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Farsamada (tabta) kormeeriditaanku waxa ay siisaa daraasad joogto ah, la socod iyo taageero barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Waxqabadka shaqaalaha qiimayn ayaa lagu sameeyaa, waa la qoraa, waxaana si joogto ah loogala munaaqashooda shaqsiyaadka ay khusayso (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Taageero xagga niyadda ah iyo la talin ku habboon ayaa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada la siiyaa, marka loo baahdo (eeg Qoraalka Hagidda 4)

**Qoraallada Hagidda**

1. ***Farsamada (tabta) kormeeridda***: dal walba ama goob kasta oo aafoowday waa in ay jaangooyooyin u dejiyaan barayaasha iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka, kobciyaan ayna dhaqan geliyaan. Farsamooyinkaas waxaa ka qayb noqon kara xubno wakiillo ka ah bulshada (oo ay ku jiraan hogaamiyaasha dhaqanka iyo diintu), ururrada bulshada ee dugsiyada sida ururka waalidiinta-barayaasha ah, mas'uuliyiinta degaanka, madaxda barayaasha, iyo ururka barayaasha. Farsamooyinka kormooritaanku waa in ay xiriir sokeeye la leeyihiin guddiyada waxbarashada bulshada. Guddidu waa in ay waxqabadyadooda oo dhan ku daraan kormeeridda shaqaalaha waxbarashada ee dhinacyada xeer hab dhaqan anshaxeedka, iyaga oo si gaar ah diiradda u saaraya xirfadlanimada, hufnaanta shaqada iyo dhaqan suubanaan (sidoo kale eeg Ka qayb-galka Bulshada, jaangooyada 1aad ee bogga 15aad)
2. ***Tabobar:*** Eeg Baridda iyo Barashada, jaangooyada 2aad ee bogga 59aad ee macluumaadka tabobarka shaqaalaha waxbarashada.
3. ***Qiimaynta Waxqabadka Shaqaalaha*** waa in ay ku jiraan daraasayn la xiriirta hufnaanta iyo waxtarka barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu, waana in ay siisaa fursad talo-bixineed oo ku habboon barayaasha, madaxa barayaasha iyo shaqaalaha kale ee ay khusaysaa in ay tilmaamaan arrimo (ka hadlaan waxyaabaha ay muhiimka u arkaan) iyo in la dejiyo talaabooyin lagu dabagelayo oo si wadajir ah heshiis loogu yahay. Marka ay habboonaato, qiimayntu waa in ay aqoonsataa, loona dabaal degaa guulaha la gaaray si niyadda loogu dhiso shaqaalaha waxbarashada. La socodka iyo qiimaynta loo dhan yahay waxa laga yaabaa in ay dhiiri geliyaan barayaasha ayna dar-dar geliyaan waxqabadkooda.
4. ***Taageerada wax ka qabsahada khalkhalka***: xitaa barayaasha isku darsaday tabobar iyo waayo –aragnimo iyo shaqaalaha kale ee waxbarashadu ayaa suurtogal ay tahay in iyaga laftigooda ay qaracan ku ridaan dhacdooyinku ayna waajahaan culaysyo iyo mas'uuliyado cusub oo ku aaddan brtayaasha waxaana awooddooda ay ugu adkaysan karaan ayna wax uga qaban karaan ku xiran tahay taageerada ay helayaan. Nidaam taageero farsamo waa in bulshada dhexdeeda laga sameeyaa si ay barayaasha iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada gacan u siiyaan xilliyada xaaladaha khalkhalka lagu jiro.

## Baridda iyo Barashada:

## Lifaaq

## Lifaaqa 1aad: Xeer Hab-Dhaqan Anshaxeedka Baraha

**Markasta, waa in baruhu:**

- uu muujiyaa dabeecad kor u qaadda sharafta iyo sumcadda shaqadda
- dhawraa qarsoodinimada wax kasta oo ardaydi uga hadlaan si qarsoodi ah
- ka dhawraa ardayda xaaladaha dhalin kara faro-galin ku samaynta waxbarashadooda ama halis ku keeni karta caafimaadkooda iyo badbaadadooda.
- aanu kaga faa'iideysan ardayda heerka uu/ ay taagan yahay, nooc kasta oo uu ahaadaba
- aanu u gaysan wax faraxumayn ah arday/ardayad oo uusan la yeelan wax xiriir galmo ah
- ku sifoobaa wanaag, daacadnimo, ahaadaana mid ku dayasho mudan

**Fasalka dhexdiisa, baruhu waxa uu:**

- kobciyaa bey'o ku habboon waxbarasho bedbaado leh
- wax u baraa si ixtiraameysa sharafta iyo xuquuqda ardayda oo dhan
- kobciyo hanka, kalsooniada & qiimaha ardayda
- kor u qaadaa hammiga sare ee ardayda, kana caawiyo arday kastaa sidii uu u gaari lahaa
- dhiiri geliyaa ardaydu in ay ahaadaan kuwa firfircoon, mas'uul ah ayna noqdaan waxbartayaal taabogal ah
- ka dhex abuuraa is aamin iyo kalsooni

**Noloshoodu shaqo dhexdeeda, baruhu waxa uu:**

- soo bandhigaa xirfad sal u ah habka wax dhigida maaddadiisa/deeda
- muujiyaa fahamka (maaddadiisa/deeda) sida ay carruurtu wax u bartaan
- mar walba waqtiga ilaaliyaa oo aaanu ka daahin fasalka, diyaarna u ahaadaa inuu dhigo
- ka fogaadaa wixii wax u dhimaya tayada waxbaristiisa/deeda
- kaa faa'iidaystaa dhammaan fursadaha hore u marinaya shaqadiisa/deeda, isla markaana adeegsadaa dariiqooyinka waxbaridda ee casriga ah.
- baraa mabaadi' suuban ee ay ku dheehan tahay waddaninimo, nabadgelyo, iyo xilkasnimo.
- Si daacad ah u soo bandhigaa arday kasta waxqabadkiisa iyo natiijada imtixaankiisa

**Dhanka Xushmada Bulshada, baruhu waa in uu:**

- ku dhiirri geliyaa waalidka in ay taageeraan kana qayb qaataan waxbarashada ilmahooda
- aqoonsanaadaa muhiimadda ay leedahay in waalidku ama bulshadu ku lug lahaadaan dugsiga
- taageeraa isla markaana kor u qaadaa sumcadda wanaagsan ee dugsiga

Marka lagu daro arrimaha aynu kor ku soo xusnay, baraha waxaa laga filayaa in uu u hogaansanaado dhammaan sharciyada kale iyo siyaasadaha ee bey'ada (xerada, dugsiga iwm)

# 5. Siyaasad Waxbarasho iyo Isku-dubbaridid

**Hordhac**

**Qawaaniinta iyo shuruucda caalamiga ahi waxa ay si cad u qeexayaan xuquuqda qof waliba u leeyahay inuu helo waxbarasho, taas oo aasaas u noqota horumarinta xuquuqda aadamaha. Xuquuqda cabirka fikirka ee xorta ah, xuquuqda sinaanshaha, iyo xuquuqda cod ku lahaanshaha go'aan qaadashada siyaasadaha arrimaha bulshada iyo waxbarashadu waa qayb aan looga maarmi karin waxbarashada**.

Marka lagu jiro xaalado degdeg ah waa lagama maarmaan in la dhawro xuquuqaha. Iyada oo qayb ka ah wax ka qabashada xaaladda degdegga ah, mas'uuliyiinta waxbarashada iyo ciddii kale ee ay khusaysaa waa in ay dejiyaan, fuliyaanna qorshe waxbarasho oo ku salaysan siyaasadaha waxbarasho ee heer qaran iyo mid caalami, una hogaansan xuquuq u lahaanshaha waxbarasho, oo waxna ka taraysa baahiyaha kuwa waxbaranaya ee ka midka ah dadyawga aafoobay. Guud ahaan ujeeddada arrintan laga leeyahay waa in kor loo qaado tayada waxbarashada iyo helitaanka dugsiyo iyo weliba in si cad loo muujiyo marxaladda kala guurka xaaladda degdegga ah iyo marxaladda horumarinta. Ka qayb-galka bulshada ee qorshaynta iyo fulinta waxqabadyada, barnaamijyada iyo siyaasaduhu waxa uu lagama maarmaan u yahay ka guul-gaaridda wax ka qabashada xaalad kasta oo degdeg ah.

Marka lagu jiro xaalad degdeg ah inta badan waxaa jira wadashaqayn la'aan dhinaca barnaamijyada waxbarashada iyada oo cid kastaaba iskeed isaga wadata hawlaheeda. Waxaa loo baahan yahay in la dejiyo farsamo wada shaqayneed dhex marta hay'adaha ka wada shaqaynaya isku degaan/hal bulsho ama degmo, waddan ama heer goboleed, waana in ay yihiin kuwo loo dhan yahay oo daahfuran. Farsamooyinka noocaas ahi waxay muhiim u yihiin in la sameeyo daraasadda baahida jirta, la dejiyo nidaamyo jaangooyn ah, iyo in la wadaago khayraadka iyo macluumaadka u dhexeeya dhammaan daneeyayaasha iyo kuwa ay khusaysaba.

Waxbarashada waa in lagu dhafaa waxqabadyada balaaran ee bilawga ah ee bani'aadamnimada ee cuntada, hoyga, caafimaadka, biyaha, iyo nadaafadda. Waxqabadyada waxbarasho ee ku salaysan waxqabadyada

taabogalka ah, waana in lagu saleeyaa baahiyaha bulshada ee ku jira xaalad gaar ah oo degdeg ah. Xirfadaha samotabixinta sida miinada, nadaafadda, iyo wacyi-gelinta ka feejignaanta HIV/AIDS waa in da' walba la siiyaa.

## Xiriirka kala dhexeeya jaangooyooyinka ay wadaagaan qaybaha oo dhami

Nidaamka kobcinta iyo fulinta waxqabadyada waxbarashadu waa kuwo aad  muhiim ugu ah waxtarkeeda. Waaxdan waa in la adeegsadaa iyada oo lala xiriirinayo jaangooyooyinka ay qaybaha oo dhammi wadaagaan, kuwaas oo ah bulshada, ka qayb-galka, khayraadka gudaha, daraasaadka bilawga ah, waxka qabashada, la socodka iyo qiimaynta. Gaar ahaan, ka qayb-galka dadyawga masiibadu aafaysay – oo ay ku jiraan kooxaha nugul – waa in la gaarsiiyaa heerka ugu sarreeya si loo hubiyo  tayadeeda iyo ku haboonaanshaheedaba.

- ***Jaangooyooyinka ugu hooseeya*:** kuwani waa kuwo caadiyan tayo-sheegayaal ah, waxaana ay cayimaan heerka ugu hooseeya ee ay tahay in la gaaro marka wax laga qabanayo dhinaca waxbarashada.
- ***Tilmaamayaasha muhiimka ah*:**  Kuwani waa calaamado tusinaya in qiyaastii la gaaray iyo in kale. Waxa ay sahlaan hab loo cabbiro, loona sheego raadka ama natiijada barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raaca iyo farsamada la adeegsaday.  Tilmaamayaashu waxa ay noqon karaan tayo-sheegeyaal iyo tiro-sheegayaalba.
- ***Qoraalada hagidda***: kuwani waxaa ku jira baro mucayin ah oo ay tahay in tixgelin gaar ah la siiyo marka lagu dabakhayo Jaangooyooyinka, iyo tilmaamayaasha xaalado kala duwan, hagidda la tacaalidda dhibaatooyinka waaqiciga ah, iyo ka talo bixinta u kala hor marinta arrimaha sida ay u kala muhimsan yihiin. Waxaa kale oo ku jiri kara arrimo aad u xasaasi ah oo la xiriira jaangooyooyinka iyo tilmaamayaasha, iyo sidoo kale qeexidda arrimaha lagu wareero ama kuwa is burinaya, ama dulduleelada ku jira aqoonta arrintan loo leeyahay.Lifaaqa 2aad  waxa  raacaya liisto loo doortay tixraac, taas oo tilmaamaysa ilihii laga soo kala qaatay xogta guud iyo tan  farsamo  ahaaneed ee la xiriirta waaxdan.

## Siyaasad waxbarasho iyo isku dubbaridid, jaangooyada 1aad: Dejin siyaasadeed iyo ansixin

**Mas'uuliyiinta waxbarashadu waxa ay mudnaanta siiyaan sidii cid waliba u heli lahayd waxbarasho lacag la'aan ah, iyo ansixinta siyaasad debecsan si loo horumariyo u dhammanshaha iyo waxbarasho tayo leh, iyada oo maskaxda lagu hayo nooca xaaladda degdegga ah ee lagu jiro.**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Marka xaaladda degdegga ah lagu jiro iyo ka dibba,sharciyada iyo siyaasadaha waxbarashada waa in ay u hogaansanaadaan xuquuqda waxbarasho ee lagu caddeeyay qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo cadaymaha waajibaadyada (eeg Qoraallada Hagidda 1-2)
- Sharciyada, xeerarka, iyo siyaasadaha ka badbaadinta midab ta kooridda waxbarashada ee la xiriirta nugaylka iyo dadyawga aan codkooda la maqal (eeg Qoraalka Hagidda 3)
- Waxaa jira sharciyo , xeerar iyo siyaasado si hubanti looga dhigo in kuwa waxbaranaya aan la iska hortaagin waxbarashada iyada oo sabab laga dhigayo khayraadka bartaha ama ka qoyskooda oo kooban awgeed (eeg Qoraalka Hagidda 4)
- Sharciyo, xeerar, iyo siyaasado toona kama hor istaagaan dugiysada qaxootigu in ay adeegsadaan manhajyada wadamada ama meelaha ay asal ahaan ka soo jeedaan
- Sharciyo, xeerar, iyo siyaasado ayaa u fasaxaya ururrada aan dawliga ahayn, marka loo baahdo in ay sameeyaan fududeeyayaal (*facilities*) waxbarashada xaaladda degdegga ah iyaga oo ay garwadeen u yihiin, kormeerayaanna masuuliyiinta waxbarashadu.
- Sharciyo, xeerar, iyo siyaasado ayaa loo baahiyaa hab ay cidwaliba ku fahmi karto
- Siyaasaddu waxa ay kor u qaaddaa kobcinta iyo adeegsiga nidaamka kaydinta macluumaadka maamulka waxbarashada (EMIS), si loogu adeegsado aalad lagu falan-qeeyo, jawaab celina lagaga sameeyo isbedellada helitaanka waxbarashada iyo dhammaystirka (eeg Qoraalka Hagidda 5)
- Siyaasadda waxbarasho ee heer wadan ayaa lagu taageeraa sharci iyo maaliyad oggolaanaysa in jawaab degdeg ah laga bixiyo xaaladaha degdegga ah (eeg Qoraalka Hagidda 6)

**Qoraallada Hagidda**

1. *Aaladaha iyo cadaymaha xuquuqda aadamaha ee caalamiga ahi* ee ay tahay in loo hogaansanaado waxaa ka mid ah, inkasta oo aanay ku koobnayn, Heshiiskii Qaramada Midoobey ee Xuquuqda Carruurta (1989), Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha (1948), Mucaahadada Dhaqaalaha, Bulshada, iyo Xuquuqaha Dhaqanka (1966), Heshiiska Ciribtirka Dhammaan Noocyada Kaladuwan ee Midab-takoorka Haweenka (1979) iyo Heshiiskii Dakar ee Waxbarashada loo dhan yahay (2000)
2. *Qaxootiga, barakacayaasha iyo dadka martigeliyey:* daneenayayaasha u habboon waa in ay iska kaashadaan in ay u qareemeeyaan in ay waxbarashadu ay dhammaan u gaarto si caddaalad ku dhisan. Tani waxaa ku jira la adkeeyo Heshiiskii 1951 ee la Xiriirey Xaaladda Qaxootiga: Qodobkiisa 22 (Waxbarashada Dadweynaha). Taas oo sheegeysa in qaxootigu ay leeyihiin xuquuq waxbarasho oo la mid ah tan ay leeyihiin muwaadiniinta marka laga hadlayo waxbarashada aasaasiga ah, waxbarashada sarena waa in ay soo gaari karaan waxbarashada, in la aqoonsado shahaadooyinkooda, dibloomayaashooda, iyo shahaadooyinkooda jaamacadeed, in la laga bixiyo ujuurooyinka/kharashaadka

iyo in ay helaan deeq waxbarasho oo ku xiran shuruudo aan ka liidan kuwa dadka dalka aan u dhalan ee deggan. In kasta oo dadka gudaha ku barokacay aan la siineynin ilaalin gaar ah haddana waa in ay helaan waxyaabo la mid ah kuwan kore. Hay'adaha waa in ay u qareemeeyaan xuquuqda waxbarashada ee ardayda muwaadiniinta ah ee dalalka qaxootiga qaabilaya ama degaaannada iyo dalalka uu saameeyey dagaalku.

3. *Kooxaha la fogeeyo* waa kooxaha dadka oo bulsho ama beel ku dhex nool kuwaas oo danahooda aan lagu matelin siyaasadaha ugu muhiimsan ee bulshadaas. Koooxaha la fogeeyo waxaa lagu gartaa heerka bulsho-dhaqaale ama tilmaamahooda dhaqan ahaaneed, sida dakhliga qofka ama dhaqaalihiisa, isirkiisa iyo sinjigiisa, jinsigiisa, degaankiisa dhuleed, diintiisa, muwaadinimadiisa, barakiciisa gudaha ama xaaladdiisa jireed ama maskaxeed. Carruurta magan-gelyo doonka ah waa in ay xuquuq u lahaadaan waxbarashada maaddaama Heshiiska Xuquuqda Carruurta ay soo hoos gelayaan dhammaan carruurta iyo qaangaarka ay da'doodu ka yar tahay 18 ee jooga dhulka qarankaaa (eeg jaangooyada 1aad ee Gaaritaanka iyo Bay'ada Barashada. Qoraalka Hagidda ee 1 ee boggga 42).

4. *Kharashka waxbarashada:* waa in aan bartena barnaamijyada waxbarashada loogu diidin dhaqaale la'aan, ha ahaato ujuurooyinka la bixiyo ama kharashaadka kale ee la xiriira, sida agabka barashada iyo yunifoomka (dharka). Waa in dadaal kasta lagu bixiyaa in la yareeyo kharashka aan tooska ahayn ee dugisyada, sida gaadiidka iyo dakhliga la dhumiyo, si markaa ay dhammaan carruurta, dhalinyarada iyo qaangaarku ay awood ugu yeeshaan in ay ka soo qayb galaan.

5. *Xogta EMIS* waa in ay ku xirnaataa xogta degaannada iyo kooxda dadka ee u nugul xaalado degdeg ah oo gaar ah. Tani waa istiraatiijiyad diyaar garow oo fikrad ku biirineysa qorshaha waxbarashada ee qaranka. Halkii ay suurtagal tahay, xogta waxbarashada waa in ay soo ururiyaan bulshada oo la geliyaa nidaamka xogta EMIS ee qaranka. Ururada taageera waa in ay bulshooyinka ku taageeraan in ay soo gudbiyaan habab lagu kordhin karo isqorista, joogista iyo dhammeysashada carruurta ee waxbarashada iyo in ay wax ka qabtaan baahiyaha dhalinyarada aan dugsiyada tegin (eeg >Jaangooyada 1aad ee Lafaurka, bogga 21 iyo Jaangooyada 3aad ee bogga 25).

6. *Qaababka Xaaladaha Degdegga ah:* waa in waxbarahsada lagu daraa qaabka u diyaargarowga masiibooyinka ee qaranka waana in la helaa kheyraadkii lagu bixin lahaa waxqabad waxbarasho oo taabogal ah waqtigana la socda. Hay'adaha caalamiga ah ee taageeraya barnaamijyada horumarinta waxbarashada ee heer qaran ama degaan waa in ay dhiirigeliyaan waxqabadka waxbarashada xaaladaha degdegga ah in ay qayb ka ahaato barnaamijyadaasi.

## Siyaasadda Waxbarashada iyo Iskudubaridka, Jaangooyada 2aad: Qorsheynta iyo fulinta

Waxqabadyada Waxbarashada Degdegga ah ayaa ku xisaabtamaya siyaasadaha iyo jaangooyooyinka waxbarashada ee caalamiga ah iyo kuwa qaranka iyo baahida waxbarasho ee dadka aafoobey.

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Sharciyada iyo siyaasadaha caalamiga ah iyo qaranka ayaa ka muuqda barnaamijyada waxbarashada ee hay'adaha gargaarka iyo horumarinta (eeg qoraalka hagidda ee 1)
- Barnaamijyada waxbarashada degdegga ah ayaa loo qorsheeyaa loona fuliyaa si keeneysa in la dhexgeliyo horumarinka muddada fog ee waaxda waxbarashada.
- Maamullada waxbarashada iyo kuwa ugu muhiimsan ee hawsha wax ka wada ayaa u sameynaya qorshayaal waxbarasho oo heer qaran ah xaaladaha degdegga ah ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka, waxaana ay abuurayaan nidaam si joogta ah loogu naqtiimayo (eeg qoraalka hagidda ee 2).

- Inta lagu jiro xaaladda degdegga ah iyo ka dibba, dhammaad kuwa ay khuseyso ayaa si wadajir ah u fulinaya qorshe wax looga qabanayo waxbarashada oo la xiriirta daraasaadkii ugu dambeeyey ee lagu sameeyey baahida jirta waxaana ay ku tiirsanaaneysaa waayo-aragnimadii, siyaasaddii iyo habdhaqanka waxbarashada ay lahaayeen dadka aafoobey.
- Waxqabadka waxbarashadu waxa uu cayimayaa maaliyadda, farsamada iyo dadka loogu baahan yahay qorseyn, fulin iyo la socosho taabogal ah. Kuwa ay khuseyso ayaa hubinaya in kheyraadka loo baahan yahay la helo (Eeg qoraalka hagidda 3).
- Qorsheynta iyo fulinta waxqabadyada waxbarashada ayaa la dhexgeliyey qaybaha kale ee wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah (eeg qoraalka hagidda ee 4).

## Qroaallada Hagidda

1. *Wax ka qabashada xuquuqda iyo gaaridda yoolalka waxbarashada:* barnaamijyada waxbarashada waa in ay bixiyaan waxqabadyo waxbarasho oo loo dhan yahay oo la jaanqaadaya sharciyada caalamiga ah sida, Heshiiska Xuquuqda Carruurta (1989). Baaqa Caalmiga ah ee Xuquuqda Aadanaha (1948). Qaabka Waxbarashada Loo Dhan Yahay (2000) iyo Yoolalka Kunsanadka Horumarka (2000). Iyo weliba Sharciyada iyo Siyaasadaha kale ee ku Habboon ee Maamullada Waxbarashada u yaalla.

2. *Qorshayaasha Qaranka ee Waxbarashada* waa in ay tilmaamaan talalabooyinka laga qaadayo xaaladaha degdegga ah ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee dhinaca barnaamijyada, hawl-wadeennada, kuwa ay khuseyso, go'aaminta iyo iskudubaridka, iyo sidoo kale cunsurada ammaanka iyo ilaalinta iyo hababkii loo mari lahaa isudubaridka waaxaha. Qorshe beddel noqda waa in loo diyaariyaa waaxda waxbarashada kaas oo la xiriira haddii ay dhacdo masiibo dabiici ah (tusaale ahaan, daadad, dhul-gariir, duufaan) iyo halka ay ku habboon tahay, qaxooti iyo dad soo guryo noqdey oo badan kaas oo saameyn ku yeelan kara nidaamka waxbarashada qaranka ama kan degaanka (eeg sidoo kale Jaangooyada1aad ee Ka Qaybgalka Bulshada, Qoraalka hagidda ee 5, ee bogga 16 iyo Jaangooyada 3aad ee hoose).

3. *Kheyraadka:* Maamullada, deeq-bixiyeyaasha, NGO-yada iyo kuwa kale ee ay khuseyo waa in ay ka wada shaqeeyaan hubinta in maaliyad ku filan loo helo barnaamijyada waxbarashada ee xaaladda degdegga ah kuwaas oo diiradda saaraya barashada, madadaalada iyo waxqabadyada la xiriira ee loogu talogalay in ay wax ka qabtaan baahiyaha nafsaani-bulsho. Marka ay xaaladaha degdegga ahi ay degayaan, fursadaha barnaamij-sameynta waxbarashada waxaa lagu ballaarin karaa kobcinta carruurta aad u yaryar, waxbarashada aasaasiga ah ee tooska ah iyo waxbarashada dugsiyada sare iyo akhris-qoraalka/farbarashada dadka waaweyn iyo barnaamijyada waxbarashada xirfadaha iyo kuwo kale. Kheyraadka la qoondeynayo waa in lagu miisaamaa in ay kordhiyaan cunsurrada la taaban karo (sida fasallo cusub, buugta akhriska iyo qalabka baridda iyo barashada) iyo cunsarada tayada (koorsooyin tababar oo macallimiinta iyo kormeerka).

4. *Jaangooyooyinka ugu hooseeya ee Sphere:* waa in dadal gaar ah lagu bixiyaa in qorsha hawleedka waxbarashada iyo fulintiisa lagu xiro jaangooyooyinka ugu hooseeya ee *Sphere*
   - biyaha, fayadhowrka iyo dhiirigelinta nadaafadda.
   - Haqab-beelka cuntada, nafaqeynta iyo cuntada gargaarka ah
   - hoyga, degaameynta iyo agabka aan cuntda ahayn, iyo
   - adeegyada caafimaadka (eeg xiriirka kala dhexeeya Jangooyooyinka Sphere ee dhejiska MSEE CD-ROM ee jaangooyooyinka la xiriira Sphere.

## Siyaasad waxbarasho iyo isku dubbaridid jaangooyada 3aad: isku dubbaridid

**Waxaa jira  farsamooyin wadashqayneed (isku dubarididdeed) oo loogu talagalay waxqabadyada waxbarashada xaaladda degdegga ah, oo ay ku jirto is waydaarsi hufan oo macluumaadka ah oo dhex mara kuwa/ururrada ay khusayso**

**Tilmaamayaasha Muhiimka ah** (waa in lala akhriyaa qoraallada hagidda)

- Masuuliyiinta waxbarashadu waxa ay dhisaan guddi isku-dubbaridda wadashaqaynta hay'adaha iyo waxqabadyada mustaqbalka ee xaaladda degdegga ah, taas oo door weyn ka ciyaarta qorshaynta iyo isku dubarididda waxqabadyada waxbarashada xaaladaha degdegga ah (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Marka aanay jirin mas'uuliyiin waxbarasho ama aanay awoodin in ay hogaamiyaan isku duburididda, guddida isku dubbarididda wax qabadka hay'adaha ayaa hoggaanka u qabta, iskuna dubbarida arrimaha waxqabadyada iyo barnaamijyada waxbarashada (eeg Qoraalka Hagidda 1)
- Mas'uuliyiinta, deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha kale waxa ay dejiyaan qaab-dhismeed maaliyadeed ay u dhan yihiin, gacanna ka geeysanaya dhammaan waxqabadyada waxbarasho ee hay'adaha kala duwan (eeg Qoraalka Hagidda 2)
- Odhaah cad oo ujeeddada isku dubbarididda (wadashaqaynta) ah, tusayaal, nidaamka socodka, ayaa jira, hay'adaha iyo cidwalba oo ku lug leh waxbarashaduna waxa ay ballan qaadaan in ay qorshahaas ku shaqaynayaan, ayna wixii macluumaad iyo tirokoob ah geliyaan meel cid walba u furan.
- ! Affected communities are authorised and able to participate in decision-making that directly

affects them, particularly in policy or programme formulation, implementation and monitoring.
! A transparent and active mechanism exists for sharing information across sectors and
between key national and international stakeholders (see guidance note 4).

**Qoraallada Hagidda**

***1. Guddida isku dubarididda wadashaqaynta hay'adaha:*** wakiillada waa in ay ku jiraan xubno matela bahweynta arrintani khusayso oo dhami, waxaana habboon in ay hormuud ka noqdaan mas'uuliyiinta waxbarashadu marka ay suurtogalka tahay. Guddiyada isku dubbaridka waxaa looga baahan karaa heer gobol, wadan, degmo ama degaan, taas oo marba ku xiran dabeecadda xaaladda degdegga ah. Goobaha aanay ka jirin mas'uuliyiin waxbarasho oo sharci ahi ama aanay awoodi karin, hay'adaha kala duwan waxa ay ku heshiin karaan hoggaan, laakiin waa in mar walba wakiillo ka socda maamulka degaanku ay qayb ka yihiin guddida. Isla marka xaaladdu oggolaatana, xilka isku dubbarididda waa in loo wareejiyaa mas'uuliyiinta ku habboon.

***2. Maalgelin:*** maaliyad ku filan ayaa loo baahan yahay si loogu guulaysto, waqtigii loogu talagalayna loo hirgeliyo barnaamijyada waxbarashada ee xaaladaha degdegga ah. Wax walba wa in la sameeyaa si hubanti looga dhigo nidaamyo daahfurnaan iyo nidaamyo maalgelineed oo isku dubbaridan, gaar ahaan marka nidaamka mushaharooyinka barayaasha lagu saleeyay aanu dhamaystirnayn ama aanu shaqaynaynba. Nidaamka maalgelinta ee ku meelgaarka ah waa in lagu saleeyaa xaaladaha nidaamka shaqaalaynta ee degaanka iyo caadooyinka, waana in laga digtoonaadaa nidaam aan waaritaan lahayn.

***3. Caqabadaha muhiimka ah ee soo isku dubbarididda soo waajaha*** waa in la tilmaamaa, waxna laga qabtaa marka ay bilawga yihiin ee lagu jiro wejiga hore ee xaaladda degdegga ah, si loogu guulaysto hab aan qaali ahayn oo horseeda waaritaan adeegyo waxbarasho oo waara, oo midaysan. Arrimaha ay ka midka yihiin tabobarka barayaasha, shahaadooyinka iyo mushaharka; manhaj iyo wixii la mid ah (buugaagta akhriska iyo agabka baridda iyo barashada), dhisidda iyo aqoonsiga dugsiyaga iyo imtixaanaadka.

***4. Siyaasad dejin iyo tababar sameyn loo dhan yahay*** waa in si wadajir ah loo dejiyaa iyada oo lala kaashanayo masuuliyiinta waxbarashada iyo ururrada kale ee dibadda ka ahba si hubanti looga dhigo isla-xiriir wanaagsan, korna loo qaado wadashaqaynta iyo ballan-qaadyada aragtida la wadaago, iyo in guud ahaanba kor loo qaado kobcinta (horumarinta) nidaamka waxbarashada.